j)— In la badjyo dakhljga gudaha ayadoo la sii wanaajinayo habsamj u maamuljidda canshuuraha, iyo iyadoo la samayn doono daraasado wax ku ool ah ee la xirii-

x)— In la dhimo defishitka miisaaniyadda dawladda ayaadoo lagu dadaalayo sidii loo baabi'in lahaa muddada dhow;

xi)- In la dhimo fidjdda naqdiga (money supply), gaar gaar ahaan deynta bankiyada la xiriirta hay'adaha dawladda iyo kan gaar ahaaneed iyadoo loo jiheynayo qaybaha wax soo saarka;

d)— In la dejiyo siyaasad miisaniyadeed iyo mid lacag isku-dubaridsan (coordinated fiscal and monetary policies).

Ugu dambeyntii, Jaalleyaal, waxaan idiinka codsanayaa inaad marka hore naga oggolaataan ku noqoshada 1aad ee Miisaaniyadda 1988, marka labaadna aad gacan igu siisaan hirgelinta isbeddelka miisaaniyadeed si aannu u gaarno himilooyinka kor ku xusan.

WASIIRKA W.M.&L.

(Dr. Cabdiraxmaan Jaamac Barre)

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER SHARCI MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 1 ee 7 Feb. 1988 Nidaaminta Heshiisyada kirada Daaraha ee lala galo Dadka ma dagganayaasha ah (Non rasidant).

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 69aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharci L. 16 ee 27.6.67, ee heshiiskii Vienna 18.4.1961

MARKUU ARKAY: Sharci L. 1454 ee 22.12.1938 ee Canshuurta Diiwaangelinta.

MARKUU ARKAY: Xeer Sharci L. 2 ee 1.8.87, Nidaaminta Heshiisyada kirada Daaraha ee lala galo dadka ma degganayaasha ah.

MARKUU ARKAY: Xeer Sharci L. 12 ee 26.9.64, Nidaamka xiriirka dhaqaalaha ee Dibedda.

MARKUU GARWAAQSADAY: Baahida loo qabo nidaaminta heshiisyada kirada daaraha ee lala galo dadka ma deg ganayaasha ah.

MARKUU TIXGELIYEY: Talo jeedinta Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta.

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiiradda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Sharcigan Soo Socda:

Qodobka 1aad

DIIWAANGELIN HESHIIS

Kireystayaasha Diblomaasiyiinta ah, Wakiillada Hay'ad aha Caalamiga ah ee martida u ah J.D.S. iyo ma degganayaasha kaleba (Non resident) ma bixin karaan lacagta daaraha ay ka kiraystaan J.D.S. Gudaheeda, haddii aan mar ka hore kireeyuhu ka diiwaangelin heshiiskaas xafiisyada Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda & Lacagta.

Qodobka 2aad

QIIMAHA KIRADA

degganayaasha ah waxaa lagu qorayaa lacag qalaad (Valuta estera convertibile).

2. Kiraystuhu wuxuu lacagtaas qalaad ka iibinayaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed ama Wakiilkiisa.

3. Bankigu wuxuu siinayaa kireeyaha Shilin Soomaali u dhigma lacagta qalaad ee heshiiska ku qoran.

4. Waxaa ka reeban labada dhinac ee heshiiska wada galay inay ku kala qaataan lacag qalaad kirada daaraha.

Qodobka 3aad

C I Q A A B

Cid kasta ee ku xad gudubta xeer sharcigan wuxuu mu taysanayaa ciqaab xarig ah oo gaaraysa ilaa 2 Sano iyo ganaax lacageed oo gaaraysa ilaa 10 jibaar lacagta la kala qataY

Qodobka 4aad

D H A Q A N G A L

Xeer Sharcigan wuxuu dhaq gelayaa laga bilaabo 1.1.88, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. iyadoo loo gudbin doono Golaha Shacbiga si sharciga loogu Rogo.

Muqdisho, 7 Feb. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 7 ee 20 Jan. 1988, Meelmarin Heshiis (Code Of Conduct For Liner Conferences)

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qod. 82aad.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 22 ee 10.10.87, oo Dawladda Soomaaliyeed ku oggolaatay meelmarinta heshiiska Qarama Midoobay ee Gaadiidka Badaha (The United Nations Gonuetion ona Code of Conduct for liner COnferences).

MARKUU GAROWSADAY: Talo soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekadaha.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Sharcigan Soo Socda:

Qodobka 1aad

Kala Qaybsashada Xamuulka (General Cargo)

Kala qaybsashada Xamuulka (General Cargo) Gaadiidka Badda waxaa lagu maamulayaa nidaamka 40%-40%-20 sida uu farayo qod. 2aad qaybta 4aad xarafka (a iyo b) ee heshiis ka Qaramada Midoobay ee Gaadiidka Badaha (The United Nations Convention on a Code of Conduct for liner Conferences) oo lagu guddoonsaday Jeneefa 6dii Abriile 1974, kana dhexeeya Wadamada xubnaha ka ah Qaramada Midoobay ee meel mariyey isla heshiiskaa oo Soomaaliya ka mid tahay sida ku cad sharci lam. 22 ee 10kii Okt. 1987.

Qodobka 2aad

AWOOD SIIN

Wasiirka W/Gaadiidka Badda iyo Dekadaha waxaa awood loo siinayaa inuu dekreeto ku magacaabi karo hay'adda Soomaaliya u maamuleysa qaybteeda kaga soo taasi karta qod. 1aad ee Xeerkan.

Qodobka 3aad

Habka Fob iyo C&F

Xamuulka Ganacsiga oo dalka la keenay ama laga dhaa finayo laguna qaadayo gaadiid badeed, waxaa lagu maamula

yaa habka FOB (Free on baard) marka dalka la keenayo iyo habka C&F (Cost and Freight) marka daika laga dhoofinayo

Qodobka 4aad

Gaadiidka Xamuulka

1. Xamuulka Dawladda iyo hay'adaha madax bannaan ee Qaranka waxaa lagu keenayaa laguna dhoofinayaa Maraa kiibta Shirkadda Gaadiidka Badda Soomaaliyeed iyo kuwa ay maamusho ama soo ijaarato.

2. Heshiisyada (L/C) ganacsatada gaarka ah oo la xir iirra keenista iyo dhoofinta xamuulka gaadiidka badda waa inay waafaqsanaadaan nidaamka ku xusan qod. 1aad ee Xeerkan.

Qodobka 5aad

R U Q S A D

Shirkadda Gaadiidka Badda Soomaaliyeed waa inay bixi saa ruqsad, markii aysan suurtagal u ahayn keenista iyo dhoofinta xamuulka ku xusan qod. 4aad ee Xeerkan.

Qodobka 6aad

C I Q A A B

Hay'ad iyo Ganacsato kasta oo ku xadgudba nidaamka ku xusan qodobka 1aad-3aad iyo 4aad ee Xeerkan, waxaa la gu Ciqaabayaa Ganaax u dhexeeya 5% ilaa 15% qiimaha ba deecada, iyadoo laga eegayo ficilka uu ku kacay lahaystuhu.

Qodobka 7aad

Wasiirka W/Gaadiidka Badda iyo Dekadaha waxaa awood loo siiyay meelmarinta Xeerkan isagoo kaashanaya Guddiga Nooliga iyo Barka Xamuulka Gaadiidka Badda.

Qodobka 8aad

Dhaqangal

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madax weynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmi ga ah ee J.D. Soomaaliya.

Muqdisho, 20.1.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 8 ee 10 Jan. 1988, Meel-marin Heshiis iyo Magacaabid Guddiga Nooliga iyo Rarka Xamuulka Gaadiidka Badda.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobkiisa 82aad.

MARKUU ARKAY: Sharci Lam. 22 ee 10kii Okt. 1987, oo Dawladda Soomaaliyeed ku oggolaatay meelmarinta heshiiska Qaramada Midoobay ee Gaadiidka Badda (The United Nations Conuention ona of conduct for liner Conferences).

MARKUU GAROWSEDAY: Habboonaanta in la abuuro gud di u xilsaaran maamulka nooliga iyo rarka xamuulka (general Cargo) gaadiidka Badda.

MARKUU KU QANCAY: Talo soo jeedinta Wasiirka Gaadii dka Badda, Dekadaha iyo Kalluumaysiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Sharcigan Soo Socda:

Qodobka 1aad

Guddiga Nooliga iyo Rarka Xamuulka (General Cargo)

Waxaa la abuuray Guddi lagu magacaabay Guddiga Noo liga iyo Rarka Xamuulka Gaadiidka Badda oo ka kooban:

1. Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Gaadiidka Bada, Dekadaha iyo Kalluumeysiga Guddoomiye.
2. Xoghayaha Joogtada ah ee W. M/iyo Lacagta Xubin
3. Xoghayaha Joogtada ah ee W. W/daha & Ganacsiga X/n
4. Xoghayaha Joogtada ah ee Rugta G. & War/daha Xubin
5. Maareeyaha Guud ee W/Dekadaha Soomaaliyeed Xubin
6. Agaasimaha Guud ee X/Dibadda ee B.G.&K.S. Xubin
7. Agaasimaha Guud ee B/Dhexe ee Soomaaliyeed Xubin

Qodobka 2aad

Xilka Guddiga

Guddiga ku xusan qod. 1aad ee Xeerkan, waxaa loo xilsaaray dhammaan hawlaha la xiriira nooliga iyo rarka xamuulka gaadiidka Badda, gaar ahaan:-

b)— Habaynta Nooliga Gaadiidka Badda;

t)— Habaynta Rarka iyo Dejinta Xamuulka Gaadiidka

Badda;

j)— La Gor_gortanka iyo heshiis la gelidda Maraakiiblayda;

x)— Ka Qayb galka Shirarka Ururrada Maraablayda iyo Rarayaasha.

Qodobka 3aad

Shirarka Guddiga

1. Guddigu wuxuu hawlihiisa ka shirayaa afartii biloodba mar, waxaana isugu yeeraya Guddoomiyaha Guddiga oo isla markaas awood u leh inuu Guddiga u qabto Shirar aan caadi ahayn hadday la habboonaato;

2. Shirka Guddigu wuxuu ansaxayaa markay ka soo qayb galaan xubnihiisa intooda badan;

3. Go'aannada Guddigu waxay ku hirgelayaan cod hal dheeri. Hadday isla_ekaadaan codadku, waxaa loo hoggaansamayaa dhinaca uu raacsan yahay codka Guddoomiyaha Guddiga.

Qodobka 4aad

Magacaabid

Hadday Guddoomiyaha ama xubin ka mid ah Guddiga ay ku timaado sabab uu la gudan_waayo xilkiisa ama la dhaliilo hawl_qabadkiisa, Wasiirka Gaadiidka Badda iyo Dekadaha isagoo la tashanaya hay'adda ama Wasaaradda qofku ka tirsan yahay, wuxuu awood u leeyahay inuu magacaabo beddelkiisa.

Qodobka 5aad

Xoghaynta Guddiga

Guddigu wuxuu yeelanayaa Xoghayn uu magacaabo Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha isagoo tixgelinaya tala-soo_jeedinta Guddoomiyaha Guddiga.

Qodobka 6aad

Waajibaadka Xoghaynta

Waajibaadkeeda guud ka sokow, waxay Xoghayntu u xil_saaran tahay:_

b)— Qorista Garnaqaska Sinrarka Guddiga (Process Verbal dele Seduse), iyadoo lagu guurinayo dhwaan gaar ah, ayna wada saxixayaan Guddoomiyaha Guddiga iyo Xoghayaha Sirrka;

c)— Qaabinta, Kaydinta iyo Xarijdaadda qoraallada, dokumentiga iyo Dhwaanada Guddiga;

j)— Tiraakoobka Xamuulka iyo Noolaga;

x)— Xaliinta go'aannada Guddiga.

Qodobka 7aad

Go'aannada Guddiga

Go'aannada Guddiga waxaa ansixinaya Wasiirka Gaadiidka Badda iyo Dekadaha oo awood u leh:-

— inuu dib ugu celiyo Guddiga isagoo u tilmaamaya nuqdadana tiraftirka u baahan;

— inuu qayb ama gebi ahaanba beddelo, ama war ku kordhiyo go'aanka Guddiga.

Qodobka 8aad

Waajibaadka Wasiirka

1. Wasiirka Gaadiidka Badda iyo Dekadaha waa inuu taladiisa u soo gudbiyaa Guddiga ku xusan qodobka 1aad ee Xeerkan 15 (Toban iyoshan) maalmood gudahood, laga bilaabo maalinta la soo gaarsiiyay go'aanka Guddiga.

2. Haddii aanmaado waqtiga ku xusan xubinta 1aad ee qodobkan, waxaa aamusnaanta Wasiirka loo qaadanayaa inuu oggolaaday, wuxuuna go'aanka Guddigu noqonayaa dhaqan-gal.

Qodobka 9aad

Xarunta Guddiga

Xarunta Guddiga Nooliga iyo Rarka Xamuulka Gaadiidka Badda waxay noqonaysaa magaalo-madaxda JDS (Muqdisho), wuxuuna laamo ku yeelan karaa Gobollada iyo Degmooyinka Dalka, hadday la habboonaato.

Qodobka 10aad

Dhaqan Gal

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho, 20.1.1988

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 9 ee 8 Feb. 1968, Qaybta Dalxiiska iyo Huteelada Was. Warfaafinta H. Dadweynaha.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82 ee Dastuurka Jam Dim. Soomaaliya;

ISAGOO TIXGELINAYA: Baahida loo qabo dejinta Siyaasadda iyo Nidaamka Dalxiiska iyo Hoteellada, iyadoo loo arkay in ay yihiin ila-dhaqaale ee muhiim u ah soona gelin karta Dalka lacag adag.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Qaybta Dalxiiska iyo Hoteellada ee Wasaaradda Warfaafinta Hanuuninta Dadweynaha iyo Dalxiiska waxay u xilsaaran tahay:

1. Inay fuliso Siyaasadda iyo Barnaamijka XHKS ka leeyahay xagga Dalxiiska iyo Hoteellada.

2. Inay dejiso Siyaasadda qorshaha horumarinta Dalxiiska Soomaaliyeed.

3. In ay kor u qaado, horumarisana tayada Hoteellada, qaarka, Makhaayadaha iwm.

4. In ay maamusho Dukaamada Canshuur-dhaafka ah (Free **Duty Shops**) ee Dalka.

5. Inay la taliso Hoteellada gaarka ah, diiwaan geliso, tirakoobto, darajo kala siiso iyo in ay kormeerto, si loo hubiyo inuu adeegoodu ku saleysan yahay Siyaasadda iyo barnaamijka XHKS iyo Dawladuba ay ka leeyihiin Dalxiiska iyo Hoteellada.

6. In ay bixiso ruqsadaha safarrada gaarka ah (Travel Agensies, Tour Operators), dhisidda Hoteellada iyo ruqsadda bilicdasan ee Dalxiiska ku habboon, sida Xeebaha, Ilaha biyaha kulul iyo Buuraha biliicsan iwm.

7. In ay sameyso xirmooyin-ugaareedka (National Par-

ks), ilaalisana deegaannada iyo bilicdooda, dhaqamada Soomaaliyeed iyo inay uruurjso kaydisana arkolojiyada.

8. In ay abuurto Machadyo lagu barto mihnadaha Dalxiiska iyo Hoteellada, si loo helo kawaadir heer kasta leh.

9. In ay dhiirigeljso soo gelitaanka iyo joogitaanka Dalka Ajnabiga ah.

10. In ay sameyso xeerar lagu horumarinayo Dalxiiska iyo Hoteellada Dalka.

Qodobka 2aad

Madaxweynaha J.D.S. wuxuu soo saarj doonaa xeer-nidaamiye lagu faah-faahjn doono xeerkan, jsagoo dhegeystay tala soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Warfaafjnta iyo Dalxiiska.

Qodobka 2aad

Waxaa la baabi'iyey xeer kasta oo ka soo horjeeda xeerkan ama aan la socon karjn.

Qodobka 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu faafjn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1.1.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. Lambar 10 Tr. 14 Feb. 1988

Meel marin Heshiiska wax wada qabsi xagga Farsamada iyo Fanka oo dhex maray Wakaaladda Filimada Soomaa liyeed iyo Hay'adda madax Banaan ee Maamulka Shinee madaha Dalka Talyaaniga.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad, Faqralda 5aad ee D/ka

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Dis. 1984, kuna saabsan wax ka bedelidda Dastuurka.

MARKUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaarad-da Warfaafinta, Hanuuninta Dadweynaha & Dalxiiska.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyay Heshiiska wax wada qabsi xaga Farsamada iyo Fanka ee dhexmaray Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed iyo Hay'adda madax banaan ee Maamulka Shineemadaha Dalka Talyaaniga, oo lagu kala saxiixday ma-gaalada Muqdisho 12kii Oktoobar 1987kii.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 14 Feb. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

QAYBTA M/DHULKA RASMIGA

BEDDELAAD NAADO DHU

Ku: XAFIISKA FAAFINTA SHARCIYADA RASMIGA AH.
OG: WAAXDA FARSAMADA DHULKA.

Waxaa idin ogoysiineynaa la J/le Suuban Geesey Guuleed, oo soo codsaday Tr. markay ahayd 19.11.66, cad dhu ku yaal Deg. W/dhiigley, loona oggolaaday, Qaabkiisu ahaa Tra pesiodale Addimihiisuna yihiin mt. 40,33 e l'alterna 45 kuna fadhiya mq. 1.642,50/ dhulka asaga ahaa waxaa loola waree gay dan guud awgeed.

Waxaa loogu beddelay cad dhul oo ku yaal Deg. C/csiis, Qaabkiisu Rettangolare Addimihiisuna yihiin mt. 40x30 kuna fadhiya mq. 1.200/ sida awgeed Naadadii Hore oo lagu soo diray warqadda lam. ahaa BF/1626/163/64 ee 15 Feb. 1967.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 192/191.

Koonfur Waxaa ka xiga: W/Bendar Qaasim

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 183

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 16 Mar. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Dr. Xasan Maxamed Sebriye

L. 107

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Muxuddiin Maxamuud Maxamed uu u soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 9.11.61 uu ku soo weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. C/Casiis Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20x30 kuna fadhiya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 265

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 270

Bari Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga oo D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi kraa muddo (30) sodon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 30 Mar. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 108

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Ibraahim Xersi.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/W. Lam. 0657852 kuna jirto lacag dhan sh.so. 10.000 kuna qoran magaca J/le Sakariya Maxamed Cabdi sida ku cad warqadda Lam. 1200 iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lam. 0657852. Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xaruntа ku na jirto lacag dhan sh.so. 10.000 kuna qoran magaca Jaalle Sakariya Maxamed Cabdi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xaruntа in ay siiso J/le Cabdi Ibraahim Xersi lacagta cadeyntu tah ay sh.so. 10.000 oo ah bedelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bi laabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 31.1.88.

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 109

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Xasan Geedi;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lr. [illegible] kuna jirto lacag dhan Sh.So. 8.722.75 kuna qoran magaca Jaalle Cabdi Xasan Geedi sida ku cad warqadda Lr. 000225 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1963

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 26317 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 8.722.75 kuna qoran magaca Jaalle Cabdi Xasan Geedi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso Jaalle Cabdi Xasan Geedi lacagta cadadeetu tahay Sh.So. 8.722,75 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 3.2.88

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 110

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Daahjir Maxamuud Cosoble;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu jumay Jeeg War. Lam. 0044672 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Barbara kuna jirto lacag dhan Sh.So. 10.000 kuna qoran magaca Jaalle Daahjir Xasan Guuleed sida ku cad warqadda Lam. 1564 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xisaabaadka Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0044672 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Barbara kuna jirto lacag dhan Sh.So. 10.000 kuna qoran magaca Jaalle Daahjir Xasan Guuleed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Barbara in ay siiso Jaalle Daahjir Maxamuud Cosoble lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 10.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.2.88

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 111

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Deeqa Xasan Cadow;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lr. 4165 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 9816 kuna qoran magaca Jaalle Deeqa Xasan Cadow sida ku cad warqadda Lr. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 4165 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 9816 kuna qoran magaca Jaalle Deeqa Xasan Cadow.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir **in ay siiso Jaalle** Deeqa Xasan Cadow lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 9816 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran **markay ka soo** wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax **ishortaag ah laga keenin.**

Muqdisho, 13.2.88

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 112

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdifitax Maxamed Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0927947 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Yuusuf Cilmi sida ku cad warqadda Lam. 203 Tr. 30.12.87 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0927947 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Yuusuf Cilmi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad in ay siiso Jaalle Cabdifitax Maxamed Yuusuf lacagta ugadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Taafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.1.88

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 113

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Abuukar Maxamed Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg Lambar. 0288643-0288323 lagana sameeyey B.G.K.S. Laanta Qoryoolay kuna jirto mjdkiiba lacag dhan Sh.So. 100.000 isugeyn Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Axmed sida ku cad warqadda Lam. 1904 B.G.K.S. Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War Lam. 0288643-0288323 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryoolay kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryoolay in ay siiso Jaalle Abuukar Maxamed Yuusuf lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maaliinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.2.88

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 114

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Abuukar Maxamed Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0785183 lagana sameeyey B.G.K.S. Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Mukhtaar Abuukar Sheekh sida ku cad warqadda Lam. 1904 ee Bangiga Ganacsiga Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0785183 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Mukhtaar Abuukar Sheekh.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad in ay siiso J.le Abuukar Maxamed Yuusuf lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.2.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 115

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Abuukar Maxamed Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 728602 laga sameeyey B.G.K.S. Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Calj Aadan Yaxye sida ku cad warqadda Lam. 1904 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qaybta Xjs-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 728602 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Calj Aadan Yaxye.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J.le Abuukar Maxamed Yuusuf lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax jshortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.2.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 116

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Abuukar Maxamed Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0288815 lagana sameeyey B.G.K.S. Laanta Qoryoolay kuna jirto jacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Cali Macalin sida ku cad warqadda Lam. 1904 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qaybta Xisaabaadka Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0288815 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryoolay kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Cali Macalin.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryoolay in ay siiso J.le Abuukar Maxamed Yuusuf lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.2.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 117

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Nuur Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0656800 laga sameeyey B.G.K.S. Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.000 kuna qoran magaca Jaalle Cabdi Nuur Yuusuf sida ku cad warqadda Lam. 2051 ee B.G.K.S. Laanta **Xarunta;**

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0656800 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.000 kuna qoran magaca Jaalle Cabdi Nuur Yuusuf.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Cabdi Nuur Yuusuf calagta cadadee du tahay Sh.So. 22.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.2.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 118

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/41/87 Hargeysa, 2.12.1987

UJ: Degreeto cusboonaysiin J.W. lumay lambarkiisu yahay 0439751 ee 2.8.87 Sh.So. 37.800.00 ku qornaa Cabdi Cumar Faarax laga sameeyey Laanta laad ee Xamar.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ah codsiga ee uu soo qortay Cabdi Cumar **Faarax** ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee ku taariikhaysan 15.8.87 ee uu Bangigu u kala diray Jaamiihiisa iyo xisaabaha Guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka **Hargeysa** ee lambar yahay 001164 ee 30.11.87 ee uu Bangigu ku soo caddeeyey in uu Jeeggaasi Wareega ee lumay uu leeyahay Astaamaha Ujeedada sare ku wada xusan;

MARKUU ARKAY: In lacagta Jeeggaasi Wareega ee lumay ku **qornayd** ee dhan 37.800.00 uu iska leeyahay ninka la yiraa Cabdi Cumar Faarax;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee sco baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo, loona cusboonaysiiyo Cabdi Cumar Faarax, cusboonaysiintana gacanta laga saaro Cabdi Cumar Faarax ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Hargeysa in uu nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdhiisa si ciddii haysata Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

(Maxamed Yuusuf Caynaan)

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

(Axmed Waaxs Maxamed)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

MGT/61/88 15.2.1988

UJ: Baarin Jeegagga Wareega ee jumay.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeegagga Wareega ee lumay;

MARKUU ARKAY: In ay lumeen Jeegagga Wareega ee hoos ku cad;

MARKUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. ee sharci Lr. 2 ee 9.9.1969kii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee Lamparradoodu kala yihiin:

1) 1047676, ee Xambaarsanaa Sh.So. 100.000 ee Tr. 21.12.87 Laanta Burco.
2) 1047677, ee Xambaarsanaa Sh.So. 100.000 ee Tr. 21.12.87 Laanta Burco.
3) 0010983, ee Xambaarsanaa Sh.So. 19.800 ee Tr. 21.12.87 Laanta Burco.
4) 1047678, ee Xambaarsanaa Sh.So. 100.000 ee Tr. 21.12.87 Laanta Burco.

ku wada qornaa J.le C/khaalaq Cabdiwahaab Guuleed, kana jumeen ninka ku qoran.

WUXUU AMRAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco uu siiyo C/khaalaq Cabdiwahaab Guuleed Lacagta dhan 319.800 Sh.So. oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee aan kor ku soo xusnay ee lumay. Kadib markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 20 casho gudahood laga billaabo maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. haddii aan inta ka horraysa la keenin wax ishortaag ah.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco

(Dr. Abokor Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco

(Xuseen Xasan Sugule)

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HARGEYSA

UJ: DEGREETO CUSBOONAYSIIN J/WAR. LUMAY LAMBAR YAHAY 0601141 ee 23.1.88 sh.so. 50.000 Laga Sameeyey L/1aad ee Hargeysa ku qornaa Ibraahih Muuse Max/ed

MARKUU ARKAY: Arjiga ah codsiga ee uu soo qortay Ninka la yiraa Daahir Ismaaciil Yuusuf ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo J/War. ee lumay ee kor ku xusan.

MARKUU ARKAY: Taarka Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa ee uu Bankigu u kala diray Laamiihiisa iyo Xisaabaha Guud.

MARKUU ARKAY: Xaashida Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa ee lambar yahay 054 ee ku Tr. 13.2.88, ee uu Bankigu ku soo cadeeyey in uu J/War. ee Lumay ee kor ku xusani uu iska Leeyahay Astaamaha ujeedada ku xusan.

MARKUU ARKAY: In Lacagta J/War. ee lumay ee kor ku xusan uu iska leeyahay Ninka la yiraa Daahir Ismaaciil Yuusuf.

MARKUU ARKAY: Qod 69.70 ee xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In J/War. ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo loonacusboonaysiiyo ninka la yiraa Daahir Ismaaciil Yuusuf cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama cidii awood buuxda ka haysta muddo 15 maalmool gudahood ah.

W A X A A

La farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa in uu Nuqulka go'aanka ku dhejiyo Bankiga Iridhiisa si cidii haysata J/War. ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 15.2.88.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. W/G/Hargeysa
Maxamuud Maxamed Ismaaciil

Kaaliyaha Maxkamadda Gob. W/G/Hargeysa

MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO

MGT/32/88 Tr. 26.1.88

UJEEDDO: Baafin Jeegga Wareega ee lumay ee lam. yahay 0360399 ee Tr. 3.8.87, laga sameeyey L/laad Hargeysa.

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeegga Wareega ee lumay;

MARKUU ARKAY: Inuu lumay Jeegga Wareega ee Lr. 0360399 ee Sh.So. 50.000;

MARKUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L/Burco;

MARKUU ARKAY: Qod. 69, D.L. Sharciga Lam. yahay 2 ee 9.9.1965.

WUXUU XEERAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega ee Lambarkiisu kor ku xusan yahay lagana sameeyey Laanta laad ee Hargaysa, kuna qornaa Cabdi Caateeye Shire, kuna jirtay lacag dhan Sh.So. 50.000 kana lumay Aadan X. Maxamed Cabdi.

WUXUU AMRAYAA

WUXUU AMRAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed uu siiyo Aadan X. Maxamed Cabdi lacagta dhan 50.000 Sh.So. oo ah bedelkii Jeegga Wareega ee lumay, ee aanu kor ku soo xusnay, kadib markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 20 casho gudahood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga a ee J.D.S. haddii aan intaa ka horaysa la keenin wax ishortaag ah.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco

(Dr. Abokor Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco

(X. X. Sugule)

L. 122

MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO

MGT/30/88 Tr. 26.1.88

UJEEDDO: Baafiin Jeegagga Wareega ee Lr. yahay 1.0008585 ee Sh.So. 20.000 ku qoran Cilmi Faarax Hure la sameeyey Tr. 1/87 laga sameeyey L. Burco;

2.0620020 ee Sh.So. 100.000 ku qoran Faadumo Maxamed Ismaaciil la sameeyey Tr. 25.41987 laga sameeyey L. Burco.

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeegagga Wareega ee Lumay;

MARKUU ARKAY: In ay lumeen Jeegagga Wareega ee aan kor ku soo xusnay;

MARKUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco;

MARKUU ARKAY: Qod. 69, D.L. Sharciga Lam. yahay 2 ee 9.9.1965.

WUXUU XEERAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee Lambaradoodu kor ku xusan yihiin oo laga sameeyey Laanta Burco, kana lumeen Aadan X. Maxamed Cabdi.

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco ay siiso Aadan Xaaji Maxamed Cabdi Lacagta dhan Sh.So. 120.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee lumay, ee aan Ujeedada sare ku soo xusnay, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 20 casho gudahood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii aan intaa ka horeysa la keenin wax is-hortaag a .

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco
(Dr. Abokor Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco
(X. X. Sugule)

L. 123

MAXKAMADDA G. W/GALBEED

MGH/21/87 Hargeysa, 19.8.87

UJ:- Degreeto cusboonaysiin Jeegga Wareega ee lumay lambar yahay 743073 jacagtiisu dhan tahay 20.000 ku qornaa Dayib Amiin Saleebaan laga sameeyey Laanta Boorama ja sameeyey 15.7.87.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Maxamuud Ibraahim Xasan ku taariikhaysan 15.8.87, ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu Laamihiisa u kala dirya ee ku taariikhaysan8.8.87;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa ee lambar yahay 000741 ee ku taariikhaysan 17.8.87, ee uu Bangigu ku caddeeyey in uu Jeeggaasi Wareega ee lumay uu leeyahay astaamaha ujeedada sare ku xusan;

MARKUU ARKAY: In Lacagta ku qoran Jeeggaasi Wareega ee lumay uu iska leeyahay ninka la yiraa Maxamuud Ibraahim Xasan;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee lumay ee ujeedada ku xusan, loona cusboonaysiiyo Jaalle Maxamuud Ibraahim Xasan, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga oma ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood a , ka dib maalinta Faafinta Rasmiga ah lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa in uu nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaasi Wareega ee lumay ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

OGEYSIIN WICITAAN SHIR-WEYNE AAN CAADI AHAYN EE SAAMILEYDA, SHIRKADDA SOMITFISH, S.P.A; OO SALDHIGGEEDU YAHAY MUQDISHO, HANTIDEEDUNA TAHAY U.S.D. 1.000.000.

Dhammaan saamileyda Shirkadda kor ku xusan, xubnaha guddiga maamulka iyo guddiga baarista oo idil, waxa la ogeysiinayaa, inoona wacay inay ka soo qayb-galaan shirka guud ee aan caadiga ahayn (assemblea straordinarja), oo lagu qaban doono Xarunta isla Shirkaddaas ee Muqdisho, 21ka bisha Maarso 1988, saacaddu markay tahay 10, shirka kowaad; shirka labaadna 30ka Maarso 1988, isla waqtiga iyo meesha (Xaruntaas); oo looga hadli doono, laguna go'aamin doono arrimaha dooda ee hoos ku qoran:

1. Baabi'inta (liquidazione) Shirkadda, sabab la xariirta deynta oo ka badatay hantideeda saddex-laabkeed; owgeed;

2. Magacaabid qaarajiye (liquidatore) Shirkadda;

3. Habka baabi'inta Shirkadda;

4. Bixinta deynta Shirkaddu ay qabto;

5. Soo jeedin la wareegidda (assuntore dei debiti) deynta iyo hantida Shirkadda in loo oggolaado, laguna wareejiyo Dowladda Soomaaliyeed;

6. Waxyaalo kala duwan iyo wixii khuseeya arrimahooda.

GUDDOOMIYAHA SOMITFISH

Somali High Seas

Muqdisho, 18.2.1988

L. 121

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qoray Jaalle Caasha Cali Sh. Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: in uu lumay Buug Kayd Lam. 29274 kuna jiro lacag dhan Sh.So. 70.000 kuna qoran magaca J.le Caasha Cali Sh. Axmed sida ku cad warqadda Lam. 000314 Tr. 18.2.88 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baaqi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 29274 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jiro jacag dhan Sh.So. 70.000 kuna qoran magaca Jaalle Caasha Cali Sh. Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Caasha Cali Sh. Axmed lacagta cadadeedu ta ay Sh.So. 70.000 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.2.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـدة الرسميـة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad, Muqdisho 15ka Maarso 1988, L. 1 R 3

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta **Maamulka Faafinta Rasmiga ah** Lacagta waxaa lagu bixinayaa **Xafiiska** Canshuuraha ee

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

SHARCI L. 6 ee 14 Feb. 1988, Oggolaansho Heshiis Amaaheed ee dhex maray J.D.S. Sanduuqa H/ta Sacuudiga. Bog; 182

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER SHARCI L. 2 ee 24 Feb. 1988, Dhismaha Bankiga Iskaashatooyinka Soomaaliyeed » **183**

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 11 ee 14 Feb. 1988, Meel marin Heshiiska Amaaheed ee dhex maray J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga. » 186

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 12 ee 13 Feb. 1988, Magacaabid Sarkaal loo wakiilshay kharajka Miisaaniyadda Sannadka 1988. 187

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 13 ee 23 Dis. 1987, Magacaabid J/le Hoos ku qoran » 188

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN LAGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH.—

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 10.9.86, Naado Dhul J/le Saciida Cabduraxmaan Cali L. 124 » 191

DAHLADDA HOOSE EE MUQ. 16.3.88, Naado Dhul J/le C/llahi Rooble Shadoor L. 125 » 192

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 10.9.86, Naado Dhul J/le Maxamed Cumar Jaamac L. 126 » 193

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 10.9.86, Naado Dhul J/le Abuukar Sheekh Xuseen L. 127 » 194

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 22.9.86, Naado Dhul J/le Xabiiba Aadan C/raxmaan L. 128 » 195

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 17.6.86, Naado Dhul J/le Ciisaadiin Xaaji Shiikhey L. 129 » 196

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 17.6.86, Naado Dhul J/le Cumar Cali Cumar L. 130 » 197

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 17.6.86, Naado Dhul J/le Cali Cawad Maxamed L. 131 » 198

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 8.8.86, Naado Dhul J/le Cali Maxamed Qaasim L. 132 » 199

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 8.8.86, Naado Dhul J/le Maryan Xaashi Xuseen L. 133 » 200

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.2.88 Lumid Jeeg War. L. 0039584 ku qoran Maxamed Cali Axmed L. 134 » 201

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 8.8.86, Naado

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 22.2.88, Lumid J/War. L. 0982172 ku qoran » 203
Axmed Cali Sagaar L. 136

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21.2.88, Lumid J/War. L. 007974 ku qoran » 204
Maxamed C/raxmaan Sh. Muuse L. 137

MAXKAMADDA GOB. W/GALBEED, 13.2.88, Lumid J/War. L. 0015473 ku qoran Cali » 205
Haybe Wacays L. 138

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.2.88, Lumid J/War. L. 0307494 ku qoran » 207
Maxamed Shiil Cabdulle L. 139

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.2.88, Lumid J/War. L. 0267545 ku qoran » 208
Maxamed Shiil Cabdulle L. 140

SOMALI BOTILING COMPANY, HARGEYSA, OGEYSIIS SHIR GUUD EE SAAMILEY L. 141 » 208

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 27.2.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdi Nuur Cali iyo Nuur Xasan Cali L. 142 » 209

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 2.3.88, Lumid Jeeg War. L. 25434 ku qoran Cabdullaahi Yuusuf Cariif L. 143 » 210

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 2.3.88, Lumid Buug Kayd L. 18371 ku qoran Shaakir Xuseen Maxamuud L. 144 » 211

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 6.3.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cali Axmed Jeele L. 145 » 212

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 19.1.88, Lumid Jeeg War. L. 0033270 ku qoran Jaamac X. Aadan Faarax L. 146 » 213

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 9.2.88 Lu-

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 8.3.88 Lumid mid Buug Kayd L. 995 ku qoran Calj Cawl Xuseen L. 148 » 215

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 6.3.88, Lumid ɔeeg War. L. 1079681 ku qoran Cabdulqaadir Shire Cabdulle L. 149 » 216

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci Lambar 6 Tr. 14 Feb. 1988, Oggolaansho Heshiis Amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga «Mashruuca Taageerada Qeybta Beeraha».

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshana Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la Oggolaaday Heshiis Amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga, kuna saabsan amaah Lacageed oo dhan sh.so. 30.000.000 oo loogu talagalay Mashruuca Taageerada Qeybta Beeraha.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Riyaad,Boqortooyada Sacuudi Carabiya, Taariikhdu markay ahayd 3.10.1987.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay tilmaamayaan heshiiska ku qoran qod. 1aad ee sharcigan waxaa dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. Iyo Qodobbada Axdigan.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyay in uu Meel mariyo Heshiiskan.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 14 Feb. 1988.

QEYBTA LABAAD

X E E R

Xeer Sharci Lambar 2 ee Tr. 14 Feb. 1968, Dhismaha Bankiga Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA J.D.S

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee 16ka Setember 1968, kuna saabsan oggolaashaha Dhismaha Bankiga Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida Dhaqaale, deg degga ah, ee loo qabo Dhismaha iyo hawlgalka Bankiga sare ku Tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: Oggolaashaha Golaha W/rada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Sharci ee Soo Socda:

Qodobka 1aad

DHISMAHA BANKIGA

1. Waxaa la dhisay Bankiga Iskaashatooyinka Soomaaliyeed oo hadda wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono Bankiga.

2. Xaruntа Bankigu waa Muqdisho wuxuuna laamo ku yeelan karaa Dal'ka gudihiisa iyo dibeddiisaba.

3. Bankigu waa hay'ad madax bannaan oo leh shakhsi yad qaanuuni ah.

Qodobka 2aad

UJEEDDOOYINKA

Ujeeddooyinka Bankigu waxa ay yihiin, Guud ahaan, u adeegidda, taakuleynta iyo ka qayb qaadashada xaqiijinta himilooyinka Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed ee J.D.S. Gaar Ahaanna.

a) U fidinta amaah iyo tashiilaad kale beeraleyda, xoolo dhaqatada, kalluumeysatada, warshadleyda, farshaxannada iyo was soo saarayaasha xubnaha ka ah ururada Iskaasha

b) Taakuleynta ururada iyo Iskaashatooyinka Beeraha Xoolaha, Kalluumeysiga, Farshaxanka iyo kuwa adeegyada ee dhaqaale ama bulsho, iyadoo loo fidinayo maalgelin mashaariicdooda.

t) Maalgelinta, hubsasho wax ku oolnimadooda dhaqaale kaddib, mashaariicda beeraha, xoolaha iyo kalluumeysiga si Bankigu uga qeyb qaato sare u qaadidda tacab soo saarka aagaggaas.

j) Ka qayb qaadashada maalgelinta warshadaha farsameeya miraha beeraha, xoolaha iyo kheyraadka badda.

Qodobka 3aad

XILALKA GUUD

Bankigu, isagoo xaqiijinaya himilooyinka loo dhisay Ilaaliinayan xuduudda sharciga, xeer nidaamiyihiisa, shuruucda Dalka, sharciga iyo tilmaamaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, wuxuu qabanayaa hawlaha la xiriira furidda xisaabaadka, qabashada keydka, bixinta damaanadaha iyo dhammaan hawlo bankiyeedka kale ee caadiga ah.

Qodobka 4aad

X U B N A H A

Xubnaha Bankigu waxa ay ka kooban yihiin:

1. Shirweynaha Guud ee Saamileyda.
2. Guddiga Maamulka.
3. Agaasimaha Guud.

Habka magacaabidda xubnaha kor ku tilmaaman, awood daha ay kala leeyihiin, qaabka uu ku guntamayo kulanka Shirweynaha Guud iyo kan Guddiga Maamulka, hawgalkooda iyo go'aannadooda, waxaa lagu tilmaamayaa xeer nidaamiyaha Bankiga.

Qodobka 5aad

S A A M I L E Y D A

1. Saamileyda Bankigu waxay ka kooban yihiin Ururada Qaranka ee Iskaashatooyinka Beeraha, warshadaha yar yar iyo farshaxanka, kalluumeysiga, quudka iyo adeegga, xoolaha, keymaha iyo xijiga, gaadiidka iyo dhismaha Iyo Ururada heer gobol iyo Degmo.

2 Waxaa kaloo saami ku yeelan kara Ururrada Iskaa-

oo dhismi doono.

3. Bankigu wuxuu saamiyo ka iibin karaa, marka dan loo arko, Bankiyada iyo Hay'adaha maaliyadeed ee Qaranka.

Qodobka 6aad

RAASUMAALKA

1. Raasumaalka Bankigu waxa uu ka kooban yahay saamiyo aan tiradoodu koobneen oo u kala baxa heerarka (A) (B) (T) iyo (J).

2. Qiimaha heerarka kale duwan ee saamiyada rasumaalka ugu norreeya, saamiyada dhammeystiridooda, shuruudaha iyo qaabka bixintooda, waxaa lagu caddeynayaa xeer Nidaamiyaha Bankiga.

Qodobka 7aad

XISAABAADKA

Maamulka Xisaabaadka Bankiga oo isugu jira xisaabaadka Sannad Maaliyadeedka, xisaab xirka, macaashka iyo khasaaraha, keydka iyo hanti dhowrka Bankiga, waxaa lagu caddeynayaa xeer nidaamiyaha Bankiga.

Qodobka 8aad

XEER NIDAAMIYE

Madaxweynaha J.D.S. Isagoo dhegeystay soo jeedinta Gud doomiyaha Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed, wuxuu soo saarayaa xeer nidaamiye dhammeystiraya, laguna fulinayo xeerkan sharci.

Qodobka 9aad

D H A Q A N G A L

Xeerkan sharci wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda. Isla markaas waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 24 Feb. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 11 Tr. 14 Feb. 1988 Meel marinta Hesniiska Amaaheed ee dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga.

MADAXWEYNAHA J.D.S

MARKUU ARKAY: Qod. 67, Faqradda 5 iyo Qod. 82, Faqradda 4 ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka bedelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar ee oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday meel marinta heshiiska ujeeddada ku Tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la meel mariyo heshiiskan.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meel mariyay heshiiska amaaheed ee dhexmaray J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga oo lagu ka la saxiixday magalada Riyaad ee Boqortooyada Sacuudi Carabiya, looguna talo galay mashruuca taageerada qeybta Xeeraha.

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Dalka J.D.S. Awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 14 Feb. 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 12 ee 13 Feb. 1988, Magacaabid Sarkaal loo wakiishay kharashka Miisaaniyadda Sannadka 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Dekreetada Sharciga ee soo baxay 29kii Dishember 1961, Lr. 2 Amarka Maamulka Xisaabaadka.

ISAGOO ARKAY: P.D.R. 20 Marso 1965 L. 13 Xeer nidaami nta iyo Abaabulidda guddiga Wasaaradda iyo Xafiisyada la xiriira iyo wixii beddelaad gashay.

MARKII LA GAREYSTAY: In loo baahan yahay Sarkaal Shaqaale loo wakiisho Maamulka Lacagta Madaxtooyada J.D.S. iyo dhammaan xubnaha kala duwan ee soo raaca:

Agaasimayaasha Guud-Xafiisyada, iyo qeybaha Maamulka ee lagu tilmaamay sharcgii Lr. ahaa 1 ee 4.1.68dii, iyadoo uu siinayo awood Maamulidda, qardeysiga ku tala gelida kharashka shaqo socodsiinta, iskuduwidda iyo soo bandhigidda xisaabaadka la gareysan karo kuna saabsan qareedada (soo hormarin) la sameeyo, ogolaashada Ruq sadda Dhoofka Safarrada Dibedda iyo gunnadaba.

D E K R E E T A:

Sarkaal la yiraahdo J/le Maxamed X. Cabdi (Fartaag) Darajo A/2 Agaasimaha Guud ee Maamulka Lacagta MJDS. Waxaa loo magacaabay Sarkaal wakiileed kharashaka Miisaaniyadda Sannadka ee Lacagta MJDS, iyo xubnaha raacsan ee kor lagu soo xusay, laga bilaabo 1da Janayo 1988.

Dekreetadan waxay dhaqan galeysaa haddatan isla mar kaana waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 13 Feb. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
J/le Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 13 ee 26 D.s. 1987, Magacaabid.

WASAARADDA SHAQADA IYO ARRIMAHA BULSHADA MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad (xub. 1aad) ee Dastuurka J.D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Xeerka Lr. 46 ee 6.9.79, oo lagu dhaqan geliyay Dastuurka J.D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 6 ee 12.2.80, ee Maamulka Golayaasha Shacbiga Degaannada Gobollada iyo Deg. Dalka J.D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 28 biis, ee 21.2.76, kaasoo lagu dhaqo Shaqaalaha Rayadka ah ee D/H. ee Muqdisho.

ISAGOO ARKAY: Qaab dhismeedka Cusub ee D/Hoose ee Muqdisho, ee ku xusan Warqadda Lr. Yahay DH/MG/7320/87, ee 19.12.87.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talo jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho, ee la xiirirta magacaabidda madaxa Maamulka D/Hoose ee Xamar, (Agaasimayaasha Guud & Agaasima yaal Waaxeed), kuna xusan warqadda Lr. yahay DH/MG 7321/87, ee 19.12.87.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo Taariikhda Xeerkaan, waxaa loo magacaabay J/leayaasha hoos ku taxan xilalka ku hor qoran:-

Lr. MAGAC SADDEXAN:

1. J/le Maxamed Cabdulle Faarax (Sh. Gaduud) — Agaasimaha Guud ee Maaliyadda.

2. Jaalle Cali Xaaji Muuse Ciise. — Agaasimaha Guud ee Arrimaha Bulshada.

3. Jaalle Maxamed Cabdulle Cali (Garjeex). — Agaasimaha Guud ee Ganacsiga iyo Warshadaha

— Agaasimaha Guud ee Farsamada.

5. Jaalle Iikar Amiin Iikar.

— Agaasimaha Guud ee Maamulka.

WASAARADDA SHAQADA IYO ARRIMAHA BULSHADA

Lr. MAGAC SADDEXAN XILKA LOO MAGACAABAY

6. Jaalle Cabdulqaadir Abshir Maxamed.

— Agaasimaha Waaxda Maamulka Lacagta & Xis.

7. Jaalle Dr. Cali X. Cabdulle Faarax.

— Agaasimaha Waaxda Canshuuraha

8. Jaalle Maxamuud Aw-Xasan Cige.

— Agaasimaha Waaxda Suuqyada.

In Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku Xusan la kansal ga reeyo loona cusboonaysiiyo Ninka la yiraa C/Qaadir Axmed Cilmi, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama cid dii awood buuxda ka haysta muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib marka Faafinta laga sameeyo.

W A X A A

La Farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bankiga Iridi hiisa, si cidii haysata Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Hargeysa, 14.5.88.

K.S. Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. W/G/Hargeysa.

Maxamed Yuusuf Caynaan

Kaaliyaha Maxkamadda Gob. W/Galbeed Hargeysa

Maxamed Cabdi Kaahin.

MAXKAMADDA GOBOLKABANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Yusur Jaamac Shaacuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd Lr. 19351 ee laga sameeyey Laanta Xaruntа ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Yusur Jaamac Shaacuur sida ku cad warqadda Lam. 00903 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 19351 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 672.560.46 kuna qoran magaca Yusur Jaamac Shaacuur.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Yusur Jaamac Shaacuur lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 672.560.46 oo ku qoran Buug Kayda kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 8.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGG
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 329

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xasan Cosoble Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 5 Jeeg War. ee hoos ku qoran, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1aad, 2aad iyo 3aad sida ku cad warqadda lam. 5343 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

J.W.No.	Taariikh	Sh.So.	Magaca	Laanta
1156354	9.6.88	100.000	Xasan Cosoble Yuusuf	1aad
1156351	9.6.88	100.000	Xasan Cosoble Yuusuf	1aad
1096550	9.6.88	100.000	Axmed Shariif Cabdalla	3aad
1125917	9.6.88	100.000	Cabdirisaaq Sh. Nuur	2aad
1156459	9.6.88	100.000	C/casiis C/raxmaan Xaaji	1aad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor ku qoran lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1aad, 2aad iyo 3aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 500.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha 1aad, 2aad iyo 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Xasan Cosoble Yuusuf lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 500.000 oo ku qoran Jeegagga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 330

BEDDELAAD SHIR SAAMILEY WARSHADDA KIIMIKADA SOOMAALIYEED (BAYL)

Waxaa dhammaan Saamileyda Shirkadda Warshadda Kiimikada Soomaaliyeed (BAYL) la ogeysiinayaa in la bedde lay Taariikhda Shirka Saamileyda ee horay loogu soo qoray Faafinta Rasmiga ah Lr. 5 Taariikh 2da Maajo 1988, ayadoo shirka Saamileyda caadiga ah iyo aan caadiga ahayn, laysa gu imaan doono, Xaruntа Warshadda ee Xamar, bisha Junyo 30keeda 1988, Saacaddu markay tahay 17.00 Galabnimo, had duu shirku dhammaan waayana, mar labaadka bisha Luuliyo 7deeda, 1988, isku saacadda kor ku qoran.

Saamileyda Shirkadda waxaa laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor keenaan saamiyaasha ku qoran, saldhigga Shirkadda ilaa iyo intii uu shika ka dhammaado.

ARRIMAHA DOODDA:

1) Oggolaanshaha dheellitirka xisaabaha sannadka 1987,
2) Magacaabidda Guddiga Maamulka & Baarista 1988/1991
3) Kordhinta Raasumaalka.
4) Wixii kaloo soo raaca ama door la bido in laga doodo.

GUDIGA MAAMULKA

Muqdisho, 30.5.1988.

BEDDELAAD SHIR SAAMILEY WARSHADDA

SAABUUNTA QUBEYSKA IYO MARISKA

Waxaa dhammaan Saamileyda Shirkadda Warshadda Saabuunta Qubeyska iyo Mariska, la ogeysiinayaa in la bed delay Taariikhda Shirka Saamileyda ee horay loogu soo qoray Faafinta Rasmiga ah Lr. 5 Taariikh 2da Maajo 1988, ayadoo Shirka Saamileyda caadiga ah laysagu jmaan doono, Xarunta Shirkadda ee Xamar, bisha Luulyo 2deeda, 1988, saacaddu markay tahay 17.00 galabnimo ama shanta galabnimo. had duu shirku dhammaan waayana, mar labaadka bisha Luuliyo 9keeda, 1988, isku saacadda kor ku qoran.

Saamileyda Shirkadda waxaa laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor keenaan saamiyaasha ku qoran, saldhigga Shirkadda ilaa iyo intii uu shika ka dhammaado.

ARRIMAHA DOODDA:

1) Oggolaanshaha dheellitirka xisaabaha sannadka 1987,
2) Magacaabidda Guddiga Maamulka & Baarista 1988/1991
3) Wixii kaloo soo raaca ama door la bido in laga doodo.

GUDIGA MAAMULKA

Muqdisho, 30.5.1988.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAPBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Maxamuud Mahadale;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. ee hoos ku qoran, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco sida ku cad warqadda Lam. 5518 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

J.W.No.	Taariikh.	Sh.So.	Magaca	Laanta
680448	9.6.88	50.000	Axmed Cali Nuur	Burco
0641863	9.6.88	50.000	Faarax Cali Mire	Burco

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor ku qoran lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna kala qoran magacyada Axmed Cali Nuur iyo Faarax Cali Mire.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Burco ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cali Maxamuud Mahadale lacagta caddadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeegagga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 331

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Caasha Geelle Xaaji Xuseen;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 1075878 ee laga sameeyey Laanta Qoryooley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Cabdulqaadir Maxamed Abuukar sida ku cad warqadda Lr. 5073 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1075878 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryooley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Cabdulqaadir Maxamed Abuukar.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Qoryooley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Caasha Geelle Xaaji Xuseen lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ku qoran Jeega kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 2.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 332

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16uud, Muqdisho 28ka Juunyo 1988 L. 2 R 6

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaneeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 30 ee 10 Juunyo 1988, Oggolaansho Gunno Garsoor. Bog; 475

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 31 ee 6 Juun. 1988, Dhisid Maxkamad Dagaal ee Ciidamada Qalabka Sida. » 477

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 32 ee 15 Dis. 1987, Magacaabidda Agaasimaha Guud

DECREE MINISTER OF FINANCE AND TREASURY, No. 11 on 11 May 1988, Auther ity to Contract Credit Facil ities. » 479

DECREE MINISTER OF FINANCE AND TREASURY No. 12 on 13 Jun. 1988, Autho- rity of Contract Facil ities. » 480

XEER WASAARADDA K. & GAADIIDKA BADDA, L. 13 ee 26 Abr. 1988, Wax soo saarka Kh/badda. » 481

XEER WASAARADDA K. & GAADIIDKA BADDA L. 14 ee 12 Maarso 1986, Maraa- kiibta Kalluumeysiga ee Ajnabiga ah. » 482

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.5.88 Lumid Jeeg War. L. 0705433, ku qoran Abuukar Abkay C/raxmaan L. 333 » 484

MAXKAMADDA G. BANAADIR 13.6.88, Lumid Jeeg War. L. 0549600 ku qoran Mataan Maxamed Yuusuf L. 334 » 485

MAXKAMADDA G. SANAAG, 17.10.87, Lumid Jeeg War. L. 0476573 ku qoran Maxamed Cali Maxamed L. 335 » 486

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 16.6.88, Lumid 15 Jeeg War. ku qoran Maxamed Yaasiin Idiris L. 336 » 487

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.5.88, Lumid Jeeg War. L. 0698287 ku qoran Cabdullaa- hi Cali Jaamac L. 337 » 489

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 28.5.88, Lumid Buug Kayd L. 29243 ku qoran Cawil Cis- maan Cabdulle L. 338 » 490

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 2.6.88, Lumid Buug Kayd L. 1295 ku qoran Saynab Aadan Ismaaciil L. 339 » 491

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 16.6.88 Lumid Buug Kayd L. 6896 ku qoran C/qaadir Xuseen Booţaan L. 340 » 492

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 21.6.88 Lumid 12 Jeeg War. ku qoran Maxamed Mire Cosoble L. 341 » 493

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 19.6.88 Lumid 13 Jeeg War. ku qoran Maxamed Cusmaan Ismaaciil L. 342 » 494

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.6.88, Lumid Jeeg War. L. 1159308 ku qoran Xuseen Maxamed Kaarţye L. 343 » 495

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.6.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Nuur Axmed Xalane L. 344 » 496

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.6.88 Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Cabduraxmaan Jaamac Maxamed L. 345 » 497

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 30 ee 10 Maajo 1988: Ogoljaansho Gunno Garsoor.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharci Lma. 3, soona baxay 10.1.1970kii iyo wixii dib-u-habayn iyo beddelaad galay;

MARKUU GARAWSADAY: In Hawl-wadeennada iyo Shaqaalaha Maxkamadaha Badbaadada Dalka, Xeer-Ilaalintooda iyo Laamaheeda Gobollada ee Madaxbannaan mudan yihiin gunnada loo oggolaaday Garsoorka caadiga ah 1.1.1988;

MARKUU TIXGELIYEY: Tala-soo-jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socla:-

Qod. 1aad

Garsoorayaasha, Xeer-Ilaaliyeyaasha iyo Shaqaalaha Maxkamadda Badbaadada Dalka (Xamar) iyo Xeer-Ilaalinteeda waxaa loo oggolaaday gunno la mid ah tan ay qaataan Garsooreyaasha iyo Gargaarayaasha Maxkamadda Sare;

Qod. 2aad

Guddoomiyeyaasha Laamaha Maxkamadaha Badbaadada ee Gobollada oo ku magacaaban dekreeto Madaxweyne, Garsooreyaasha, Wakiillada Xeer-Ilaaliyaha Guud ee MBD, Shaqaalaha hoose ee isla Maxkamadahaas, waxaa iyagana loo oggolaaday gunno la mid ah midda ay qaataan Guddoomiyeyaasha, Garsoorayaasha iyo Gargaarayaasha Maxkamadaha Rafcaanka ee Gobollada;

Qod. 3aad

Qaadashada gunnadan waxay ka soo bilaabanaysaa 1.1.1988, waxaana bixinaya Waaxaradda Maaliyadda iyo La

Qod. 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waan aragnay ee Dcwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 3 bogga lamb. 129

Muqdisho, 12 May 1988

Hantidhawraha Guud

Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 10 Mag. 1988

MADAXWEYNAHA JDS

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 31 ee 6 Jun 1988: Dhisid Maxkamad Dagaal ee C.Q.Sida.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Qod. 54 X.H.C.C.D. ee Sharci L. 1 ee 31.3.1964;

MARKUU ARKAY: Sharci L. 26 ee 14.8.1982;

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo in laga abuuro Maxkamad Dagaal Ciidamada Q. Sida ee Qeybta «Burco»;

MARKUU TIXGELIYEY:- Soo Jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socla:-

Qod. 1aad

Laga bilaabo 27.5.88 waxaa la dhisay Maxkamad Dagaal oo ka hawl geli doonta Aagaagga Qeybta «Burco» laguna magacaabi doono Maxkamadda Dagaalka Ciidamada Q. Sida ee Qeybta «Burco»;

Qod. 2aad

Maxkamadda Dagaalka Ciidamada Q. Sida ee Qeybta «Burco» waxay awood u leedahay in ay qaado dacwooyinka dembiyada Wakhtiga Dagaalka ee ka dhaca aagaas (Reati Soggetti alla giurisdizione militare di guerra);

Qod. 3aad

Maxkamadda Dagaalka C.Q.Sida ee Qeybta «Burco» si ay u fuliso hawsha Cadaaladda, waxay ku dhaqmaysaa Xeerka Habka Ciqaabta Ciidamada Qalabka Sida ee Nabadda, Xeerka Habka Ciqaabta Ciidamada Qalabka Sida ee Dagaalka iyo Nidaamka Garsoorka Ciidamada Q. Sida;

Qod. 4aad

Xeerkaan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, Wuxuuna dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho, 6.6.1988

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 32 ee 15 Dis. 1987: Magacaabjdda Agaasimaha Guud ee Bankiga Qaranka ee Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1964, kuna saabsan wax ka bedelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 41 ee 1973, kuna saabsan Dhismaha Iskaashatooyinka;

MARKUU ARKAY: Talada Guddiga Dhaqaalaha Qaranka (warqad lambar GDhQ/1/1-102/86 ee 10.9.86), kuna saabsan Dhismaha Bankiga Iskaashatooyinka Soomaaliyeed;

MARKUU ARKAY: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee 18ka September 1986 oo lagu oggolaaday dhismaha Bankiga sare ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in loo magacaabo Bankiga dhismaya ee Iskaashatooyinka Agaasime Guud oo sii qabta hawlana gogoldhigga u ah dhismaha Bankiga;

MARKUU DHEGEYSTAY: Soo jeedinta Guddoomiyaha Hoggaanka Iskaashatooyinka ee Golaha Dhexe XHKS;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socla:-

Qod. 1aad

Jaalle CABDULXAMIID FAARAX XIRSI waxaa lagu magacaabay Agaasimaha Guud ee Bankiga dhismaya ee Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15 Dec. 1987

MADAXWEYNAHA JDS

Decree Minister Of Finance and Treasury No. 11, on 11 May 1988: Authority to Contract Credit Facilities.

SOMALI DIMOCRATIC REPUBLIC

MINISTRY OF FINANCE AND TREASURY

The Minister Of Finance And Treasury:-

Having seen: Article 22 of Law No. 18 of 14.8.1963;

Having seen: The Guarantee issued by the Central Bank Of Somalia, Mogadishu, covering the credit facility agreement between the Commercial And Savings Bank Of Somalia, Mogadishu, and Bank Of Kuwait and The Middle East, Kuwait;

Having deemed it: Necessary to authorise the Commercial and Savings Bank Of Somalia to obtain credit facilities from Bank Of Kuwait and Middle East, Kuwait.

DECREE THE FOLLOWING:-

ARTICLE I

1. The Commercial and Savings Bank Of Somalia, Somali Democratic Republic is hereby authorised to obtain credit facilities from Bank Of Kuwait And Middle East, of Kuwait and thereby enter into an agreement for the purpose of effecting the said credit facilities.

2. The Central Bank Of Somalia, Mogadishu, is also hereby authorised to issue Guarantee covering the credit facilities specified in para 1 above.

ARTICLE II

This decree shall come into force immediately the day signed by the Minister of Finance And Treasury and shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, May 11, 1988

MINISTER OF FINANCE & TREASURY
(Dr. Abdurahman Jama Barre)

Decree Minister Of Finance And Treasury No. 12 on 13 Jun. 1988: Authority of Contract Credit Facilities.

SOMALI DIMOCRATIC REPUBLIC

MINISTRY OF FINANCE AND TREASURY

The Minister Of Finance And Treasury:-

Having seen: Article 22 of Law No. 18 of 14.8.1963;

Having seen: The Guarantee issued by the Central Bank Of Somalia, Mogadishu, covering the credit facility agreement between the National Petroleum Agency, Head Office Mogadishu, and Burgan Bank S.A.K. Of Kuwait;

Having deemed it: Necessary to authorise the National Petroleum Agency, Head Office, Mogadishu, to obtain credit facilities from Burgan Bank S.A.K. Kuwait.

DECREE THE FOLLOWING:-

ARTICLE I

1. The National Petroleum Agency, Somali Democratic Republic is hereby authorised to obtain credit facilities from Burgan Bank S.A.K. Kuwait and thereby enter into an agreement for the purpose of effecting the said credit facilities.

2. The Central Bank Of Somalia, Mogadishu, is also hereby authorised to issue Guarantee covering the credit facilities specified in para 1 above.

ARTICLE II

This decree shall come into force immediately the day signed by the Minister of Finance And Treasury and shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, Jun. 13, 1988

MINISTER OF FINANCE & TREASURY
(Dr. Abdurahman Jama Barre)

Xeer Wasaaradda K. iyo Gaadiidka Badda, L. 13 ee 26 Abr. 1988, Wax soo saarka Khayraadka Badda.

WASIIRKA K.&G.B.

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Kalluumeysiga Lr. yahay 23 soona baxay 1985;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. yahay 10 ee 29 Maajo 1983 ee lagu dhisay Mashruuca Khayraadka Badda (SMP);

MARKUU TIXGELIYEY: Heshiiska Maalgelinta Mashruuca SMP ee dhexmaray JDS iyo Dawladda Jarmalka Fedraliga;

MARKUU TIXGELIYEY: Lacagta faraha badan ee lagu maal gelíyey Warshadda, iyo qiimaha weyn ay ugu fadhido Ummadda Soomaaliyeed iyo waxtarkeeda Dhaqaale.
WUXUU SOO SAARAY XEERKAN SOO SOCDA:-

Qod. 1aad

Wax soo saarka Khayraad-Badeedka iyo ka ganacsigiisaba ee Gobolka J/Hoose wuxuu u xayiran yahay (Monopolizato) Mashruuca Khayraadka Badda (SMP).

Qod. 2aad

Cidkasta oo ka dan leh wax soo saarka iyo ka ganacsiga Khayraad-Badeedka Gobolkaas waxay oggolaansho weydiisanaysaa Mashruuca Khayraadka Badda (SMP).

Qod. 3aad

Ciddii ku xad gudubta Xeerka waxaa laga qaadayaa tillaabo Sharci ah.

Qod. 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda.

Muqdisho, 26ka Abriil 1988

W A S I I R K A

(Aadan Maxamed Cali)

Xeer Wasaaradda K. iyo Gaadiidka Badda, L. 14 ee 2 Maarso 1986, Maraakiibta Kalluumeysiga.

WASIIRKA K.&G.B.

Markuu Arkay: Dastuurka JDS;

Markuu Arkay: Sharciga Lr. 17 ee soo baxay 3 Fab. 1977 oo lagu dhisay Wasaaradda Kalluumeysiga;

Markuu Arkay: Sharci Lr. 23 ee 3 Nofembar 1985 ee ah Sharciga Kalluumeysiga Soomaaliyeed;

Markuu Arkay Sharciga maalgelinta shisheeyaha;

Markuu Arkay: Nidaamka Royalatiga maraakiibta shisheeyaha laga qaado;

Markuu Tixgeliyey: Talo soo jeedinta mas'uuliyiinta sare ee Wasaaradda.

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN SOO SOCDA:-

Qod. 1aad

Maraakiibta Kalluumeysiga ee ajnabiga ah waxaa ruqsad kalluumaysi siin kara Wasiirka Wsaaaradda Kalluumeysiga iyo Khayraadka Badda.

Qod. 2aad

Maraakiibta kalluumaysiga ee Ajnabiga ah, waxaa laga qaadayaa Royalatiga hababka hoos ku xusan:

B) Boqolkiiba labaatan 20% wax soo saarkooda, ha ahaado cayn ama qiimo ahaan (kind or in cash).

T) Quwad faraseedka markabka-H.P. oo midkiiba laga qaado 80 dolars sannadkiiba iyo boqolkiiba todoba 7% wax soo saarkiisa ha ahaado cayntiisa ama qiimahiisa-kind or in Cash.

J) Maraakiibta kalluumaysiga ee ajnabiga ah ee loo xilsaaray cilmi-baarista ama sahan waxaa awood u leh xadideedka royalatigooda Wasiirka Wasaaradda Kalluumaysiga.

X) Hay'adaha iyo Shirkadaha Ajnabiga ah ee Kalluumay

ta kaljuumaysiga, waxaa lagu dhaqayaa maraakiibtoo-da kalluumaysiga heshiisyo gaar ah.

Qod. 3aad

Maraakiibta kaljuumaysiga oo Ajnabiga ah ee heshiis-leyda ah-Joint Venture oo ay si wadajir ah u wada maamu-laan ama u wada leeyjhiin Soomaalji iyo Shirkado Ajnabi ah, waxaa laga qaadayaa Royaalatiga sidatan ah:

B) Culayska Quwad-Faraseedka-HP- oo midkiiba lagu dhjifto US$. 50 sannadkiiba iyo boqolkiiba 5% wax soo saarkiisa ha ahaado cayntiisa ama qiimahiisa-In kind or in Cash.

Qod. 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan geJayaa taariikhda la saxiixo, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12ka Maarso 1986

W A S I I R K A

(Aadan Maxamed Cali)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Abuukar Abkay X/Raxmaan.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0705433 Laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaa liyeed L/Xarunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca J/le Abuukar Abkey C/Raxmaan Sida ku cad warqadda lam. 4743 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Qaybta Xisaabaabka Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Wareega Lambar 0705433 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L.Xar. kuna jirto lacag dhan sh so. 50.000 kuna qoran magaca J/le Abuukar Abkey Cabdiraxmaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xarunta In av siiso J/le Abuukar Abkey C/Raxmaan lacagta cadeyn tu tahay sh.so. 50.000 oo ah badelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Raa miga ah ee J D S Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 22.5.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 333

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Mataan Maxamed Yuusuf.

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay J/War. Lr. 0549600 kuna qoran magaca Mataan Maxamed Yuusuf, kuna jirto lacag dhan sh.so. 20.000 lagana sameeyey Bankja Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Burco, sida ku cad warqadda Lr. 4408 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Qaybta Xisaabaadka Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Wareega Lambar 0549600, oo laga sameeyey L/Burco ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan sh.so. 20.000 kuna qoran magaca Mataan Maxamed Yuusuf.

WAXAA LA AMRAYAA

L/Burco ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Mataan Maxamed Yuusuf Lacagta dhan sh.so. 20.000 bedalkii J/War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.6.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 334

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG.

KU: Garyaqaanka Guud ee Dawladda, Muqdisho.
OG: B.G.K.S. Laanta, Cerigaabo.
UJ: Bedelaad Jeega Wareega Lambar 0476573.

HADDUU ARKAY: Codsiga Tr. Tahay 4.10.87, kaasoo uu Maxkamadaan u soo qortay X. Maxamed Cali Maxamed isagoo ka codsaday Maxkamadaan in loo baafiyo Jeega ka Lumay.

HADDUU ARKAY: Waxa uu ku saabsan yahay codsigaasu.

HADDUU ARKAY: Ogeysiiska Bankiga Ganacsiga iyo keyd ka L/Cerigaabo sida ku cad Xaashida Sum. 01072 ee 13.10.87, taasoo ay ku cadahay inuu lumay J/War. Lam. 0476573 kuna qoran tahay lacag dhan (50.000) shilin iyo magaca Maxamed Cali Maxamed, lagana sameeyay B.G.K.S. Laanta Cerigaabo.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 N/2, Lumid J/War. Lam. 0476573 ee ay ku qorantahay Lacag dhan (50.000) Shilin, iyo magaca Maxamed Cali Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

In la cusboonaysiiyo J/War. Lr. 0476573 ee ay ku qoran tahay, lacag dhan (50.000) shilin iyo magaca Maxamed Cali Maxamed, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo dhan so don Beri gudahood marka go'aanka lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

WAXAA LA CODSANAYAA.

In Jeega cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J/le Maxamed Cali Maxamed ama qof isaga wakaalad shar ci ah ka sita, iyadoo la sugayo mudada kor ku sheegan.

WADA SHAQAYN WACAN.

MGS/L. 217/87. 17.10.87.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. S/CEERIGAABO
Dr. C/Raxmaan Sh. Maxamed.

L. 335

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qorţay Jaalle Maxamed Yaasiin Idiris;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 15 Jeeg War. ee hoos ku qoran, oo laga sameeyey Bangiga Gnaacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud kuna jirţo guud ahaan lacag dhan Sh.So. 3.210.000/= kuna kala qoran yihiin magacyo kala duwan sida ku cad warqadda lam. 5787 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

J.W.No.	Taariikn.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta Xamar
0163402	4.6.88	500.000	Axmed Max'ed Cabdule laad	
0163401	4.6.88	500.000	Axmed Max'ed Cabdule laad	
0116468	5.6.88	500.000	Xasan Yuusuf Cali	B/Xaawa
0163403	4.6.88	500.000	Axmed Max'ed Cabdule X. laad	
0116578	11.6.88	300.000	Xasan Yuusuf Cali	B/Xaawa
00116520	6.6.88	150.000	Khamiis Max'ed Max'ud	B/X.
0088446	18.4.88	120.000	Aamino Cadaani laad	Hargey.
1086151	4.6.88	100.000	Aadan Sh. Aadan	Bay
1128756	4.6.88	100.000	Aadan Maxamed	X. 5aad
0962878	6.6.88	100.000	Xasan Xaaji	B/Weyn
1160593	29.5.88	100.000	Siid Cali Max'ed	Marka
1065980	28.2.88	100.000	Jeylaani Suufi	X. laad
0309560	4.6.88	50.000	Abuukar C/raxmaan	Kismaayo
030793	24.5.88	50.000	C/raxmaan Aadan	Kismaayo
0309561	4.6.88	40.000	Abuukar C/raxmaan	Kismaayo

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor ku qoran oo laga sameeyey Laamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 3.210.000/= kuna kala qoran

WAXAA LA FARAYAA

Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Maxamed Yaasiin Idiris lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 3.210.000/= oo ku kala qoran Jeegagga Wareega oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 336

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Cali Jaamac.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay J/War. L/0698287 ee laga sameeyay L/W/dhiiglay ee Bankiga Ganasiga iyo keydka kuna qoran magaca C/laahi Cali Jaamac sida ku cad warqadda Lr. 0109 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/W/dhiigley kuna jirto sh.so 40.000.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Wareega Lambar 0698287 laga na sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/W/dhiiglay kuna jirto lacag dhan sh.so. 40.000 kuna qoran magaca C/laahi Cali Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

L/W/dhiiglay ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le C/laahi Cali Jaamac lacagta cadadkee du yahay sh.so. 40.000 oo ku qoran J/kor ku tilmaaman mar kay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.5.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 337

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cawil Cism aan Cabdulle.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay B/Keyd Lr. 29243 ee laga sameeyay L/Xarunta ee Bankiga Ganacsiga iyo kedka kuna qoran magaca Cawil Cismaan Cabdulle sida ku cad warqadda Lam. 00840 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xarunta kuna qoran sh.so. 17.000

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B/Kayd Lam. 29243 Lagana sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed L/Xarunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 17.000 kuna qoran magaca Cawil Cismaan Cabdulle.

WAXAA LA AMRAYAA

L/Xarunta ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed in ay siiso J/le Cawil Cismaan Cabdulle lacagta cadad keedu yahay sh.so. 17.000 oo ku qoran B/Keyd kor ku tilm aaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.5.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 338

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo iqortay Jaalle Saynab Aadan Ismaaciil.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay B/Keyd Lr. 1295 ee laga sameeyay L/W/dhiiglay ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka kuna qoran magaca Saynab Aadan Ismaaciil sida ku cad warqadda lam. 5246 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Q.X. Guud kuna jirto sh.so. 16.6.6.56

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B/Keyd Lam. 1295 la gana sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/W/dhiiglay kuna jirto lacag dhan sh.so. 16.6.6.56 kuna qo ran magaca Saynab Aadan Ismaaciil.

WAXAA LA AMRAYAA

L/W/dhiiglay ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaa liyeed in ay siiso J/le Seynab Aadan Ismaaciil lacagta cadad keedu yahay sh.so. 16.6.6.56 oo ku qoran B/Keyd kor ku til maaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 2.6.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR.
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 339

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Xuseen Bootaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd Lr. 6896 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 330.779.17 kuna qoran magaca J.le Cabdulqaadir Xuseen Bootaan sida ku cad warqadda Lam. 00973 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 6896 oo laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 330.779.17 kuna qoran magaca J.le Cabdulqaadir Xuseen Bootaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdulqaadir Xuseen Bootaan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 330.779.17 oo ku qoran Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 340

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Mire Cosoble;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 12 Jeeg War. ee hoos ku qoran, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So. 1.380.000 kuna kuna kala qoran magacyo kala duwan sida ku cad warqadda Lam. 5971 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

J.W.Lr.	Taariikh.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
0079665	26.5.88	500.000	Maxamed Xuseen Cabdi	L/3Har.
0593751	30.4.88	280.000	Max'ed Xuseen Cabdi	L/3 Harg.
0079666	26.5.88	100.000	Ibraahim Cab/hi	L/1 Boorame,
1091029	18.5.88	100.000	Max'ed Saciid Ismaaciil	L/1Harg.
0677868	11.4.88	50.000	»	»
1091448	———	50.000	»	»
0673077	19.5.88	50.000	»	»
0608231	17.3.88	50.000	»	»
0608363	13.5.88	50.000	»	»
0608362	11.5.88	50.000	»	»
0207484	26.5.88	50.000	Cabdi Xuseen Max'ed	»
0594272	22.5.88	50.000	Axmed Cabdullaahi	»

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku qoran kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 1.380.000 kuna kala qoran magacyada kor ku xusan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Maxamed Mire Cosoble lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 1.380.000 oo ku qoran Jeegagga Wareega oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaoc Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 341

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Cusmaan Ismaaciil;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 21 Jeeg War. ee hoos ku qoran, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha hoos ku xusan kuna jirto lacag dhan guud ahaan sh.so. 5.680.000 kuna kala qoran magacyo kala duwan sida ku cad warqadda Lr. 5875 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.G;

J.W.No.	Taariikh.	Sh.So.	Magaca ku qoran			Laanta
0158353	9.5.88	500.000	Fadumo	Cisman	Ismacil	Xarunta
0158354	»	500.000	»	»	»	»
0158356	»	500.000	»	»	»	»
0158357	»	500.000	»	»	»	»
0158358	»	500.000	»	»	»	»
1150703	»	100.000	»	»	»	»
0168301	16.5.88	500.000	Max'ed	Cisman	Ismacil	L/2aad
0168302	»	500.000	»	»	»	»
0168303	»	500.000	»	»	»	»
0168304	»	500.000	»	»	»	»
0168305	»	500.000	»	»	»	»
0168306	»	180.000	»	»	»	»
0156465	11.5.88	400.000	Axmed	Cismaan	Ismacil	L/5aad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee Lambaradooda, Lacagtooda, Magacyada ku qoran iyo Laabaha lagasameeyey ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ay kor ku xusan yihiin kuna jirto lacag dhan guud ahaan sh.so. 5.680.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Maxamed Cismaan Ismaaciil lacagta cadadkeedu yahay sh.so. 5.680.000, oo ah bedelkii Jeegagga Wareega oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 342

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xuseen Maxamed Kaariye;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lr. 1159308 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cabdullaahi Cali Cadow sida ku cad warqadda Lam. 1433 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 1159308 oo laga sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cabdullaahi Cali Cadow.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xuseen Maxamed Kaariye lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ku qoran Jeegga Wareega oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS ,haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.6.88

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 343

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Nuur Axmed Xaĵane;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. ee hoos ku qoran, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Q.X.G. Laamaha hoos ku xusan kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 150.000 kuna kala qoran ĵaba nin sida ku cad warqadda lam. 6000 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, waana sidan hoos ku qoran;

J.W.No.	Taariikh	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
0770449	30.12.87	100.000	Xasan Max'ed Xayow	W/dhiigley
02222884	10.5.88	50.000	Tahliil Xasan Cabdi	B/Burto

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.8.1962.

WUXUU XEERIYEY

In ĵa baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku tilmaaman oo laga sameeyey Laamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 150.000 kuna qoran magacyada kala ah J.le Xasan Maxamed Xaayow iyo J.le Tahliil Xasan Cabdi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha W/dhiigley iyo B/Burto in ay siiyaan J.le Nuur Axmed Xalane ĵacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 150.000 oo ku qoran Jeegagga Wareega oo kor ku xusan mar kay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga biĵaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.6.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi).

L. 344

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabduraxmaan Jaamac Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 3 Jeeg War. ee Lambaradooda, Lacagtooda, Magaca ku qoran iyo Laamaha laga sameeyeyba ay hoos ku tilmaaman yihiin oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 1.210.000 sida ku cad warqadda lam. 6053 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

J.W.No.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
0162042	500.000	Cabdullaahi Salaad Cumar	1aad
0147877	500.000	Caji Xasan Cilmi	1aad
0153185	210.000	Axmed Cabdule Guuleed	3aad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku xusan oo laga sameeyey Laamaha 1aad iyo 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 1.210.000 kuna kala qoran saddex nin.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha 1aad iyo 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Cabduraxmaan Jaamac Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 1.210.000 oo ku qoran Jeegagga Wareega oo kor ku xusan markay ka ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.6.88

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Yaashi)

IIB MA GALO

FAAFIN RASMÌ AH

الرسمية الجمهورية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 2da Luulyo 1988, L. 7

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 14 ee 13 Juun. 1988, Oggolaansho Bog; Heshiis Amaaheed oo dhex maray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika 502

SHARCI L. 15 ee 13 Juun. 1988, Oggolaansho » Heshiis Amaaheed ee dhex maray J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, Mash.Is/ta 503

SHARCI L. 16 ee 18 Juun. 1988, Sharciga Maamulka Huteelada Dawladda. » 504

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 33 ee 13 Juun. 1988, Meel marin Heshiis Amaaheed ee dhex maray J.D.S. iyo Bankiga H. Afrika » 505

DECREE No. 33 on 13 Jun. 1988, Instrument of ratification. » 506

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 34 ee 13 Juun. 1988, Meel marin Heshiis Amaaheed ee dhex maray J.D.S. iyo Sanduuqa H. Afrika » 507

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 35 ee 20 Juun 1988, Soo Saarid Lacag. » 508

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 15 ee 2 Juun. 1988, Magacaabid Kuxigeen Gud doomiye Golaha Shacbiga Degaanka. » 509

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 19.6.88, Lu mid 2 J/War. ku qoran Sabriye Siidow Rooble L. 344. » 510

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 19.6.88, Lu mid 2 J/War. ku qoran Luul Maxamuud Faarax L. 345 » 511

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 19.6.88, Lu mid J/War. L. 29121 ku qoran Cabdulqaadir Yuusuf Diiriye L. 346 » 512

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 8.5.88, J/War. iyo B/Kayd ku qoran Axmed Maxa med Xasan L. 347 » 513

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 6.6.88, Lu mid B/Keyd L. 7235 ku qoran Xuseen Macalin Cabdulle L. 348 » 514

MAXKAMADDA GOB. W/GALBEED 8.12.87, Lumid J/War. L. 0520415 ku qoran Kaamil Ciise Habane L 349 » 515

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 12.6.88, Lumid J/War. L. 0692447 ku qoran Cabdul laahi Maxamed Faarax L. 350 » 516

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.6.88 Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Maryan Sh. Jaamac L. 351 » 517

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.6.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdi Cabdullaahi Saciid L. 352 » 518

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.6.88 Lumid Jeeg War. L. 0121771 ku qoran Xaaji Weheliye Raage Culusow L. 353 » 519

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.6.88 Lumid Buug Keyd L. 17058 ku qoran Cali Caydiid Xasan L. 354 » 520

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 19.6.88 Lumid 8 Jeeg War. ku qoran Maxamed Cismaan Ismaaciil L. 355 » 521

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.6.88 Lumid Jeeg War. L. 0149383 ku qoran Saciid Qaxdaan Taabid L. 356 » 522

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.6.88 Lumid 17 Jeeg War. ku qoran X. Axmed Maxamed Faarax L. 357 » 523

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci Lambar 14 Tr. 13 Juun. 1988 Oggolaansho Hesh iis Amaaheed oo dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika «Mashruuca War Isgaarsiinta».

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogta da ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska Amaaheed oo dhex maray D/J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika oo Wakiil ka ah Sanduuqa Sugan ee Nijeriya (NTF), kuna saabsan Amaah Lacag ah oo loo yaqaan BUA 6.000.000, oo loogu talo galay Mashruuca War Isgaarsiinta ee (1 PANAFTEL).

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada AbidJaan ee Dalka Ivory Coast taariikhdu markay ahayd 11.2.1988.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan, isagoo Lifaaq u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu tilmaamayo Heshiiska ku qoran Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la Waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo qodobada Heshiiskan.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa Awood loo siiyey inuu mee lmariyo Heshiiskan.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13.6.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Sharci Lambar 15 Tr. 13.6.1988, 13 Juun. 1988 Oggolaa shc Heshiis Amaaheed oo dhexmaray D/J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika «Mashruuca War Isgaarsiinta».

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogta da ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska Amaaheed ee dhexmaray D/J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, kuna saabsan amaah lacag ah oo loo yaqaan FUA 9.000.000 oo loogu talo galay Mashruuca war Isgaarsiinta ee (1 PANAFTEL).

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada AbjdJaan ee Dalka Ivory Coast, Tr. markay ahayd 11.2.1988.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu tilmaamayo Heshiiska ku qoran qodobka 1aad ee Sharcigan, waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. iyo qodobada Heshiiskan.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa Awood loo siiyey inuu mee lmariyo Heshiiskan.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13.6.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

Sharciga lambar 16 ee 18ka Jun. 1988: Sharciga Maamulka Hoteellada Dawladda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Wasaaradda Warfaafinta, Hanuuninta Dadweynaha iyo Dalxiiska waxay la geli kartaa Shirkado iyo Maalqabeenka Soomaaliga iyo kuwa Shisheeye heshiis faa'iido wadaag (Joint venture) oo ku saabsan Maamulka Hoteellada, iyadoo la dhawrayo shuruudaha Sharciga Maalgelinta Shisheeye.

Qod. 2aad

Shaqaalaha Hoteellada waxaa laga dhigay Heshiisley, iyadoo hadda kaddib lagu dhaqi doono Sharciga lambar 26 ee 5ta Luulyo 1984, kuna saabsan Shaqaalaha Warshadaha.

Qod. 3aad

Waxaa la buriyey Sharci kasta oo ka soo horjeeda Sharcigan ama aan la socon karin.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 18 Jun 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

X E E R

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 33 ee 13.6.1988 Meelmarin Heshiis Amaaheed dhexmaray J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika. kuna saabsan Mashruuca war Isgaar siinta ee (1 PANAFTEL).

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, Faqradda 5 iyo Qod. 82, Faqr adda 4 ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 49 ee 23ka Dis. 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 14 ee 13ka Juun 1988 oo Guddiga Joogtada an ee Golaha Shacbigu uu ku oggo laaday Heshiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyay Heshiiska Amaaheed ee dhexmaray D/J.D.S. iyo Bankiga Horumarinta Afrika oo Wakiil ka ah SANDUUQA SUGAN EE NIJEERIYA (NTF), kuna saabsan Mashruuca war Isgaarsiinta ee (1 PANAFTEL), laguna kala saxiixday magaalada AbidJaan 11kii Febraayo 1888.

Qodobka 2aad

Heshiiskanu wuxuu Dalka J.D.S. ku yeelanayaa awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13.6.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

UJEEDDO: Decree No. 33 of 13.6.1988, Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law no. 14 of 13.6.1988 on the base of which the People's Assembly has aproved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement.

HEREBY PROMULGATES

The Foolowing Decree.

ARTICLE 1

The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the African Development Bank acting on behalf of the Nigeria Trust FUND (telecommunications I (PANAFTEL) Project), signed at AbidJan on 11.2.1988, is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall Published in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 13.6.1988.

THE PRESIDENT OF SDR

Mohamed Siad Barre

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lam. 34 ee 13.6.1988, Mee lmarin heshiis amaaheed dhexmaray Dawladda J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, kuna saabsan Mashruuca War Isgaarsiinta ee (1PANAFTEL).

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 67, Faqradda 5 iyo Qod. 82, Faqradda 4 ee Dastuurka.

MARKUUARKAY: Sharciga Lr. 49 ee 23ka Dis. 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga L. 15 ee 13ka Juun 1988, oo Gudiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu uu ku oggolaaday heshiiska kor ku tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la meelmariyo Heshiiskan.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska Amaaheed ee dhexmaray D/J.D.S. iyo Sanduuqa Horumarinta Afrika, kuna saabsan Mashruuca War Isgaarsiinta ee (1PANAFTEL), laguna kala saxiixday magaalada AbidJaan 11kii Feberaayo 1988.

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka J.D.S. ku yeelanayaa awood Sharci ah.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13.6.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

UJEEDDO: Decree no of 13.6.1988, Instrument of ratifion.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, Para 5 and the Article 82, Para 4 of the Constitution.

HAVING SEEN: The Law no 49 of 23 December 1984.

HAVING SEEN: The Law No. 15 of 13.6.1988 on the base of which the People's Assembly has aproved the Agreement specified in this Decree.

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agree ment.

HEREBY PROMULGATES

The Foolowing Decree.

ARTICLE 1

The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the African Development Fund (telecomunications I (PANAFTEL) Project), signed at AbidJan on 11.2.1988, is hereby ratified.

ARTICLE 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

ARTICLE 3

This Decree shall come into force upon signature by the president of Somali Democratic Republic and shall Pub lished in Official Bulletin of the State.

Mogadishu, 13.6.1988.

THE PRESIDENT OF SDR
Mohamed Siad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 35 ee 20 Jun. 1988, Soo saarid Lacag.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82 Dastuurka JDS Xarafka 14aad iyo sharciga Lr. 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Qod. 5aad ee Xeerka Lr. 2 oo soo baxay 26kii Maarso 1961 kuna saabsan nidaamka Lacagta Soomaalida;

ASAGOO TIXRAACAYA: Baahida loo qabo in la caddeeyo tirada Lacagta Xaashida Cusub oo shilin Soomaaliga ah ee la doonayo in la soo saaro;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday in la soo saaro:

b) 50.000.000 (Kontonmalyan) oo xaashida 100 (boqol) Shilin qiimaheeduna yahay Sh.So. 5.000.000.000.= (shanbilyan) oo ah 50 horin «series» kana bilowda lambar 000001 ilaa 1000000 oo sita xarafka «D» oo ka dambeeya lambar 121 ilaa 170.

t) 30.000.000 (Soddonmalyan) oo xaashida 50 (konton) Shilin qiimaheeduna yahay Sh.So. 1.500.000.000.= (halbilyaniyonus) oo ah 30 horin «series» kana billowda lambar 000001 ilaa 1000000 oo sita xarafka «D» oo ka dambeeya lambar 116 ilaa 145.

Qodobka 2aad

Laamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayd-ka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Nuur Maxamed Furre la-cagta cadadeedu tahay Sh.So. 2.488.000/= oo ku qoran Jee-gagga Wareega oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wxa ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.7.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 377

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Cabdulle Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. lam. 0710403 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 40,000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Sheekh Cali Cabdulle sida ku cad warqadda lam. 0680 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0710403 ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 40.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Sheekh Cali Cabdulle.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad in ay siiso J.le Maxamed Cabdulle Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 40.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 378

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Xaaji Bashiir;

HADDUU TIXKELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 1155254 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Asli Xasan sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. L. 1155254 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Asli Xasan .

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aal in ay siiso J.le Cabdulqaadir Xaaji Bashiir Xuseen lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 379

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xasan Cali Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0694970 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Cabdullaahi Eenow sida ku cad warqadda lam. 6783 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0694970 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Cabdullaahi Eenow.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 3aad in ay siiso J.le Xasan Cali Faarax lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 380

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Axmed Siyaad;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0524614_0524581 kuna kala jirto lacag dhan Sh. So. 50.000 iyo Sh.So. 25.000 guud ahaan Sh.So. 75.000 kuna kala qoran Yuusuf Xeyle Roople iyo C/raxmaan Oogle Jaamac sida ku cad warqadda lam. 6971 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0524614_0524581 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 75.000 kuna kala qoran Yuusuf Xeyle Rooble iyo C/raxmaan Oogle Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. B/Xaawo in ay siiso J.le Cabdullaahi Axmed Siyaad lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 75.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegot muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 380

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Faarax Muxiyadiin;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2Jeeg War. lam. 1088453_0697038 kuna kala jirto lacag dhan Sh. So. 100.000_iyo Sh.So. 35.000 guud ahaan Sh.So. 135.000 kuna kala qoran J.le Maxamed Xaaji Yuusuf iyo J.le Xubi Xaaji Cabdulle sida ku cad warqadda lam. 6041 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 1088453_0697038 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 135.000 kuna kala qoran J.le Maxamed Xaaji Yuusuf iyo J.le Xubi Xaaji Cabdulle.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 1aad in ay siiso J.le Maxamed Faarax Muxiyadiin lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 135.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qroan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 381

IIB MA GALO

FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho 1da Agoosto 1988 L. 8

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waqiba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 37 ee 19 Juun 1988, Oggolaansho Jinsiyad loo oggolaaday Xuseen Maxamed Xuseen. Bog; 565

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.6.87, Bed. Naado Dhul J.le Maxamed Cali Abtidon L.382 » 566

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

DAWLADDA HOOSE MUQ. 18.3.87, Saxid Qa-
ljad Maxamuud Socdaal Fiidow L. 383 » 568

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 5.7.88, Lumid
Buug Kayd L. 29196 ku qoran Xasan Yuu-
suf Maxamed L. 384 » 569

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 9.7.88, Lumid
11 Jeeg War. ku qoran Axmed Maxamed
Ciise L. 385 » 570

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.7.88, Lumid
Jeeg War. L. 579634 ku qoran C/saljaan
Maxamed Muuse L. 386 » 571

MAXKAMADDA G. BANAADIR 12.7.88, Lumid
2 Jeeg War. ku qoran Axmed Maxamed
Xuseen L. 387 » 572

MAXKAMADDA G. MUDUG 17.7.88, Lumid 9
Jeeg War. ku qoran Cabdulqaadir Xasan
Maxamuud L. 388 » 573

MAXKAMADDA G. MUDUG 17.7.88, Lumid 2
Jeeg War. ku qoran Axmed Diirjye Maxa-
muud L. 389 » 574

MAXKAMADDA G. BANAADIR 18.7.88, Lumid
Jeeg War. L. 165860 ku qoran C/samad
Cali Xaashi L. 390 » 575

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.7.88, Lumid
Buug Kayd L. 3088 ku qoran Calj Sugaal
Cismaan L. 391 » 576

MAXKAMADDA G. BANAADIR 20.7.88, Lumid
2 Jeeg War. ku qoran Aadan Maxamed
Xersi L. 392 » 577

DAWLADDA HOSE MUQ. 22.1.87, Naado Dhul
J.le Cabdullaahi Cabdi Caalin L. 383/bis » 567

DAWLADDA HOOSE MUQ. 8.4.87, Naado Dhul
J.le Shirkadda Ganacsiga Watco L. 383/bis » 578

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.7.88, Lumid 4 Jeeg War. ku qoran C/raxmaan Faarax Sugaal L. 393 » 579

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.7.88, Lumid Jeeg War. L. 0475670 ku qoran Axmed Xuseen Maxamed L. 394 » 580

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.7.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran C/qaadir Maxamed Aadan L. 395 » 581

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.7.88, Lumid Jeeg War. L. 0975504 ku qoran Naasir Soomane Khayre L. 396 » 582

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 37 ee 19 Juun 1988, Oggoljaansho Jinsiyad joo oggolaaday Xuseen Maxamed Xuseen.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 4aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Qodobka 12aad ee Nidaamka Dhismaha Dawladda lr. 14 ee 3.6.62 iyo Isbadalkii ka dambeeyey;

MARKUU ARKAY: Qodobka 4, 13, iyo 14 ee Sharciga Lam. 28 ee 22.12.62 oo ku saabsan Oggolaanshaha Jinsiyadda Soomaaliyeed;

MARKUU ARKAY: Qodobada 3,4.5, ee Xeer Madaxweyne Lam. 129 ee 19.2.62;

MARKUU ARKAY: Arjiga Taariikhdiisu ahayd 31.5.70 ee uu qortay Jaalle Xuseen Maxamed Xuseen, si uu u helo Jinsiyad Soomaaliyeed;

MARKUU HUBIYEY: Waafaqsanaanta Dikomentooyinka ku xusan Qodobada 4 iyo 6 ee Sharci lam. 28 ee 22.12.62;

MARKUU ARKAY: Warqad lam. XMKL/C-008/87 ee ka soo baxday Madaxweyne ku xigeenka 2aad ee JDS, ahna ku xigeenka 1aad;

MARKUU DHAGAYSTAY: Golaha Wasiirada;

MARKUU DHAGAYSTAY: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERIYEY

(Qod. 1aad)

Waxaa si sharci ah loogu oggolaaday, In Jaalle Xuseen Maxamed Xuseen, la siiyo Jinsiyadda Soomaaliyeed.

(Qod. 2aad)

Jinsiyadda Soomaaliyeed, waxaa ku wehelliya oo kale Xaaskiisa iyo Carruurtiisa aan qaangaarin.

(Qod. 3aad)

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa, marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Juun 1988

MADAXWEYNAHA JDS

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaan jdin ogeysiineynaa in dhulka uu soo codsaday J.]e Maxamed Cali Abtjdon oo]aga he]o Degmada Yaaqshiid ee lagu soo diray warqadda Lam. WHG/3/23/174 Taariikh. 31.1.78 in uu dhulka iska beddelay sidatan: 30X20 lana mjd ah 600/= mq. ee ma aha sida]agu soo djray 40X30 = 1.200 mq.

SOOHDIMIHIISA WAA SIDATAN:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga:Waddo
B a r j waxaa ka xiga: Waddada Balcad
Muqdisho, 28 Juun 1987

Haddaba waxaan idjnka codsaneynaa in aad ku daabac-daan Buugga Faafinta Sharciga sida aan kor ku soo sheeg-nay.-

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(Jeom. Aadan Xaashj Nuur)

L. 382

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA

BEDDELAAD MAGAC LA SAXAAYO

Waxaan idin ogeysiineynaa jn J.le Maxamuud Socdaal Fiidow uu soo codsaday taariikhdu markay ahayd 12.12.80, cad dhul ku yaal Degmada Wadajir, loona oggolaaday, qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna yihiin mt. 20X30 kuna fadhiya mq. 600.

Waxaana loogu Faafiyey magac qalad ah Maxamed Socdaal Fiidow, magaca saxa ah waa:- Maxamuud Socdaal Fiidow.

Sidaas awgeed muddadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3/23/853 taariikhdeeduna ahayd 23 Maarso 1981.

SOOHDIMIHIISA WAA SIDATAN:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 65 W.
Koofur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 53 W.
B a r i waxaa ka xiga: Waddo
Muqdisho, 18 Maarso 1987

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 383

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA MAAMULKA DHULKA
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdullaahi Cabdi Caalin uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawlada Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 28.12.86 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan qaabkiisuna yahay Retangol addimmiisuna yihiin 10X30 kuna fadhiya 300 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul dad kale
Koofur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhulkiisi hore

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah..

Muqdisho, 22 Jan. 1987

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA EE D/H.
(Jaalle Aadan Xaashi Nuur)

L. 383/bis

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA DHULKA EE DAWLADDA HOOSE

Waxaa la caddeynayaa in Shirkadda Ganacsiga Watco uu soo qoratay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Xamar, maaljnui taariikhau anayd 7.12.1986 ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Waaberi ee Waddada Xajane, Dhulka la siiyey wuxuu u qaybsan yahay laba qaybood:

A) Qaybta Koowaad Qaabkiisu waa Rectangolo, Addimihii suna waa 34X36 kuna dadhjya mq. 1.224/—

B) Qaybta labaad Qaabkiisu waa Rectangolo, Addimihii suna waa 34X20 kuna dadhjya mq. 680/—.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDATAN:

A) Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koorur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Xalane
B a r i waxaa ka xiga: Warshadda Bayl

B) Waqooyi waxaa ka xiga: Jid
Koorur waxaa ka xiga: Dhul dad
Galbeed waxaa ka xiga: Waddada Xalane
B a r i waxaa ka xiga: Warshadda Bayl

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 8 Apr. 1987

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH
(J.le Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

L. 367

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xasan Yuusuf Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd Lam. 29196 oo jaga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 99.000 kuna qoran magaca J.le Xasan Yuusuf Maxamed sida ku cad warqadda lam. 1066 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 29196 oo laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sr.So. 99.000 kuna qoran magaca J.le Xasan Yuusuf Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xasan Yuusuf Maxamed lacagta cadaadeedu tahay Sh.So. 99.000 oo ku qoran Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.7.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 384

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Xajii. mo Garaad Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 11 Jeeg War. ee hoos ku taxan, kuna jirto guud ahaan jacag dhan Sh.So. 1.010.000/= kuna wada qoran magaca J.le Axmed Maxa. med Ciise sida ku cad warqadda lam. 6538 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kydka Soomaaliyeed Laanta Baran;

J.W.No.	Sh.So.	Magaca ku qoran			Laanta
0203529	100.000	Axmed	Maxamed	Ciise	Baran
0203530	100.000	»	»	»	»
0203531	100.000	»	»	»	»
0203532	100.000	»	»	»	»
0203533	100.000	»	»	»	»
0203534	100.000	»	»	»	»
0203535	100.000	»	»	»	»
0203536	100.000	»	»	»	»
0203537	100.000	»	»	»	»
0203538	100.000	»	»	»	»
589473	10.000	»	»	»	»

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku xusan lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baran kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.010.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Maxamed Ciise.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baran in ay siiso J.le Xaliimo Garaad Maxamuud lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.010.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aan. ka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le C/salaan Maxamed Muuse;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 589634 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000 kuna qoran magaca J.le Yaasiin Sheekh Saalax sida ku cad warqadda lam. 6882 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baran;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 589634 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baran kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000 kuna qoran magaca J.le Yaasiin Sheekh Saalax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baran in ay siiso J.le C/salaan Maxamed Muuse lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 20.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 386

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qorţay Jaalle Axmed Maxamed Xuseen;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. Lam. 0728300-0728299 kuna kaja jirţo lacag dhan Sh. So. 50.000 iyo Sh.So. 40.000 guud ahaan Sh.So. 90.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Maxamed Xuseen;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In ja baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0728300-0728299 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanţa 5aad kuna jirţo lacag dhan guud ahaan Sh.So. 90.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Maxamed Xuseen.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 5aad in ay siiso J.le Axmed Maxamed Xuseen lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 90.000 oo ah bedelkii Jeegagga War .ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maaliinţa go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 387

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug ka dib:-

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Xasan Maxamuud oo Daneeye u ah Agoontii Marxuum:- Aadan Xasan Maxamuud, uuna ku eodsaday in loo cusboonaysiiyo Jeegagga Warqega oo hoos ku taxan kuna qoran magaca Marxuum: -Aadan Xasan Maxamuud oo ka qaatay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo 25.5.1988;

MARKUU ARKAY: Warqadda Taariikhdeedu tahay 27.6.1988 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, laguna caddeeyey in ay Jeegaggaasi lumeen. Baafin guudna laga sameeyey;

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Xeer Sharci L. 2 soona baxay 9.9.1965kii.

AMMAXAMA UUXUU

In la baabi'iyo Jeegagga hoos ku taxan oo horay looga qaatay Laanta B.G.K.S. ee Gaalkacyo, loona cusboonaysiiyo Maxxuumka kor ku xusan Jeegagga kala ah:-

1)	J.W.	Lr.	1137438	ayna	ku	qoran	tahay	Sh.So.	100 000/=
2)	»	»	1137439	»	»	»	»	»	100 000/=
3)	»	»	1137440	»	»	»	»	»	100 000/=
4)	»	»	1137441	»	»	»	»	»	100 000/=
5)	»	»	1137442	»	»	»	»	»	100 000/=
6)	»	»	1137443	»	»	»	»	»	100 000/=
7)	»	»	1137444	»	»	»	»	»	100 000/=
8)	»	»	1137445	»	»	»	»	»	100 000/=
9)	»	»	1137446	»	»	»	»	»	100 000/=

Ka dib markii Amarkaan lagu qoro Faajinta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah; haddii aan jis hortaag laga keenin muddadaas ka hor, waana in Jeegagga cusub gacanta laga geliyaa Daneeye:- Cabdulqaadir Xasan Maxamuud amase cid Wakaalad Sharci ah ka sidata isaga.

Gaalkacyo, 17.7.1988

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/MUDUG

(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug ka dib:-

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle:- Axmed Diiriye Maxamuud Tr. tahay 25.6.1988 uuna ku codsaday in loo cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega oo hoos ku qoran, oo uu ka qaatay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo 25.5.1988;

MARKUU ARKAY: Warqadda Taariikhdeedu tahay 27.6.1988 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, laguna caddeeyey in ay Jeegaggaasi lumeen. Baafin guudna laga sameeyey;

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Xeer Sharci L. 2 soona baxay 9.9.1965kii.

WUXUU AMRAYAA

In la baabi'iyo Jeegagga hoos ku qoran oo uu Jaallahaasi Bangiga horay uga qaatay, loona cusboonaysiiyo Jeegagu dhigma, Jeegaggaas oo kala ah:-

1) J.W. Lr. 1137419 ayna ku qoran tahay Sh.So. 100.000/=
2) » » 729313 » » » » » » 13.000/=

Ka dib markii go'aankaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah; haddii aan muddadaas ka hor ishortaag laga keenin, waana in Jeegagga cusub oo la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle:- Axmed Diiriye Maxamuud amase qof Wakaalad Sharci ah ka wata.

Gaalkacyo, 17.7.1988

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle C/samed Cali Xaashi;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 165860 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Cabdisamed Calj Xaashi sida ku cad warqadda lam. 7032 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Jilib;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 165860 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Jilib kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Cabdisamed Cali Xaashi.

WAXAA LA AMRAYAA

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Jilib in ay siiso J.le Cabdisamed Calj Xaashi lacagta cadadeedu dhan ay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faahinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 390

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qorţay Jaalle Cali Sugaal Cismaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 3088 kuna jirţo lacag dhan Sh.So. 10.573.33 kuna qoran magaca J.le Cali Sugaal Cismaan sida ku cad warqadda lam. 203 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanţa Wardhiigley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 3088 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanţa Wardhiiglay kuna jirto lacag dhan Sh.So. 10.573.33 kuna qoran magaca J.le Cali Sugaal Cismaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanţa Wardhiiglay in ay siiso J.le Cali Sugaal Cismaan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 10.573.33 oo ah bedelkii Buug Kayd-ka kor ku qoran markay ka soo wareegţo muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daa baco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 391

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Aadan Maxamed Xirsi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 1156497_1156498 kuna kaja jirto lacag dhan min Sh. So. 100.000 isugeyn Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca J.le Aadan Maxamed Xirsi sida ku cad warqadda lam. 7098 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta laad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 1156497_1156498 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta laad kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca J.le Aadan Maxamed Xirsi.

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta laad in ay siiso J.le Aadan Maxamed Xirsi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 392

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdiraxmaan Faarax Sugaal;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 4 Jeeg War. ee hoos ku tilmaaman kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 1,700.000 kuna wada qoran magaca Cabdiraxmaan Faarax Sugaal, sida ku cad warqadda Lam. 7219 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

J.W.No.	Taarii.	Sh.So.	Magaca ku qoran			
0179530	16.6.88	500.000	C/raxmaan	Faarax	Sugaal	Xarunta
0179531	»	500.000	»	»	»	»
0179532	»	200.000	»	»	»	»
0158794	19.5.88	500.000	»	»	»	»

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee kor ku xusan laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1,700.000 kuna wada qoran magaca C/raxmaan Faarax Sugaal.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta, in ay siiso J.le C/raxmaan Faarax Sugaal lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.700.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aankaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan ka imaanin wax ishortaag ah.

Muqdisho, 28.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle C/raxmaan Faarax Sugaal;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0475670 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Axmed Xuseen Maxamed sida ku cad warqadda jam. 7219 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortament$_O$) Jeeg War. Lr. 0475670 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad ku jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Xuseen Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad in ay siiso J.le Cabdiraxmaan Faarax Sugaal lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan, markay ka wareegto muddo aan ka yarayn 15 beri laga bilaabo maalinta go'aankan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 394

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle C/qaadir Maxamed Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lam. 0753792-0753793 kuna kaja jirto min Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca C/qaadir Maxamed Aadan, sida ku cad warqadad lam. 7212 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marko;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0753792-0753793 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marko, kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca C/qaadir Maxamed Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Barko. in ay siiso J.le C/qaadir Maxamed Aadan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee ker ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aankan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 395

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qorţay Jaaţle Naasir Soomane Khayre;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0975504 kuna jirţo lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Naasir Soomane Khayre sida ku cad warqadda lam. 7371 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanţa Kismaayo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0975504 ţaga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanţa Kismaayo kuna jirto ţacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Naasir Soomane Khayre.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo in ay siiso J.le Naasir Soomane Khayre ţacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedel Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood ţaga bilaabo maalinta go'aankan ţagu daabaco Faafinţa Rasmiga ah ee JDS, haddii inţa ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.7.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 396

IIB MA GALO

FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية



KE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 17ka Agoosto 1988, L. 1 R 8

Laamta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

FAAFIN BIL 200 BAXA

QIIMAHU: waa 5 shilin lambar waliba — HUKUMAA: Sanaadi waa Sh. 100 Soomaaliya guusaaca — qiimaheeda waa Shs. 200. Hukumaa i aweydiisto wuxuu ka dhaadhaa 3 bannaayo. Qiimaha qoraalkii F.R. hayay waa ka yar waa 2 Sh. — Hukumaa iyo qoraalkii waa in la weydiiyaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 17 ee 17 Luul. 1988, Oggolaanshaha Xisaab_Xirka Miisaaniyadda Dawladda ee Sannadka 1987. Bog; 589

SHARCI L. 18 ee 26 Luul. 1988, Oggolaansho Meelmarin Heshiis kaalmo farsamo ee dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caisse Centrale. » 590

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 38 ee 14 Luul. 1988, Billad Dahab Hawlkarnimo. » 591

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 39 ee 14 Luul. 1988, Bilad Qalin Hawlkarnimo. » 592

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 40 ee 14 Luul. 1988, Bilad Maar oo Hawlkarnimo. » 593

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 41 ee 14 Luul. 1988 Bilad Maar ah oo Hawlkarnimo. » 595

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 42 ee 14 Luul. 1988, Bilad Maar ah oo Hawlkarnimo. » 596

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 43 ee 14 Luul. 1988, Bilad Maamuus «Commendatore oo lagu Maamuusay Professor Goosh. » 597

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 44 ee 13 Luul. 1988, Magacaabid Ku-Xigeenno Xeer-Ilaaliye Guud M.B.D. » 598

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 16, ee 14.6.88, Aqoonsi Urur Samaaj. » 599

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.7.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran C/casiis Sayid Axmed L. 394 » 600

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.7.88, Lumid Buug Kayd L. 25647 ku qoran Shariif Maxamed Axmed L. 395 » 601

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.7.88, Lumid Jeeg War. L. B.0733844 ku qoran Faaduma Sabriye Samantar L. 396 » 602

MAXKAMADDA G. BANAADIR 13.7.88, Lumid Jeeg War. L. 716314 ku qoran Yaasiin Sh. Saciid L. 397 » 603

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.7.88, Lumid Jeeg War. L. 1042567 ku qoran Maxamed

MAXKAMADDA G. BANAADIR 11.6.88, Lumid Jeeg War. L. 1038735 ku qoran Deeqa Maxamed Xersi L. 399 » 605

MAXKAMADDA G. BANAADIR 2.8.88, Lumid 7 Jeeg War. ku qoran Cabdi Xasan Macalin L. 400 » 606

MAXKAMADDA G. BANAADIR 3.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0337248 ku qoran Suudi Mire Saalax L. 401 » 607

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 12.7.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdulle Bilaal Muuse L. 402 » 608

MAXKAMADDA G. BANAADIR 3.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0703924 ku qoran Aamina Ciise Warsame L. 403 » 609

MAXKAMADDA G. BANAADIR 15.8.88 Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Maxamed Abuukar Calj L. 404 » 610

MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0039593 ku qoran Aadan Cali Macalin L. 405 » 611

MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.8.88, Lumid 6 Jeeg War. ku qoran Maxamed Cabdi Maxamed L. 406 » 612

MAXKAMADDA G. BANAADIR 7.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0190912 ku qoran Maxamuud Xuseen Xireey L. 407 » 613

MAXKAMADDA G. BANAADIR 8.8.88 Lumid 11 Jeeg War. ku qoran Aadan Cali Xasan L. 408 615

QEYBTA KOOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 17 ee 17 Luulyo 1988: Oggolaanshaha xisaab-xirka Miisaaniyadda Dawladda ee sannadka 1987.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday Xisaab-xirka Miisaaniyadda 1987 oo ah sida ku tifaftiran lifaaqa Sharcigan.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro Baaftada Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17 Luulyo 1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 18 ee 26ka Luulyo 1988: Oggolaansho meelmarin Heshiis kaalmo farsamo oo dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caisse Centrale (Wrashadda Shamiintada Berbera).

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caisse Centrale ee Dalka Faransiiska, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan 23,000,000 Farank-faransiis oo loogu talo galay Kaalmo Farsamo ee Warshadda Shamiintada Berbera.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho, markii ay taariikhdu ahayd 15 Maajo 1988.

3. Heshiiskan waxa uu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay fulmaamayaan Heshiiska ku qoran Qod. 1aad ee Sharcigan, waxaa dhaqangelintooda la waafaqinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Qodobbada Heshiiskan.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiskan.

Qod. 4aad

Sharcigan waxa uu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26.7.1988

MADAXWEYNAHA JDS

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 38 ee 14 Luulyo 1988: Billad Dahab Hawlkarnimo oo lagu maamuusay Jaalle Marxuum G/Sare Axmed Aadan Cabdi oo ka tirsan NSSTA

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Taliyaha Nabad Sugidda Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: In Marxuum G/Sare Axmed Aadan Cabdi ahaa qof muujiyey aqoon xirfadeed sare, Hawlkarnimo, Waddanimo, Daacadnimo, Geesinimo iyo sidii burcadku u dileen isagoo haya hawlqaran;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey Hawlkarnimo Geesinimo iyo isagoo bagar la'aan u gutay waajibaadkii ka saarnaa ilaa uu ku dhintay shirqoolkii burcadku u dhigeen lagu maamuuso xusuus ahaan aqoonsiga uu ka mudanyahay Ummaddiisa, lagana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay BILLAD DAHAB AH Marxuum G/Sare Axmed Aadan Cabdi oo ka tirsan Ciidanka NSSTA Hargeysa (Xasuus ahaan).

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 39 ee 14 Luuljyo 1988: Billad Qalin Hawlkarnimo oo lagu maamuusay xasuusta Jaalle Marxuum Xid/le Ismaaciil Cumar Askari iyo Xid/le Marxuum Axmed Ilyaas Xaaji oo ka tirsan NSSTA.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Taliyaha Nabad Sugidda Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: In Marxuumiinta Xid/le Ismaaciil Cumar Askari iyo Xid/le Axmed Ilyaas Xaaji ahaayeen Jaaliyaal muujiyey Hawlkarnimo, Wadaninimo, Daacadnimo, Geesinimo iyo Iyagoo hagar la aan u gudbay waajibaadkii ka saarnaa ilaa ay ku dhinteen shirqoolkii burcadku Magaalada Hargeysa ugu dhigeen Taariikhdu markay ahayd 19.12.1986 lagu maamuuso xusuus ahaan aqoonsiga ay ka muuqanyihiin dhammaadooda, laganana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MDJS.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIKA

Waxaa lagu maamuusay Billad Qalin Hawlkarnimo ah Marxuumiin Xid/le Ismaaciil Cumar Askari iyo Xid/le Axmed Ilyaas Xaaji oo ka tirsan Ciidanka NSSTA Hargeysa (Xusuus ahaan).

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 40 ee 14 Luulyo 1988: Billad Maar ah oo Hawlkarnimo lagu Maamuusay Jaalleyaasha: G/Sare Cabdinaasir Xaaji Xaashi, G/Sare Yuusuf Axmed Maxamuud (Qarawi), G/le Cabduraxmaan Cali Biixi, S/le Daahir Guuleed Warsame, S/le Cabdullaahi Xasan Diirshe iyo Ex. S/le Cabdi Ciise Ducaale.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasaaradda Gaashaandhigga iyo Wasaaradda Hawlaha Guud; (HCB/23/3-220/86 ee 24.12.86 iyo WHG&G/SIR/6/85/0142;

MARKUU TIXGELIYEY: In Jaalleyaasha G/Sare Cabdinaasir Xaaji Xaashi, G/Sare Yuusuf Axmed Maxamuud (Qarawi), G/le Cabduraxmaan Cali Biixi, S/le Daahir Guuleed Warsame, S/le Cabdullaahi Xasan Diirshe iyo Ex. S/le Cabdi Ciise Ducaale ay Muujiyeen Hawlkarnimo sidii ay uga Hawlgaleen Masruuca dhismaha Waddada ee laga hirgeliyey Muqdisho, Jasiira iyo Marka;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in qoraal ku sidoobay Hawlkarnimo dheeraad ah isagoo u gudbay si hagar la'aan ah waajibaadkii ka saarnaa Dalkiisa iyo Sharafta Ummaddiisa la guddoonsiiyo aqoonsiga uu ka muuqan yahay Waddankiisa, loogana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay Billad MAAR HAWLKARNIMO AH, Jaalleyaasha: G/Sare Cabdinaasir Xaaji Xaashi, G/Sare Yuusuf Axmed Maxamuud (Qarawi), G/le Cabdu-

raxmaan Cali Biixi, S/ɟe Daahir Guuɟeed Warsame, S/ɟe Cabdullaahi Xasan Diirshe iyo Ex. S/ɟe Cabdi Ciise Ducaale.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalɟe Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 41 ee 14 Luulyo 1988: Bil-

lad Maar Hawlkarnimo oo lagu maamuusay, Degmada Cadale, Wakaaladda Daaqa Qaranka, Mashruuca Horumarinta Xeebaha.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Kaalmiyaha Xoghayaha Guud ee XHKS iyo Guddoomiyaha Hoggaanka Cilmi Baarista iyo Hanuuninta Golaha Dhexe X.H.K. Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: Dadaalka iyo wax-qabadka ay muujiyeen Degmada Cadale, Wakaaladda Daaqa Qaranka iyo Mashruuca Horumarinta Xeebaha sidii ay dagaalka ka'an ugu qaadeen Bacaad celinta iyo Dhireynta iyagoo beddelay Dabeecadda Deegaanka Cadale;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in Hay'addii ama Hay'adnii ku shaqeeyey Kacaannimo, Waddaninimo, Hawlkarnimo niyadsami iyagoo ku gutay si hagar la'aan an waajibaadkii ka saarnaa Daqkoodi, Ummaddoodi iyo Shaqaalnin ay wakiilka ka ahaayeen la guddoonsiiyo aqoonsiga ay ka mudan yihiin Waddankooda, lagana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxa lagu maamuusay BILLAD MAAR HAWLKARNIMO: Degmada Cadale, Wakaaladda Daaqa Qaranka iyo Mashruuca Horumarint aXeebaha.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 42 ee 14 Luulyo 1988: Billad Maar ah oo Hawlkarnimo lagu maamuusay Jaalle S/Guuto Jaamac Xirsi Cumar.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65 ee 19ka Okt. 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraalladii iyo warbixintii Taliyaha Ciidanka Booliska Jaalle S/Gaas Aadan Cabdi Ducaale;

MARKUU TIXGELIYEY: Qaybtii muhiimka ahayd ee uu ka qaatay Hirgelinta dhismaha Xarunta Dhexe ee XHKS;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey niyad sami iyo hawl jacayl iyo daacadnimo, kana qayb qaatay gudashada hawlaha qaranka, looga reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.;

WUXUU SOO SAARAY:

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAAR AH EE HAWLKARNIMO Jaalle S/Guuto Jaamac Xirsi Cumar oo ka trisan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 43 ee 14 Luuljyo 1988: Bil-

lad Maamuus «Commendatore» oo lagu maamuusay Professor GOOSH ANDREZJEWISKI & Mudane James Hohnsan.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo tan Safiirka JDS u fadhiya London;

MARKUU TIXGELIYEY: Professor Goosh Andrezjewiski tan iyo 1952 xiriir joogta ah la soo lahaa Dalkeena, muddadaa ka shaqeeyey kor u qaadidda, faafinta iyo taabo geljnta Suugaanta, qoridda iyo horumarinta luqadda Soomaaliyeed ilaa uu gaarsiiyey in Jaamacadda London «School of Orjantal Studies» Afka Soomaaligu ka mid noqday afafka looga qaadan karo Shahaado sare ee loo yaqaan M.A. iyo Mudane James Johnson tan iyo 1954 wuxuu ka mid ahaa mudanavaasha Golaha Baarlamaanka Ingiriiska uga dooda Soomaaliva daneeyana arrimaheeda;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey niyad sami iskaashi iyo horumarin labada Ummadood, la guddoonsiiyo Aqoonsiga uu ka mudanyahay Ummadda Soomaaliyeed iyo Dawladdaba, loogana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta M.J.D.S.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAAMUUS «COMMENDATORE» Professor Goosh Andrezjewiski iyo Mudane JAMES JOHNSON labaduba u dhasheen Waddanka Ingiriiska.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha JDS soo saxiixo.

Muqdisho, 14.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 44 ee 13 Luulyo 1988 Ma-

gacaabid Xu-Xigeenno Xeer-Ilaaliye Guud.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharci lam. 3, soona baxay 10kii Jannaayo 1970kii, kuna saabsan dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo wixii beddelaad ku dhacay;

MARKUU TIXGELIYEY: Tala soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka tirsigeedu yahay 468/MD1/88 ee 11.7.1988;

WUXUU GO'AAMIYAY

Xeerka soo socda:-

Qod. 1aad

G/le Cabdi Gacal Caddoow iyo L.X/le Axmed Cali Xuseen oo labaduba ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed waxaa loo magacaabay Ku-Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Badbaadada Dalka;

Qod. 2aad

Ku-Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud waxay yeelanayaan gunno dhan Sh.So. 800/= (Siddeedboqol) bishii qofkiiba, waxaana laga bixinayaa Miisaaniyadda Agaasinka Guud ee Lacagta MJDS, iyo Gunnada Garsoorka;

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13.7.1988

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay.
Diiwaanka L. 4 bog. 60
Muqdisho, 17.7.88,
Hantidhawraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Calj

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 45, taariikh 26.7.1988:

Meelmarin Heshiis kaalmo farsamo oo dhexmaray JDS iyo Hay'adda Caisse Centrale ee Dalka Faransiiska.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5, iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 18 ee 26ka Luulyo ber 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 45 ee 26ka Luulyo 1988 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu uu ku oggolaaday Heshiiska kor ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caisse Centrale ee Dalka Faransiiska, kuna saabsan amaah lacageed oo loogu talo galay kaalmo farsamo ee Warshadda Shamiintada Berbera.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa awood sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26.7.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Decree no. 45 of 26.7.1988: Instrument of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution;

HAVING SEEN: The Law no. 49 of 23 December 1984;

HAVING SEEN: The Law no. 18 of 26.7.1988, on the base of which the People's Assembly has aproved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

The following Decree:

Article 1

The Loan Facility Agreement between the Somali Democratic Republic and the Caisse Centrale de Cooperation Economique, signed in Mogadishu on 15.5.1988 and concerning the continuation of the technical assistance for the Berbera Cement Factory, is hereby ratified .

Article 2

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of Somali Democratic Republic.

Article 3

This Decree shall come into force upan signature by the President of Somali Democratic Republic and shall published inOfficial Bulletin of the State.

Mogadishu, 26.7.1988

THE PRESIDENT OF SDR
(Mohamed Siad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 16 ee 14.7.1988

Aqoonsi Ururka Samafalka HELIS.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qod. 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay abuurista Ururada noocani ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka HELIS oo ah urur samafal, ujeeddadiisuna tahay taakuleynta Bulshada dan yarta ah dhinacyada daawada iyo Gargaarka arrimaha Caafimaadka.

Qod. 2aad

Ururka Samafalka Heljs wuxuu saldhiggiisa noqonayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

Muqdisho, 14.7.1988

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacaadle)

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulcasiis Sayid Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. Lam. 0732717-0732718 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna kala jirto lacag kala ah Sh.So. 50.000 iyo Sh.So. 40.000 isugeyn Sh.So 90.000 kuna qoran magaca J.le Cabdulcasiis Sayid Axmed sida ku cad warqadda lam. 6368 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0732717-0732718 oo laga sameeyey Laanta Xaruntа ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 90.000 kuna qoran magaca J.le Cabdulcasiis Sayid Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdulcasiis Sayid Axmed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 90.000 oo ku qoran Jeegagga Wareega oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.7.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 394

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Shariif Maxamed Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu jumay Buug Kayd lam. 25647 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 7.199.67 kuna qoran magaca J.le Shariif Maxamed Axmed sida ku cad warqadda Lr. 1130 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 25647 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 7.199.67 kuna qoran magaca J.le Shariif Maxamed Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Shariif Maxamed Axmed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 7.199.67 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Fuafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.7.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 395

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Faadumo Sabriye Samatar;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. B.0733844 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 38.000 kuna qoran magaca J.le Faadumo Sabriye Samatar, sida ku cad warqadda lam. 7213 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento Jeeg War. Lr. B.0733844 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 38.000 kuna qoran magaca Faadumo Sabriye Samatar.

WAXAA LA AMRAYAA

MAXKAMADDA G. BANAADIR 20.8.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Maxamed Mire Aadan L. 429 » 675

MAXKAMADDA G. BANAADIR 29.8.88, Lumid

MAXKAMADDA G. BANAADIR 27.8.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Axmed Nuur Abuukar L. 431 » 677

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.8.88, Lumid 9 Jeeg War. ku qoran Nuur Axmed Xalane L. 432 » 678

MAXKAMADDA G. MUDUG 25.8.88, Lumid 5 Jeeg War. ku qoran Maryan Daahir Hoori L. 433 » 679

MAXKAMADDA G. BANAADIR 29.8.88. Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdi CaliGeedi L.434 » 680

MAXKAMADDA G. MUDUG 29.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0189584 ku qoran Shuuriye Cadow Colow L. 435 » 681

MAXKAMADDA G. BANAADIR 25 8.88. Lumid Jeeg War. L. 0665685 ku qoran Maxamed Xaaji Nuur L. 436 » 682

MAXKAMADDA G. BANAADIR 14.8.88. Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Faadumo Sh. Axmed L. 437 » 683

MAXKAMADDA G BANAADIR 14 8 88. Lumid Jeeg War L. 0071169 ku qoran Cabdullaahi Xasan Sadiiq L. 438 » 684

MAXKAMADDA G. J/HOOSE 25.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0744719 ku qoran Ibraahim Haajir Sheekh L. 439 » 685

MAXKAMADDA G. BANAADIR 31.8.88, Lumid Jeeg War. L. 0199404 ku qoran Aamina Ibraahim Xasan L. 440 » 686

QAYBTA LABAAD

X E E R

Xeer Sharci lambar 7, taariikh 15 Agoosto 1988: Wax ka beddelid Sharci lambar 6 ee 28.12.1971, kuna saabsan can-shuurta macaashka daaraha.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharci lambar 6 ee 28.12.1971;

MARKUU ARKAY: Sharci lambar 5 ee 5.11.1966;

MARKUU GARWAAQSADAY: Baahida degdegga ah ee loo qabo wax ka beddelidda Canshuurta macaashka daaraaraha;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaarada Maaliyadda iyo Lacagta;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

Xeer-Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Boqoleyda canshuurta macaashka daaraha ee ku xusan Qodobka 1aad ee Sharciga lambar 6 ee 28.12.1971, waxaa loo beddelay sida soo socota:

I) Dakhliga sannadka ee daaraha marka hore waxaa laga jarayaa 20%, sida uu jideynayo Qodobka 23aad ee Sharci lambar 5 ee 5.11.1966.

II) Haraaga waxaa loo canshuurayaa:

— Ilaa Shs. 120.000: 22,5%;

— Min Shs. 120.001 ilaa Shs. 240.000: 25 %;

— Wixii ka badan Shs. 240.001: 30 %;

Qod. 2aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda isagoo loo gudbinayo Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 15 Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer_sharci lambar 8, taariikh 15 Agoosto 1988: Wax ka beddelid sharci lambar 2 ee 7.1.1984, kuna saabsan canshuurta gadista.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharci lambar 2 ee 7.1.1984;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida degdegga ah ee loo qabo dib u habeynta canshuurta gadista;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaarada Maaliyadda iyo Lacagta;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

Xeer_Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qodobka 1aad ee Sharci lambar 2 ee 7.1.1984 waxaa loo beddelay sida soo socota:

« Canshuurta gadista waxay ku waajibeysaa badeecooyinka iyo adeegyada hoos ku tilmaaman:

B) BADEECADAHA:

1. Soo dejinta;
2. Ganacsiga jumlada;
3. Badeecadaha ay soo saaraan Warshadaha Dalka.

T) ADEEGYADA:

1. Qaansheegtada hoteellada;
2. Adeegga Wakiillada Maraakiibta (Shipping Agence);
3. Iidhehda iyo ogeysiisyada;
4. Tikidhada isboortiga, shineemada iyo riwaayadaha;
5. Qaansheegtada dhardhaqyada qalalan (dry cleaning), dhaqidda baabuurta; kirada cajaladaha, makhaayadaha cuntada iyo cabidda ee darajada koowaad, sawirada iyo qoraalka gacanta (arts) iyo timo qurxinta haweenka (paruchiere) iyo timo jaridda ragga (barbieri).

Qod. 2aad

Tacriifada canshuurtu waxay noqoneysaa sida soo socota:

b) Badeecooyinka 10%;
t) Adeegga 5%

Qod. 3aad

1. Canshuurta ku waajibtay riwaayadaha iyo shineemoo yinka waa in lacag ahaan loogu soo gudbiyaa Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagta, waxaana masuul ka ah uruurinta iyo soo gudbinta canshuurtaas Maamulayaasha goobaha la. gu dhigay Shineemada ama Riwaayadda.

2. Sidoo kale canshuurta ku waajibtay isboortiga, iidheh da iyo ogeysiisyada iyo adeegyada Wakiillada maraakiibta waxaa soo gudbinaya Wasaaradda Isboortiga, Wasaaradda Warfaafinta iyo Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta.

Qod. 4aad

Habraaca uruurinta iyo ciqaabaadka la xiriira canshuurtan waxaa loo raacayaa axkaanta sharci lambar 2 ee 7.1.84.

Qod. 5aad

Xeer-sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuurivadda isagoo loo gudbinayo Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 15 Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 45 ee 9 Agoosto 1988, Dhismo Guddi Baaris Heer Qaran.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. yanay 49 ee 23 Disembar 1984;

MARKUU ARKAY: Dhibaatooyinkii foosha xumaa ay u geysteen Goboladda waqooyi ee Dalka J.D.S. Burcaddii dhawaan dhacdda ka soo weerartay;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tanay in baaris iyo talo ka bixin lagu sameeyo heerka uu ja egyanay dhibaatooyinka iyo khasaaradda soo gaartay Goboladaas loona magacaabo Guddi Heer Qaran ah oo isugu jira Xisbiga, Golaha Shacbiga iyo Dawladda;

ISAGOO GUDBINAYO: Xikmisa ku qeexmaanan qodobka 4aad Sharciga Dastuuriga ah ee Lambarkiisu yahay 49, soo-na baxay 23 Disembar 1984.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la dhisay Guddi baaris iyo talo bixin Heer Qaran ah oo ka kooban Xisbiga, Golaha Shacbiga iyo Dawladda.

2. Xubnaha Guddiga waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne oo gaar ah.

Qod. 2aad

WAAJIBAADKA GUDDIGA

1. Waa in uu si dhab ah u baaro weerarkii burcadda ku soo qaaday Degmooyin ka mid ah Gobolada Waqooyi fikradda iyo ulajeedada ka dambeysay, khasaarooyinka ay u geysteen Dadweynaha Goboladaas degeen iyo heerka ay la egyihiin.

2. Waa in uu soo jeediyo talooyin ku saabsan sidii wax looga qaban lahaa xag dhaqaale, bulsho, nabadgelyo iyo siyaasadba.

Qod. 3aad

kasta oo uu xilgudashadiisa uga maarmi waayo. Wuxuu kaloo isla ujeedadaas darteed u tagi karaa meel kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya.

2. Qof kasta oo is hortaagaa ama carqalaaceeya ama ka geysanwaayaa taageero isagoo la weydiistay xilgudasnaqaan Guddigu wuxuu ka qaadi karaa tallaabo asluubeed, haddii uusan keenin dambi ka weyn.

Qod. 4aad

Guddigu wuxuu natiijada baaristiisa iyo talo bixintaba u soo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya sida ugu dhakhsaha badan.

Qod. 5aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa faaifnta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 46 ee 9 Agoosto 1988, Ma-gacaabid Xubnaha Guddiga Baarista ee Heer Qaran.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. yanay 49 ee 23 Di sembar 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 45 taariikh 9.8.88 ee lagu abuuray Guddiga Baarista ee Heer Qaran;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalliyaasha soo socda waxaa loo magacaabay Xubna-ha Guddiga Baarista ee Heer Qaran:

1.	Jile	Maxamed Buraale Ismaaciil	Guddoomiye
2.	»	Abdukar Xasan Weheliye	Guddoomiye ku-xigeen
3.	»	Maxamed Maxamuud Warsame	» »
4.	»	Maxamed Nuur Galaal	Xubin
5.	»	Maxamed Xasan Barre	»
6.	)	Cabdullaahi Maxamuud Xirsi «Ashcari)	»
7.	»	Cabduraxmaan Jaamac Maxamed	»
8.	»	Shire Suudi Maxamuud	»
9.	»	Maxamed Xarakoow Maxamed	»
10.	»	Maxamed Dhaqane Dhoore	»
11.	»	Cali Maxamed (Ilkacase)	»
12.	»	S/Guuto Cali Ismaaciil Maxamed	»
13.	»	Yuusuf Tallan Caji	»

Qod. 2aad

Guddigu wuxuu yeelan karaa ilaa labo guddi hoosaad oo ka kooban xubnihiisa oo ay kala hoggaaminayaan labada Guddoomiye ku xigeen. Dhismaha guddi hoosaadyada waa in uu noqdaa 7 iyo 5 si loo ilaaliyo nidaamka codka hal dhee-riga ah.

Guddi hoosaadyada waxaa loo magacaabay

baahdo, xubno aan ka mid ahayn guddigaan rasmiga ah oo loo xushay xirfad gaar ah.

Xubnahaas cod bixin kama qayb gelayaan.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 9 Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 47 ee 1da Luulyo 1988 U dalacsiin G/le Dhexe iyo Ku Magacaabid Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Xamar ee Jaalle Cabdi Maxamed Fiidow.

MADAXWaaYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga lagu dhisay Ciidanka Ilaalinta Degaanka Xamar;

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho;

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo arrinta ay ku saabsantahay soo-jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

Waxaa la gartey in G/le Cabdi Maxamed Fiidow loo dalacsiiyo G/le Dhexe isla markaana lagu magacaabo Taliyaha Ciidanka Ilaalinta Degaanka Xamar.

Qod. 2aad

Waxaa la gartey in G/le Dhexe Xaashi Daahir Cabdulle lagu wareejiyo Maamulka D/Hoose ee Muqdisho asagoo ka qaban doono jago Agaasime.

Qod. 3aad

Waxay Labada Jaalle ee ku kala xusan qod. 1aad iyo 2aad xaq u leeyihiin Gunno xil iyo mid guri ee jagooyinka loo kala magacaabay sharciguna u oggolyahay.

Qod. 4aad

Mushaarooyinkooda iyo Gunnooyinkooda waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda D/Hoose ee Muqdisho.

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 4 bogga lamb. 63
Muqdisho, 21 Luulyo 1988
Hantidhawraha Guud
Mr. Xuseen Cabdulle Cali
Muqdisho, 1da Luulyo 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 48 ee 8ad Agoosto 1988. Magacaabid Wasiir.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad, faqradda 1aad, xarafka (s) ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 14 ee 3da Juun 1962 iyo beddelaadyadii ka dambeeyey, kuna saabsan Nidaamka Dawladda;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta loo magacaabo Wasiir, kaddib markii ay jagadaasi bannaanaataay;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Dr. MAXAMUUD SACIID MAXAMED waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

Qod. 2aad

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 8.8.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 48/bis ee 1da Sebt. 1981. Hab Maamulka iyo Qaybinta Dhulka G/Banaadir.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 111aad ee Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lam. 46 ee 16.9.1979 ee uu ku dhaqan galay Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lagu dhisay golayaasha shacbiga degaanada Maamulka gobollada iyo degmooyinka Lam. 6 ee 12.2.80;

ISAGOO ARKAY: Qod 1aad ee sharciga Lambar 10 ee 17.12.80ka;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aanka Guddiga Joogtada ah ee golaha shacbiga Magaalada Xamar kuna taariikhavsan 11.7.81;

ISAGOO TIXGELIYEY: Duruufta ka taagan hab Maamulka dhulka gobolka Banaadir.

WUXUU SOO SAARAY AMARKAN:

Qod. 1aad

HABKA QAYBINTA DHULKA

Si qaybinta dhulka dhismo u noqoto mid ku salaysan qodobada sharciga Maamulka dhulka G/Banaadir oo lamharkiisu vahay 10 soona baxay 17.12.80 waxaa dhul bixinta gobolka Banaadir laga hab raaci doonaa amarkan.

Qod. 2aad

Caddaalad ku salaynta qaybinta dhulka.

Iyadoo la ilaalinayo Nidaamka ku sheegan Qodobada 3,4,5,6,7, iyo 8 oo sharciga Maamulka dhulka lana qaddarinayo himilada ah «in qof walba uu helo Buqcad uu ku dhisto Hoygiisa», dhul-bixintu waxay ku salaysanaanaysaa caddaalad iyo sinnaan, waxaana horumarinta leh qofka la hubivey in ay jirto baahi dhab ah, araajidiisana soo hor mariyey.

Qod. 3aad

WAAJIBAADKA WEYDIISTAHA BIXINTA DHULKA LEH ISTICMAALKA RASMIGA AH

waa in uu waaxda Maamulka dhulka Dowladda Hoose u soo ...aa Codsi ku qoran Warqadda Lixda shillin (6), wuxuu... soo raacinayaa Masawirkiisa, kaasoo lagu dhejinayo ...ab loogu tala galay.

Qod. 4aad

CADDEYSIIN IYO BUUXIN QAAB

1. Weydiistaha markii laga qabto arjiga uu soo qortay, lana diiwaan geliyo, waxaa loo celinayaa Nuqulka arjigiisa, waana in lagu dul qoraa caddeyn ah in laga qabtay nuqulkii asalka ahaa, isla markaa waxaa weydiistaha laga buuxinayaa qaabka (A).

2. Qaabka (A), oo xubinta hore lagu soo sheegay wuxuu ku saabsan yahay sugitaanka qofka iyo baahida uu u qabo dhulka uu soo weydiistay.

Qod. 5aad

XOGWARSI DEGMO

Waaxda iyo Maamulka dhulka, kaddi bmarkii loo soo gudbiyo arjiga weydiistaha qaabka «A», waxay xog-warran weydiisanaysaa Degmada uu qofku deggan yahay.

Degmada waxaa laga doonayaa in ay soo hubiso baahida dhabta ah oo weydiistaha, kaddibna waxay soo buuxinaysaa qaabka «B», waxayna u direysaa Waaxda Maamulka dhulka Dowladda Hoose ee Muqdisho.

Qod. 6aad

OGGOLAASHO IYO DIIDMO CODSI

1. Weydiistaha aan codsigiisa la aqbalin, kaddib markii la soo mariyo habka ay dhigayaan Qodobada hore lagu soo sheegay, waa in muddo bil-dhexdeed ah la siiyo Jawaab qoraal ah, iyadoo la ogeysiinayo sabaha keenay aqbalid la'aanta arjigiisa.

2. Weydiistaha codsigiisa la aqbalo, waa in Agaasimaha Waaxda Maamulka dhulka uu arjiga dushiisa ku qoraa Lambarka dhulka la siinayo, waxaana markaas warqadaha weydiistaha loo gudbinayaa Xubinta Maamulka, taasoo si rasmi ah ugu fureysa Galka dhul bixinta.

Qod. 7aad

1. Xubinta Maamulka, waxay galka dhul-bixinta u gudbineysaa xubinta dhulka leh isticmaalka rasmiga, taasoo booska qofka la siinayo hubaalin farsamo kaddib u sameyneysa afar nuqul oo ah naqshad dhuleed (Planimentria).

2. Hubsashada farsamo, waa in ay noqotaa mid tilmaan cad ka bixinaysa qaabka dhulka Cabirkiisa, inta uu ku fadhiyo iyo soohdintiisa, waana in uu saxiixaa Farsamayaqaan uu u xilsaaray Madaxa Xubinta dhulka leh isticmaalka rasmiga.

NAADINTA

Qod. 8aad

Xubinta dhulka leh isticmaalka rasmiga, waxay galka oo ay ku jiraan afar nuqul oo naqshad dhuleed ah iyo hubsashada farsamo, dib ugu celineysaa Madaxa xubinta Maamulka.

Xubinta Maamulka, waxay weydiistaha ka qabanceysaa qaabaha Sameynta Naqshad dhuleedka iyo lacagta naadada dhulka ee kuwada xusan Qod. 25aad isla Amarkan.

Qod. 9aad

SAMEYNTA NAQSHAD DHISMO

1. Kaddib markii ay dhamaato muddada naadada ku xusan, qod. 22aad ee Sharciga maamulka dhulka, lana ogaado in aysan jirin cid ka qabta wax dooda ah, waxaa weydiistaha la siinayaa laba nuqul oo ah naqshad dhuleedka si uu u soo sameysto naqshadda dhismaha dhulka.

Qod. 10aad

BAARID NAQSHAD DHISMO

1. Weydiistaha marka uu soo sameysto naqshadda dhismaha dhulka, wuxuu xubinta maamulka u soo gudbinayaa 3 nuqul oo ah naqshadda dhismaha, wuxuuna soo raacinayaa warbixinta farsamo iyo Codsiga oggolaansho naqshadda dhismaha.

2. Naqshaddu waa inay tahay mid u boggaansan

3. Weydiistaha qiimaha Baahidda Naqshadda dhisha.. .. ku sheegan wuxuu bixinayaa qodobka 26aad ee Amar-kaan.

Qod. 11aad

GUDDIGA OGGOLAASHADA NAQSHADDA

Xubinta Guddiga Oggolaashada Naqshadda, xilkoo-da, awoodooda iyo nab raacdda shaqo waxaa tilmaamaya Qod. 16aad ilaa Qod. 26aad ee Amarkan dhismaha Magaala-da Muqdisho.

Qod. 12aad

XOGHAYNTA GUDDIGA

Xubinta Maamulka, waxay galka weydiistaha oo ay ku jirto naqshaddii dhismuhu u gudbineysaa Xoghaynta Gud-.. Oggolaanshada Naqshadda dhismaha, taasoo hor kee-.eysa guddiga si uu u qabsado howsha uga aabaaran.

Qod. 13aad

OGGOLAASHO NAQSHAD DHISMO

1. Guddigu, kaddib markii uu baaro naqshadda, isla markaasna xaqiiqsado in ay u dhan yihiin shuruudaha tar-saha ee ku sheegan Amarkaan dhismaha Magaalada Muq-disho, wuxuu oggolaanayaa Naqshadda dhismo.

2. Naqshadda la oggolaaday, waxaa loo kala qaybina. yaa sida hoos ku qoran:-

B. 1 Nuqul waxaa la siinayaa weydiistaha, iyadoo la raacina-yo Qaabka Caddeynta oggolaashada naqshadda.

T. 2 Nuqul, waxaa lagu reebayaa galka dhul-bixinta ee wey-diistaha.

Qod. 14aad

DIIDMO NAQSHAD DHISMO

Naqshadda la Oggolaan waayo, waxay xoghayntu saxid awgeed dib ugu celineysaa weydiistaha, iyadoo isla markaas-

oggolaasho, isagoo hadba ka soo baxaya cilladahii hore loo_gu celiyay.

Weydiiştaha markasta oo lagu noqdo naqshaddiisa, waxaa laga qaadayaa kala bar ţacagtii looga qaaday oggolaa_shada naqshadda.

Qod 15aad

LACAG QABASHO

Kadib oggolaashada, naqshadda, xubinta Maamulka waxay weydiiştaha ka qaadeysaa qiimaha dhulka oo hadba ku xad xeer Madaxweyne, dhulka aan laalayn isticmaalka rasmiga qiimahiisa waxaa xaddidaya xeer uu soo saaray Wasiirka Maaliyadda, isagoo tilageyştay Duqa Magaalada Muqdisho.

Dakhliga ka soo gala Dowlaadda Hoose dhul_bixinţa, Wasaaradda Maaliyadda waxay ku leedahay 20%.

Lacagtaas iyada ah, waxaa Wasaaradda Maaliyadda Dowlaadda Hoose u gudbineysaa sidii Bilooska mar, seddexda bilood ee u dambeysa sannadka maaliyadda qaybţeeda wa_xaa la wareejinayaa ugu dambeynţa 20ka Disembar.

Qod. 16aad

SAXIIXYADA

Xubinta Maamulka, waxay gaska weydiistaha u gudbi_neysaa Xubinta dhulka leh isticmaalka rasmiga oo weydiis_ţana guddoonsiineysa, dhulka, waxayna isla mar ahaantaas diyaarineysaa 3 nuqul oo ah Warqadda siismada dhulka, waxaana wada saxiixaya farsamayaqaankii guddoonsiiyay, qofka la guddoonsiiyay iyo madaxa waaxda maamulka dhulka.

Qod. 17aad

FASAX DHISMO DHULKA LEH ISTICMAALKA RASMIGA

1. Haddii aan dhismaha lagu billaabin laguna dha_meystirin Muddo laba sano gudahood ah, waxaa loo qaada_nayaa fasax dhismo oo cusub.

2. Nuucyada iyo howlaha la xiriira dhismaha ee Fasax_

Magaalada Muqdisho.

Qod. 18aad

WARQADDA DEGSIIMADA

Markii dhismuhu dhamaado, lana hubiyo in dhismuhu yahay mid waafaqsan naqshaddii hore loo oggolaaday, waxaa qofku qaadanayaa warqadda ku isticmaalidda guriga (Certificato di Apitabilt o Servibilita).

Ugu dambeystii, waxaa qofka guriga dhistay la siinayaa Dekereetada Lahaanshada sharciyeed ee Guriga (Decreto di Libera Disponibilita), oo uu soo saxiixay Duqa Magaalada Muqdisho, laguna soo saarayo Faafinta rasmiga ah ee J.D.S.

Qod. 19aad

DHISMAHA SHARDISAN

Habka ku sheegan qodobada 16, 17, 18 ee isla Amarkan waa nidaamka la raacayo markuu dhismuhu yahay mid gaar ahaaneed.

Dhismooyinka Hay'adaha Dowladda loogama baahana Fasax qaadasho, mar haddii la guddoonsiiyo dhulka ay soo weydiisteen lagana oggolaado naqshadda dhismaha ay soo sameysteen.

Haddii dhulka la siiyo Hay'ad ku shaqo leh Nabadgelyada qaranka kuma qasbana in ay keento naqshad dhismeed, hase yeeshee waa in ay u hoggaan-sanaato jaangooyada guud iyo habka bilicsamida magaalada.

Qod. 20aad

BIXINTA DHUL LEH ISTICMAAL KUMEEL GAAR AH

Weydiistaha soo codsado dhul leh isticmaal ku meel gaar ah, waxaa la marinayaa habka ay dhigayaan qodobada 2, 3, 4, 5, 6, 7 ee Amarkan, kuwaasoo uu kala mid yahay qofka soo weydiistay dhul leh isticmaal rasmi ah.

Qod. 21aad

LACAG QABASHADA

Xubinta Maamulka, waxay weydiistaha ka qaadeysaa lacagta qiimaha dhulka (Diritto di Sopralougo), keddibna

siismada dhulka warqaddeeda, iyadoo guddoonsiiyuhu Xaqiijinayo in dhulkaas uu bannaan yahay.

Qod. 22aad

SAXIIXYADA

Warqadda siismada dhulka leh isticmaal ku meel gaar ah waxaa saxiixaya Duqa Magaalada Muqdisho ama qof uu wakiisho iyo Agaasimaha Waaxda Maamulka dhulka, wakayna ka kooban tahay 2 nuqul oo midkood la siinayo weydiistaha, midna wuxuu ku harayaa Baloogga xubinta maamulka, hal koobina waxaa loo gudbinayaa Taliska Ciidanka Xaalinta Degaanka Muqdisho.

Qod. 23aad

DHISMAHA

Dhulka leh isticmaalka ku meel gaarka ah oo lagu biilayay habka la soo sheegay, waxb laga dhisi karaa Nuucyada dhismo ee ku tilmaaman Xubnaha 3 iyo 4, ee Qod. 5aad ee Sharciga Maamulka dhulka ee Gobolka Banaadir.

Qod. 24aad

Bixinta Fasaxyada Dhulka leh isticmaalka Rasmiga

Haddii qofka dhulka la siiyey uusan dhismaha ku Billaabin kuna dhameyn Muddo Hal sano budaheed ah, waxaa khasab ku noqoneysa in uu qaato Fasax dhismo cusub, iyadoo la dhowrayo qod. 14aad ee Sharciga Maamulka dhulka, isaga oo fulinayo Shuruudaha hoos ku qoran:-

B. In uu keeno Codsi dhismo oo ku qoran Warqadda (6) shillin ah.

T. In la soo hubaaliyo Dhulka in uu yahay mid waafaqsan Shuruudaha u degsan dhulka leh isticmaalka ku meelgaarka ah.

J. In uu ku xiro Arjigiisa warqadda canshuurta ee sanadkasta ku waajibtay iyo warqad mulkiyeedka uu u haysto dhulka.

X. In uu bixiyo Xuquuqda lacageed ee la xiriirta adeegga oo uu sharcigu ku waajibiyay.

Qod. 25aad

QIIMAHA ADEEGYADA DHULKA

Qiimaha Adeegyada LABADA dhulba, waxaa xaddiyada Duqa Magaalada, isagoo dhagaystay Guddiga Joogtada Golaha Shacbiga Degaanka Xamar.

Adeegyada waxaa ka mid ah Samaynta naqshad dhuleedka, naadada dhulka, Baarista naqshadda dhismaha iyo Di bu baariddeeda, Fasaxyada dhismaha, Cusboonaysiinta, Warqadda Degsiimada guriga, IWM.

Wixii la xiriira qiimaha adeegyada ee aan lagu sheegin Amarkan, waxaa Go'aan ka gaaraya Duqa Magaalada Muqdisho.

Qod. 26aad

Kicinta ama Duminta Dhismaha Sharci Darrada ah

Marka la kicinayo Xaafad hore u degganayd si sharci darro ah, waxaa loo magacaabayaa guddi farsamo oo u xil saaran hubaalinta Xaaladaha ku sheegan Qod. 16aad ee sharciga Maamulka dhulka ee Gobolka Banaadir iyo Go'aan ka gaaridda wixii la xiriira arrimaha nidaaminta Xaafadda oo ayan habayn sharciga iyo Amarkaan.

Qofka laga dumiyo guri waxaa toos loo guddoonsiinayaa dhulkii uu degayay, kaddibna waxaa laga qaadayaa qiimaha dhulka, iyadoo la marinayo shuruudaha ku xusan Qod. 2, 3, 4, ee Amarkaan.

Qod. 27aad

KA XIL LA'AAN

Dawladda Hoose ee Xamar, xil kama saara wixii dhibaata ah ee ka yimaada haddii qofka dhulka la siiyay uusan wax ka dhisan muddada sharcigu sheegay wakhtiga ku qoran warqadda dhul-bixinta.

Qod. 28aad

GUDDIGA DACWOOYINKA DHULKA

Xubnaha Guddiga dacwooyinka Dhulka Gobolka Banaadir ee u xil saaran Xallinta Mashaakillada dhulka, waxuu ka koobnaanayaa:-

1. Ku-xigaha Duqa Magaalada Muqdisho Qaybta Arrimaha Bulshada Guddoomiye
2. Agaasimaha Waaxda Maamulka Dhulka Xoghaye

3. Agaasimaha Waaxda Xiriirka Dadweynaha Xubin
4. Qareen ka tirsan Garyaqaanka Guud »
5. Taliyaha Qaybta Booliska G/Banaadir »

Guddiga Dacwooyinka waxay u yeeran karaan Aqoonyahanno ama farsamayaqaanno kala soo taliya arrimaha laysku haysto ama u smeeya baaris aqooneed.

Go'aanka guddigu waa Idaari, waxaana racfaan looga qaadan karaa Maxkamadda Awoodda u leh, iyadoo la raacayo habka oogista dacwooyinka Madaniga ah.

Fadhiga Guddigu, wuxuu ansaxi karaa markii ay ka soo wada qayb galaan dhammaan xubnaha, waxaana laga sameynayaa war qor.

Haddii guddoomiyaha Guddigu ay ku timaado sabab uu u gudan waayo Xilkiisa, waxaa Guddiga Madax ka noqonaya Xubin ka tirsan Guddiga Joogtada ee uu soo magacaabo Duqa Magaalada Muqdisho.

Qod. 29aad

KALA GADASHO DHUL

Waxaa reeban, kala Iibsashoda dhul bannaan.

Waxaa la kala Iibsan karaa oo qura, dhulkii dhisan oo ay waaxda maamulka dhulkuna caddeysay in uu dhisan yahay.

Qod. 30aad

OGGOLAASHADA KALA GADASHADA

Waaxda Maamulka Dhulka, waxay bixinevsaa warqad caddeyn ah oo uu saxiixay Qof farsama yaqaan ah oo loo xil ---ay Howshaas; waxaa warqaddaas la bixin karaa marka uu farsamayaqaanku hubsado dhismaha dhulka, cashuuraha iyo naqshad dhuleedka in uu waafaqsan yahay qorraha Xaafadda, wuxuuna buuxinayaa qaabka «T» oo ku Lifaaqan Amarkan.

Qod. 31aad

DHAMAYSTIR

Wixii aan lagu sheegin Amarkaan, dhulna saameeya waxaa Go'aan ka gaaraya Duqa Magaalada Muqdisho, isa-

goo dhowraya Sharciyada u degsan waxyaabaha ay arrin_ taasu khuseyso.

Qod. 32aad

BARAATIKADA SOCOTA

Dhulka leh isticmaalka ku_meel gaarka ah ee Baraati_ kadiisu socoto, waa in lagu dhameystiro muddo 15 Maal_ mood kaddib ah laga billaabo maalinta uu Amarkan soo Baxo.

Qod. 33aad

BAABA'

Waxaa la baabi'iyay Amar kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin qodobada Amarkaan.

Qod. 34aad

DHAQAN GELID

Amarkani, wuxuu dhaqan gelayaa Maalinta uu Duqa Magaalada Muqdisho Saxiixo.

DUQA MAGAALADA MUQDISHO

(J.le Dr. Cabdullaahi Salaad Warsame)

Xoghayaha Guddiga Joogtada ah ee G/Shacbiga D/Xamar
(J.le Dr. Cabdullaahi Maxamed Siyaad)

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 8aad sharciga golayaasha Shac_ biga ee degaannada (sharci lambar 6 ee 12.2.80) wuxuu an_ saxiyey guddoonka Golaha Shacbiga Magaalada Xamar oo lagu soo saaray amarka Duqa Magaalada ee kor ku tilmaa_ man.

Muqdisho, 2da Luulyo 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(J.le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 19 ee 1.8.1988, Aqoonsi Urur Samafalka Beryosamo.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay Abuurista Ururada noocani ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Qod. 3aad

Waxaa si rasmi ah loo aqoonsaday Ururka Samafalka Beryasamo oo ah Urur samaral, ujeeddadiisuna tahay Daryeelka Caafimaadka dadka Soomaaliyeed oo Naafada ah.

Qod. 2aad

Ururka wuxuu Saldhiggiisa noqonayaa magaalada Muqdisho, wuxuuna Laamo ku yeelan karaa Gobollada iyo Degmooyinka Dalka.

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 1.8.1988

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacaadle)

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Shariif Xabiib;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0768203 ee laga sameeyey Laanta W/weyn ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca J.le Cusmaan Sheekh Daa'uud sida ku cad warqadda lam. 5010 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis.Guud kuna jirto Sh.So. 100.000;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0768203 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta W/weyn kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cusmaan Sh. Daa'uud.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta W/weyn ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cali Shariif Xabiib lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ku qoran Jeegga kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.5.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Sacid Cali Nuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lam. 0183779-126057 ah sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kayaka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа Kuna Kaid jirto Sh.So. 600.000 iyo Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Xaaji Cali sida ku cad warqadda lam. 9292 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayaka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0183779-126057 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayaka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 600.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Xaaji Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kayaka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа in ay siiso J.le Sacid Cali Nuur lacagta cadadeedu tanay Sh.So. 600.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faaliinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 425/bis

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Suleemaan C/qaadir;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0733171_0733172 kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 iyo Sh.So. 40.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Suleemaan C/qaadir sid aku cad warqadda lam. 6693 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0733171_0733172 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа kuna jirto gudd ahaan lacag dhan Sh.So. 90.000 kuna qoran magaca J.l eMaxamed Suleemaan C/qaadir.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа in ay siiso J.le Maxamed Suleemaan Cabdulqaadir lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 90.000 oo ah bedelka Jeegagga wareega ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.7.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 426

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Saciid Jaamac;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0632000 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliveed Laanta Boosaaso kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50 000 kuna qoran magaca J.le Axmed Cali Cismaan sida ku cad warqadda lam. 9230 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliveed Laanta Boosaaso;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1968

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0632000 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliveed Laanta Boosaaso kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Cali Cismaan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso in ay siiso J.le Axmed Saciid Jaamac lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan [illegible] ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaaji)

L. 427

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoraṭay Jaalle Sokorey Wardheere Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd lam. 6162 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanṭa Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 40,378.23 kuna qoran magaca J.le Sokorey Wardheere Aadan sida ku cad warqadda lam. 0057 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortament$_O$) Buug Kayd lam. 6162 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 40,378.23 kuna qoran magaca J.le Sokorey Wardheere Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir in ay siiso J.le Sokorey Wardheere Aadan lacagta cadadeedu ṭahay Sh So. 40 378 23 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 16 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inṭa ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 428

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Mire Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha Wardhiigley iyo 2aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1,000.000 kuna kala qoran magacyada J.le Maxamed Mire Aadan iyo J.le Axmed Cosoble Guuleed sida ku cad warqadda lam. 9040 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
0187302	500.000	Maxamed Mire Aadan	W/dhiigley
1217990	100.000	» » »	»
0173197	400.000	Axmed Cosoble Guuleed	2aad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha Wardhiigley iyo 2aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1,000.000 kuna kala qoran magacyada J.le Maxamed Mire Aadan iyo J.le Axmed Cosoble Guuleed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha Wardhiigley iyo 2aad in ay siiyaan J.le Maxamed Mire Aadan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1,000.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran, markay ka soo wareegmuddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 429

678/PIS

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qorţay Jaalle Jaamac Maxamed Warsame;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay]umeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna jirţo guud ahaan lacag dhan Sh.So. 241.000 kuna qoran magaca J.le Jaamac Maxamed Warsame sida ku cad warqadda lam. 19433 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo;

J.W.Lr.	Sh So.	Magaca ku qoran	Laanta
1039965	100 000	Jaamac Maqamed Warsame	C/gaabo
1039966	100 000	» » »	»
0669169	41 000	» » »	»

HADDUU ARKAY: Qod 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUUeeXEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna jirţo guud ahaan lacag dhan Sh.So. 241.000 kuna qoran magaca J.le Jaamac Maxamed Warsame.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo in ay siiso J.le Jaamac Maxamed Warsame lacagta cadadeedu ţahay Sh.So. 241.000.00 ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yaryn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishorţaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 430

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU AMMAY: Arjiga uu soo qoray Saalic Hamed Nuur Abuukar;

HADDUU HAGELIYEY: In ay iumeeri 2 jeeg War. iam. 0009209-0004900 laga saiiecyey Bangiga Ganacsiga iyo Kay-uka Soomaaliyeed Laamaha 1/Hargeysa iyo Berbera kuna kala jiro lacag dhan Sh.So. 100.000 iyo Sh.So. 110.000 kuna kala qoran magacyada J.le Axasan Cilmi Cobow iyo J.le Aa-mina Maxamed Caraale sida ku cad waryaaqa iam. 9999 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayuka Soomaaliyeed;

HADDUU ARRAY: Qod. 09 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortament) jeegagga War. iam. 0009209-0004900 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayuka Soomaa-liyeed Laamaha 1/Hargeysa iyo Berbera kuna jiro guud ahaan lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna kala qoran magacya-da J.leAxasan Cilmi Cobow iyo J.le Aamina Maxamed Caraa-le.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1/Hargeysa iyo Berbera in ay siiyaan J.le Axmed Nuur Aduu kar lacagta cadaadeedu tahay Sh.So. 260.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto mudda aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu qaabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii in ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabduljaahi Axmed Xaashi)

L. 431

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Nuur Axmed Xalane;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 9 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha hoos ku tilmaaman kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.700.000 kuna kala qoran magacyo kala duwan sida ku cad warqadda lam. 9442 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
0181857	500.000	Cumar Maxamed Geedi	Xarunta
0181858	500.000	» » »	»
1179909	100.000	» » »	»
1179310	100.000	» » »	»
1204433	100.000	Nuur Axmed Xalane	1/Xamar
1204434	100.000	» » »	»
1173267	100.000	Ibraahin Cali Faarax	W/dhiigley
1217710	100.000	Axmed Maxamuud Aadan	»
1217881	100.000	Mire Cali Cadoow	»

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUUeeXEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku tilmaaman kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 1.700.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku qoran in ay siiyaan J.le Nuur Axmed Xalane lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.700.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarawn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug, ka dib:-

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Axmed Maxamuud oo Wakiil u ah Warasadii Marxuumad:- Maryan Daahir Hoori, uuna ku codsaday in loo cusboonaysiyo Jeegag Wareega oo ku qorraa Magaca Marxuumadda kor ku xusan oo lumay;

MARKUU ARKAY: Warqadda L. 114 ee 9.8.1988 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, ayna ku soo caddeeyeen Jiritaanka iyo lumista Jeegagga Wareega oo hoos ku taxan kuna qorraa Magaca Maryan Daahir Hoori;

MARKUU ARKAY: Qodobka 69aad ee Xeer-Sharci L. 2 soona baxay 9.9.1965kii.

WUXUU AMRAYAA

In la baabi'iyo Jeegaggii hore ee lumay oo ah kuwa la soo sheegi doono, looguna beddelo Jeegag cusub J.le Maryan Daahir Hoori oo u dhigma kuwii hore;-

J/W.Lr. 1141127 ay ku qoran tahay Sh.So. 100.000 Tr. 23.6.88
J/W.Lr. 1141128 ay ku qorn tahay Sh.So. 100.000 Tr. »
J/W.Lr. 1141124 ay ku qoran tahay Sh.So. 100.000 Tr. »
J/W.Lr. 1141126 ay ku qoran tahay Sh.So. 100.000 Tr. »
J/W.Lr. 0534329 ay ku qoran tahay Sh.So. 50.000 Tr. »

Ka dib markii Go'aanka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah, haddii aan muddadaas laga keenin wax is hor taag ah, waana in Jeegagga cusub oo la samayn doono gacanta loo geliyaa Jaalle Maxamed Axmed Maxamuud oo Wakiil u ah Warasadii Maryan Daahir Hoori oo Jeegagga hore lahayd.

Gaalkacyo, 25.8.1988

GUDDOOMIYAHA MAX. G/MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

L. 433

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi ii Geedi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha W/dhiigley iyo Gaalkacyo kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 136,800 kuna kala qoran magacyada J.le Cabdi Cilmi Barqadle iyo J.le Maxamuud Maxamed Geedi sida ku cad warqadda lam. 9440 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
1152601	100.000	Cabdi Cilmi Barqadle	W/dhiigley
0532883	36.800	Maxamuud Maxamed Geedi	G/kacyo

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 136.800.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku tilmaaman in ay siiyaan J.le Cabdi Cali Geedi lacag-[illegible]eedu tahay Sh.So. 136.800 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 434

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug, ka dib:-

MARKUU ARKAY: Arjiga Taariikhdiisu tahay 28.8.1988 oo uu soo qoṛtay Jaalle Xasan Siciid Xasan uuna ku codsaday in loo cusboonaysiiyo Jeeg Wareega oo uu yahay Lambarkiisu 0189584 Taariikh 16.8.198 oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Shaṛaad ee Xamar, kuna qoran magaca Shuuriye Cadow Colow, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 500.000 (Shanboqolkun);

MARKUU ARKAY: Warqadda Taariikhdeedu tahay 28.8.1988 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, oo lagu caddeeyey in Jeeggaasi jiray Sharci ahaanna ugu soo Wareegay Xasan Siciid Xasan, uuna ka lumay lagana sameeyey Baafin Guud;

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad Xeer-Sharci L. 2 soona baxay 9.9.1965kii.

WUXUU AMRAYAA

In Jeegga kor ku ṭilmaaman la baabi'iyo looguna beddelo J.le Xasan Siciid Xasan Jeeg cusub oo u dhigma kii ka lumay ka dib markii Amarkaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo wareegto muddo 30 maalmood ah haddii aan muddadaas wax is hoṛtaag ah laga keenin muddadaas, waana in Jeegga cusub gacanṭa laga geliyo Xasan Siciid Xasan amase cid wakaalad Sharci ah ka haysata.

Gaalkacyo, 29.8.1988

GUDDOOMIYAHA MAX. G/MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

L. 435

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Xaaji Nuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0665685 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Xaaji Nuur sida ku cad warqadda lam. 9294 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0665685 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Xaaji Iuur.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo in ay siiso J.le Maxame dXaaji Nuur lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 30.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran. markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabacо Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 436

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Faadumo Sh. Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran jaga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 117.500 kuna qoran magaca J.le Faadumo Sh. Axmed sida ku cad warqadda lam. 7971 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

J.W Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
0688990	50 000	Faadumo Sh. Axmed	Xarunta
0688989	50.000	» » »	»
0071270	17.500	» » »	»

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'ivo (Ammortamento) Jeegagga War ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliveed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 117 500 kuna qoran magaca J.le Faadumo Sh. Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga ivo Kaydka Soomaaliveed Laanta Xarunta in av siiso J.le Faadumo Sh. Axmed lacagta cadadeedu tahay Sh So 117 500 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka varayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 14.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 437

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Xasan Sadiiq;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0071269 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh. So. 17.500 kuna qoran magaca J.le Cabdullaahi Xasan Sadiiq sida ku cad warqadda lam. 7971 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0071269 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 17.500 kuna qoran magaca J.le Cabdullaahi Xasan Sadiiq.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Cabdullaahi Xasan Sadiiq lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 17.500 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 438

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE

Lr. Ord./595/88

GUDDOOMIYAHA MAX. G. J/HOOSE

HADDUU ARKAY: Codsiga Taariikhdiisu tahay 24.8.88 ee uu soo qortay J.le Ibraahim Haajir Sheekh oo Soomaali ah degen Kismaayo kuna saabsan lumidda Jeegga Wareega ee lam. 0744719 ee ay ku qoran tahay lacag dhan 100.000 Sh.So. ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Afmadoow Taariikh 3.8.88 kuna qoran magaciisa;

HADDUU ARKAY: Ogaysiiska Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Afmadoow ee lam. 197 ee ku saabsan Baafinta Jeegga Wareega ee lam. 0744719 ee ay ku qoran tahay lacag dhan 100.000 Sh.So. lagana sameeyey Laantaasi;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 DL. 9.9.65 N. 2.

WAXAA LA AMRAYAA

In dib loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee Lambarkiisu sare ku xusan yahay kadib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood oo ka bilaabanaysa maalinta lagu Shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda. Jeegga Wareega ee la samayn doono waa in lagu qoraa magaca J.le Ibraahim Haajir Sheekh gacantana laga saaraa isaga ama cid ka sidata Wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo mudda 30 casho ah ee aanu kor ku soo sheegnay.

Kismaayo, 25.8.1988

GUDD. MAX. G. J/HOOSE
(Dr. Maxamuud Axmed Faarax)

L. 439

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Aamina Ibraahim Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu jumay Jeeg War. Lam. 0199404 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 400.000 kuna qoran magaca J.le Aamina Ibraahim Xasan sida ku cad warqadda lam. 9639 ka soo baxday Xis-Guud ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

• In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0199404 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 400.000 kuna qoran magaca J.le Aamina Ibraahim Xasan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J.le Aamina Ibraahim Xasan lacagta cadaddeedu tahay Sh.So. 400.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Waraaqa Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 31 8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 440

IIB MA GALO

FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho 25ka Sebt. 1988 L. 1 r 9

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER-SHARCI L. 9 ee 18 Agoosto 1988, Kordhin Mushaharka iyo Gunnada Shaqaalaha Dawladda. Bog; 692

XEER MADAXWaaYNAHA JDS L. 49 ee 15 Agoosto 1988, Kordhinta Saamiyada Dawladda JDS ee Bankiga Adduunka. » 693

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 50 ee 20 Agoosto 1988,

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 51 ee 17 Luulyo 1988, Magacaabid Nootaayo. » 695

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 52 ee 15 Agoosto 1988, Magacaabid Nootaayo. » 696

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 20 ee 17.8.1988, Aqoonsi Urur Samafal Caritas Soomaali. » 697

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 17 ee 14.8.1988, Aqoonsi Markaska Islaamka Geeska Afrika. » 698

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN SGA.RSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.9.88, Lumid Jeeg War. L. 1260170 ku qoran Faaduma Cabdullaahi Saciid L. 441 » 699

MAXKAMADDA G. BANAADIR 25.8.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Maxamed Cawaale Fariid L. 442 » 700

MAXKAMADDA G. BANAADIR 4.9.38, Lumid Jeeg War. L. 0193023 ku qoran Xuseen Axmed Shabaab L. 443 » 701

MAXKAMADDA G. BANAADIR 5.9.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Faysal Xasan Cali L. 444 » 702

MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.9.88, Lumid Jeeg War. L. 0118105 ku qoran Xaawo Axmed Maxamuud L. 445 » 703

MAXKAMADDA G. BANAADIR 11.9.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdullaahi Ahmed Sh. Muuse L. 446 » 704

MAXKAMADDA G. SOOL, 118.1988, Lumid 67 Jeeg War. ku qoran Axmed Xasan Saal L. 448 » 706

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.9.88, Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Cusmaan Cali Maxamed L. 449 » 711

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.9.88, Lumid Buug Kayd L. 4003 ku qoran Maxamed Nuuraani Maxamuud L. 450 » 712

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.9.88. Lumid Jeeg War. L. 1084362 ku qoran Warsame Muumin Cumar L. 451 » 713

MAXKAMADDA G. BANAADIR 18.9.88. Lumid Jeeg War. L. 0373125 ku qoran Jeylaani Munye Qulateen L. 452 » 714

MAXKAMADDA G. BANAADIR 19.9.88. Lumid Jeeg War. L. 0722833 ku qoran Aamina Jaamac Nuur L. 453 » 715

MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.9.88, Lumid Jeeg War. L. 1209567 ku qoran Maxamed mar L. 455 » 616

MAXKAMADDA G. BANAADIR 8.9.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran X. Dahabo Xersi Cu- Xasan Barre L. 454 » 617

Xeer_Sharci lambar 9, ţaariikh 18.8.1988 Kordhin mushaarka iyo gunnada Shaqaalaha Dawladda.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida degdegga ah ee loo qabo in tallaabo laga qaado daryeelidda nolosha Shaqaalaha Dawladda ee Rayidka iyo Ciidammada, sarena loo qaado awooddooda dhaqaale;

MARKUU TIXGELIYEY: In sidoo kale ţallaabo middaas la mid ah laga qaado macaashka ay qaataan Hawlgabayaashu;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Lacagţa;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERIYEY

Xeer_sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Mushaarka iyo gunnada Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda iyo Hay'adaha raacsan waxaa la krodhiyey 100% (boqolkiiba_boqol).

2. Mushaarka iyo gunnada Ciidammada Qalabka Sida waxaa la kordhiyey 50% (boqolkiiba_konton), qiimaha raashinka la siiyana waxaa la kordhiyey 100% (boqolkiiba_boqol).

Qod. 2aad

Macaashka Hawlgabavaasha Sivaasiviinta ah, Shaqaalaha ravidka ah ee Dawladda iyo Ciidammada Qalabka Sida waxaa la kordhiyey 100% boqolkiiba_boqol).

Qod. 3aad

Kororsiimadan waxay ka billaabanaysaa 1da Luulyo 1988.

Qod. 4aad

Xeerkan sharci waxa uu dhaqan gelavaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuurivadda Dimoqaraadiga Soomaaliva, waxaana lagu soo saaravaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuurivadda, isagoo loo gudbin doono Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 18.8.1988

Xeerka Madaxweynaha JDS Lr. 49 ee 15.8.1988, Kordhinta Saamiyada Dawladda JDS ee Bankiga Adduunka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Go'aannada Golaha Guddoomiyeyaasha Bankiga Adduunka (IBRD) lambar 395 iyo 410 ee 30ka Agoosto 1984, iyo 19ka Maajo 1986, kuna saabsan kordhinta Saamiga Rasumaalka Bankiga Adduunka;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la kordhiyo Saamiyada ay ku leedahay Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Rasumaalka Bankiga Adduunka;

MARKUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

DHEGEYSTAYNA: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay kordhisay Saamiyada ay ku leedahay Rasumaalka Bankiga Adduunka si waafaqsan faqradaha 3 iyo 4 iyo faqradaha 4 iyo 5 ee go'aanka Golaha Guddoomiyeyaasha lambar 395 iyo 410 ee isla Golahaas, soo wada baxay 30ka Agoosto 1984 iyo 19ka Maajo 1986.

Qod. 2aad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda waxaa awood loo siiyey inuu ka qaybgalka kordhinta Saamiyada Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku wargeliyo Guddoonka Bankiga Adduunka, qaadana tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah dhaqangelinta ka qaybgalka.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa isla maanta waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15.8.1988

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 50 ee 20 Agoosto 1988, Magacaabid Nooţaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lr. 8 ee 15.2.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.1962 kuna saabsan hawsha Nooţaayada;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee Sharciga lr. 7 ee 2.2.1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS inuu si ţoos ah u magacaabo Noţaayo qofkii mudan;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinţa.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Dr. Cumar Colaad Cabdi waxaa loo magacaabay Noţaayo, wuxuuna hawshiisa Noţaayenimo ku fulinayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 20 Agoosto 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 51 ee 17 Luulyo 1988, Magacaabid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobkiisa 82aad;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 8 ee 15.2.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.62 kuna wada saabsan haboynta hawlaha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 7 ee 2.2.1966 ee ku saabsan Hiimaada Nootaayada;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo sacda:

Qod. 1aad

Ayadoo la tixgelinayo Qodobka 2aad ee Sharci lr. 7 ee soo baxay 2.2.1966, taga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo Xeerkan waxaa lagu magacaabayaa Nootaayo Muqdisho: J.le Dr. Cabdulqaadir Maxamed Faarax iyo J.le Dr. Maxamed Xuseen Nuur.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17 Luulyo 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 52 ee 15 Agoosto 1988, Magacaabid Nooţaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobkiisa 82aad;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 8 ee 15.2.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.62 kuna wada saabsan haŋeynţa hawlaha Nooţaayaga;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 7 ee 2.2.1986 ee ku saabsan minnadda Nootaayada;

ISAGOO TIXGELIYEY Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo sacda:

Qod. 1aad

Ayadoo la ţixgeļinayo Qodobka 2aad ee Sharci lr. 7 ee soo baxay 2.2.1986, laga bilaabo ţaariikhda uu dhaqan galo Xeerkan Jaallaha magaciisa hoos ku qoran waxaa lagu magacaabay Nootaayo Xamar, JAALLE MAXAMUUD CARTAN CALI.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinţa Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15 Agoosţo 1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 20 ee 17.8.88, Aqoonsi Ururka Samafalka CARITAS SOMALIA.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay Abuurista Ururkaa noocani ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka Samafalka CARITAS SOMALIA oo ah urur samafal, ujeeddadiisu tahay Taageeridda dadka Saboolka ah, Tabobarinta xagga Xirfadaha iyo Horumarinta Mashaariicda.

Qod. 2aa d

Ururku wuxuu saldhiggiisa noqonayaa magaalada Muqdisho.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

Muqdisho, 17.8.1988

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacaadle)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 21 ee 16 Agoosto 1988, Aqoonsi Markaska Islaamka Geeska Afrika.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARRAY: Dastuurka JDS;

ISAGOO ARRAY: Sharciga Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARRAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga sooniaanyeed Lr. 37 ee 2.9.73;

ISAGOO ARRAY: Xeerka iyo Barnaamijka lagu dhisay Markaskaas;

ISAGOO TIXGELIYEY: inay lagama maarmaan tahay abuurista Markaska noocani an.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Markaska Islaamka ee Geeska Afrika oo an Markas Dhimi an, Ujeeddadiisu tahay Daahfurta Dhinta Islaamka, Baridda Ardayda Quraanka, Cilmiyada la xiriira Barashada Dhinta Islaamka iyo Afka Carabiga, iyo ku dhirri gelinta Dadweynaha Dhismaha Bulshyada iyo Masaajidada.

Qod. 2aad

Markaskani wuxuu saldhiggiisa noqonayaa Magaalada Muqdisho.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 14.8.1988

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacaadle)

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Faadumo Cabdullaahi Saciid;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1260170 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Mire Cabdullaahi Axmed sida ku cad warqadda lam. 9683 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1260170 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Mire Cabdullaahi Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Faadumo Cabdullaahi Saciid lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yaravn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 441

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Cawaale Fariid;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 1.500.000 kuna qoran magaca J.le Ismaaciil Cali Xasan sida ku cad warqadda lam. 9286 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

J.W.Lr.	Sh.So.	Taariikh	Magaca ku qoran	Laanta
158556	500.000	12.5.88	Ismaaciil Cali Xasan	Xarunta
158557	500.000	»	»	»
158558	500.000	»	»	»

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Lnta Xarunta kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So. 1.500.000 kuna qoran magaca J.le Ismaaciil Cali Xasan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliveed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Maxamed Cawaale Fariid lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 1.500.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran. markay ka soo wareegto muddo aan ka yaryn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.8.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 442

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Muxiyadiin Xasan Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0198023 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca J.le Xuseen Axmed Shabaab sida ku cad warqadda lam. 1620 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War Lr. 0198023 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca J.le Xuseen Axmed Shabaab.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J le Muxiyadiin Xasan Cali lacagta uadadeedu tahay Sh.So. 300 000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran. markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maal'inta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdulaahi Axmed Xaashi)

L. 443

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Feysal Xasan Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lam. 1246571-1246572 oo laga sameeyey Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Feysal Xasan Cali sida ku cad warqadda Lam. 9682 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Tr. 4.9.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 1246571-1246572 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna qoran magaca Fvesal Xasan Cali kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 200.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliveed in ay siiso J.le Feysal Xasan Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. oo kor xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 444

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Xaawo Axmed Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0118205 oo laga sameeyey Laanta B/Xaawo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 179.000, kuna qoran magaca J.le Xaawo Axmed Maxamuud, sida ku cad warqadda Lam. 9750 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0118205 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B/Xaawo kuna qoran magaca Xaawo Axmed Maxamuud kuna jirto lacag dhan Sh.So. 179.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta B/Xaawo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Xaawo Axmed Maxamuud lacagta cadaadeedu tahay Sh.So. 179.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho 6.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 445

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qorţay Jaalle Cabdullaahi Axmed Sh. Muuse;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lam. 1116343_1116344 laga sameeyey Laanţa Jamaame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Cabdullaahi Axmed Sh. Muuse sida ku cad Warqadda laga. 9969 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanţa Jamaame;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammoţamento) Jeegagga War. lam. 1116343_1116344 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanţa Jamaame kuna qoran magaca Cabdullaahi Axmed Sh. Muuse kuna jirţo lacag dhan guud ahaan Sh.So. 200.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Jamaame ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdullaahi Axmed Sh. Muuse lacagţa cadaadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo an bedelkii Jeegagga War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegţo muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishorţaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 446

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Daahir Xuseen Cadaawe;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga saaleeyey Laanta Iaad Hargeysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 650.000 kuna qoran magaca Daahir Xuseen Cadaawe, sida ku cad warqadda Lam. 10045 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa Tr. 13.9.88;

J.W.Lr.	Sh.So.	Taariikh	Magaca ku qoran	Laanta
0089675	450.000	19.5.88	Daahir Xuseen Cadaawe	1/Har.
0089696	200.000	19.5.88	» » »	»

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabiiyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Iaad Hargeysa kuna qoran magaca Daahir Xuseen Cadaawe kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 650.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Iaad Hargeysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Daahir Xuseen Cadaawe lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 650.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA SOOL LASCANOD

L,MGS/68/88,- Tr. 11.8.88,-

IYADOO ARAGTAY: Dacwadda kor ku qoran;

IYADOO ARAGTAY: Waxay ku saabsan tahay iyo Taararka aan Lambarka lahayn ee ka soo xay B.G.&.K.S. Laanta L/Caanood ee 9.8.88, 20.6.88 ahaana Baafin Jeegag Wareega oo lumay ayn jirtay Sh.So. 7.372.000/=;

IYADOO ARAGTAY: Qodobka 69aad Sharciga Lambarkiisu yahay 2 ee 9.9.1965;

IYADOO TIXGELISAY: Codsiga dib u cusboonaysiinta J.le Ganacsade Axmed Xasan Sal

(JEEGAGGA LUMAY)

1)	J/Wareega Lam; 0222860 - 861,	ee 5.5.88,	——	Sh.So. 100.000	Bulo-ba
2)	J/Wareega Lam; 0222876 - 882,	ee 5.5.88,	——	Sh.So. 350.000	»
3)	J/Wareega Lam; 0222894 - 896,	ee 5.5.88,	——	» 150.000	»
4)	J/Wareega Lam; 0221407	ee 22.2.88	——	» 50.000	»
5)	J/Wareega Lam; 0221878	ee 2.4.88	——	» 50.000	»
6)	J/Wareega Lam; 0222560	ee 28.4.88	——	» 50.000	»
7)	J/Wareega Lam; 0222631	ee 30.4.88	——	» 32.000	»
8)	J/Wareega Lam; 0221882	ee 2.4.88	——	» 50.000	»
9)	J/Wareega Lam; 0249343	ee 24.4.88	——	» 50.000	Dh/ma
10)	J/Wareega Lam; 0319618	ee 26.11.87	——	» 50.000	Boos

11) J/Wareega Lam; 0679893	ee 4.5.88	————————	»	50.000	Burco
12) J/Wareega Lam; 0679734	ee 2.5.88	————————	»	40.000	»
..) J/Wareega Lam; 0533076	ee 16.4.88	————————	»	40.000	»
14) J/Wareega Lam; 0625242	ee 28.2.88	————————	»	3.000	Boosaaso
15) J/Wareega Lam; 0629812	ee 23.4.88	————————	»	20.000	L/caanood
16) J/Wareega Lam; 075758	ee 13.3.88	————————	»	100.000	Boosaaso
17) J/Wareega Lam; 1055326	ee 20.2.88	————————	»	100.000	Gaalkacyo
18) J/Wareega Lam; 1136445	ee 9.5.88	————————	»	100.000	»
19) J/Wareega Lam; 0679860	ee 5.4.88	————————	»	50.000	Burco
20) J/Wareega Lam; 0641185	ee 29.2.88	————————	»	40.000	»
21) J/Wareega Lam; 0690752	ee 24.3.88	————————	»	30.000	2/Xamar
22) J/Wareega Lam; 0222707	ee ———	————————	»	30.000	Boosaaso
23) J/Wareega Lam; 0004715	ee 20.4.88	————————	»	120.000	Berbera
24) J/Wareega Lam; 0093170	ee 5.5.88	Caasha Diiriye Raage	»	180.000	Burco
25) J/Wareega Lam; 0093162	ee 5.5.88	» » »	»	180.000	»
26) J/Wareega Lam; 1135337	ee 25.4.88	» » »	»	100.000	Gaalkacyo
27) J/Wareega Lam; 1101663	ee 7.5.88	Xasan Nuur Ibraahin	»	100.000	Berbera
28) J/Wareega Lam; 1100710	ee 17.4.88	C/qaadir Xaaji Maxamed	»	100.000	Burco
29) J/Wareega Lam; 1120534	ee 2.4.88	Maxamed Axmed Cilmi	»	100.000	11/Xamar

30) J/Wareega Lam; 1038473	ee 25.4.88	Max'uud Saalax Max'uud	»	100.000	C/gaab
31) J/Wareega Lam; 1002379	ee 28.3.88	Axmed Max'uud Maxamed	»	100.000	5/Xama
32) J/Wareega Lam; 0962802	ee 3.3.88	Maryan Sh. Maxamuud	»	100.000	B/Wayn
33) J/Wareega Lam; 1136176	ee 5.5.88	[illegible] Max'uud Wahaabi	»	100.000	Gaalkacy
34) J/Wareega Lam; 0160166	ee 15.5.88	Faarax Aw Yaasiin	»	500.000	W/dhiigle
35) J/Wareega Lam; 0160168	ee 15.5.88	» »	»	163.000	»
36) J/Wareega Lam; 0065200	ee 2.5.88	Cumar Aadan Xasan	»	200.000	Hodai
37) J/Wareega Lam; 1136936_943	ee 19.5.88	Max'ed Ibra. Cabdile	»	800.000	Gaalkacy
38) J/Wareega Lam; 1152910	ee 5.5.88	Caamir Nuur Faarax	»	100.000	W/dhiigle
39) J/Wareega Lam; 1136570	ee 12.5.88	Maxamed Axmed Cali	»	100.000	Gaalkacyo
40) J/Wareega Lam; 0241557	ee 16.5.88	C/qaadir Ciise Aadan	»	100.000	Jawha
41) J/Wareega Lam; 1136473	ee 12.5.88	Cali Cabdillaahi	»	100.000	Gaalkacy
42) J/Wareega Lam; 1136505	ee 11.5.88	C/kariin Axmed Wahaabi	»	100.000	Gaalkacy
43) J/Wareega Lam; 1136573	ee 12.5.88	Maxamed Axmed Cali	»	100.000	Gaalkacy
44) J/Wareega Lam; 1136964	ee 19.5.88	Faarax Aw Yaasiin	»	100.000	»
45) J/Wareega Lam; 1136965	ee 19.5.88	» » »	»	100.000	»
46) J/Wareega Lam; 0531721	ee 5.4.88	C/llaahi Aadan Isaaq	»	50.000	»
47) J/Wareega Lam; 0533693	ee 19.5.88	Maxamed Ibrahin C/le	»	40.000	»
48) J/Wareega Lam; 0533694	ee 19.5.88	» » »	»	30.000	»

49) J/Wareega Lam; 0962704	ee 16.5.88	Max'ed Saleban Ismacil	»	100.000	B/Wayne
50) J/Wareega Lam; 0963305	ee 27.4.88	Max'ed C/laahi Xasan	»	100.000	»
51) J/Wareega Lam; 0844023	ee 22.8.87	[illegible]de Xaaji Diiriye	»	100.000	3/Xamar
52) J/Wareega Lam; 1136566	ee 12.5.88	Axmed Guuleed Biixi	»	100.000	Gaalkacyo
53) J/Wareega Lam; 0002803	ee 5.5.88	Cumar Cali Jaamac	»	30.000	Badhan
54) J/Wareega Lam; 0012693	ee 10.4.88	Max'ed C/laahi Aadan	»	20.000	Boosaaso
55) J/Wareega Lam; 0679545	ee 26.4.88	Cabdi Cumar Xasan	»	50.000	Burco
56) J/Wareega Lam; 0623673	ee 23.1.88	Max'ed Cali Maxamed	»	5.000	Boosaaso
57) J/Wareega Lam; 0047778	ee 2.5.88	Cabdiraxmaan Abshir	»	500.000	W/dhiigley
58) J/Wareega Lam; 0047947	ee 7.5.88	» »	»	500.000	»
59) J/Wareega Lam; 0662641	ee 2.5.88	Max'ed Nuur Tifaw	»	50.000	Marka
60) J/Wareega Lam; 0695225	ee 8.3.88	Abuukar Axmed Isaaq	»	50.000	1/Xamar
61) J/Wareega Lam; 0606972	ee 22.2.88	Max'ed Cali Jaamac	»	50.000	2/Hargay.
62) J/Wareega Lam; 0657092	ee 20.2.88	Maxamed X. Xasan	»	50.000	Xarunta
63) J/Wareega Lam; 0093169	ee 5.5.88	Caasha Diiriye Raage	»	200.000	Burco
64) J/Wareega Lam; 0679502	ee 25.4.88	———————	»	50.000	Gaalkacyo
65) J/Wareega Lam; 0625161	ee 24.2.88	———————	»	5.000	Boosaaso
66) J/Wareega Lam; 0625579	ee 14.2.88	———————	»	4.000	»
67) J/Wareega Lam; 0529106	ee 6.3.88	———————	»	10.000	Garoowe

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo Jeegagga Wareega ee sare ku xusan Lambarradoodu ayna ku jirto Lacagta cadkeedu yahay Sh.So. 7.372.000/=, kuwaas oo lala baxay iyaga iyo Khasnaddii ay ku jireenba Burco.

WUXUUNA FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Xamar u beddelo Axmed Xasan Salaad oo ah Ganacsade Hantidaas laga dhacay una sameeyo kuwo la mid ah markay ka soo wareegto 30 casho ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda haddaan inta ka horraysa aan ishortaag laga keenin.

Laascaanood, 11 Agoosto 1988

KAALIYAHA MAXKAMADDA
(Maxamed Cumar Xaaji Cali)

GUDDOOMIYAHA MAX. G. SOOL
(Sayid Cumar Aadan Maxamed)

L. 448

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cusmaan Cali Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY. In ay dhumeen 4 Jeeg War. ee hoos ku qoran oo laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 205.000 kuna qoran magaca J.le Cusmaan Cali Maxamed sida ku cad warqadda lam. 5666 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta tr. 4.9.88;

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran			Laanta
0878170	100.000	Cusmaan	Cali	Maxamed	Xarunta
0548086	50.000	»	»	»	»
349416	45.000	»	»	»	»
748229	10.000	»	»	»	»

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L: 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee Lambarradoodu kor ku qoran yihiin oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xaruntа kuna qoran magaca Cusmaan Cali Maxamed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 205.000/=.

WUXUU XEERIYEY

Laanta Xaruntа ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cusmaan Cali Axmed Lacagta radaakeedu yahay Sh.So. 205.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafintа Fasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.9.1988

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Nuuraani Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd lam. 4003 oo laga sameeyey Laanta Q.X.G. ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 42.056 kuna qoran magaca Maxamed Nuuraani Maxamuud sida ku cad warqadda lam. 9811 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed tr. 8.9.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L: 2 ee 9.9.1962

WAXAA LA AMRAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka lam. 4003 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Afgooye kuna qoran magaca Maxamed Nuuraani Maxamuud kuna jirto lacag dhan Sh.So. 42.056/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Afgooye ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Nuuraani Maxamuud Lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 42.056 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 450

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARRAY: Arjiga uu soo qoray Jaalle Murnai Xaaji Suuli;

HADDUU FIIGELIYEY: In uu dhulmay jeeg War. lam. 10062062 oo laga bannaeyey Laanta Kismaayo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayuka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Warsame Muumin Cumar sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayuka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo dr. 7.9.00;

HADDUU ARRAY: Qod. 69 ee Sharciga L: 2 ee 9.9.1962
WUXUU XEERIYEY

in la daabbiyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 10c4362 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kayuka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna qoran magaca Warsame Muumin Cumar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Kismaayo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo maaliyeed in ay siiso J.le Murnai Xaaji Suuli lacagta cadaadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 451

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Karim Sh. Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0373125 oo laga saaleeyey Laanta Baraawe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jiro lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran magaca Jeylaani Munye Qulaateen sida ku cad warqadda lam 9965 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baraawe [r. 11.9.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0373125 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baraawe kuna qoran magaca Jeylaani Munye Qulateen kuna jiro lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Baraawe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo maaliyeed in ay siiso J.le Cabdikariin Sh. Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 452

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Aamina Jaamac Nuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0722833 oo laga sameeyey Laanta Gariiwe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 26.000 kuna qoran magaca Aamina Jaamac Nuur sida ku cad warqadda lam. 10054 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Garoowe tr.———;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0722833 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Garoowe kuna qoran magaca Aamina Jaamac Nuur kuna jirto lacag dhan Sh.So. 26.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Garoowe ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo maaliyeed in ay siiso J.le Aamina Jaamac Nuur lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 26.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 453

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Xasan Barre;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 1209567 oo laga sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Xasan Barre sida ku cad warqadda lam. 1625 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad tr. 4.9.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1209567 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qoran magaca J.le Maxamed Xasan Barre kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Xasan Barre lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daa baco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 454

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamuud X. Yuusuf Xersi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 Jeeg War. ee Lam. 1121698-1121699 oo laga sameeyey Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna kala jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca X. Dahabo Xersi Cumar sida ku cad waraadda lam. 9684 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad tr. 29.8.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. 1121698-1121699 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga ivo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qoran magaca Dahabo Xersi Cumar kuna jirto lacag dhan guud ahaan Shs. 200.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamuud X. Yuusuf Xersi lacagta cadadkeedu yahay Sh. So. 200 000 oo ah bedelkii Jeegagga War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yaraynn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 8.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 455

IIB MA GALO

FAAFIN RASMÌ AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 1da Oktoobar 1988, L. 10

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 19 ee 6 Sebt. 1988, Isbedelka 8aad ee Miisaaniyadda Dawladda 1988. Bog; 724

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 53 ee 28 Maajo 1988, Abuurid Degmo Cusub » 729

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 54 ee 18 Abr. 1988, Abuurid Degmo Cusub. » 730

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 22

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 23 ee 5.4.88, Magacaabid Gud/yaal Degmo iyo Xil ka qaadid Gud/ye Degmo. » 732

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 23.8.88, Lumid J/War. L. 0189959 ku qoran Axmed Xaashi Xasan L. 458 » 733

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR 21.9.88, Lumid J/War. L. 0954980 ku qoran Axmed Yuusuf Axmed L. 459 » 734

MAXKAMADDA G. BANAADIR 18.9.88, Lumid Buug Kayd L. 2253 ku qoran Ducaale Maxamed Xersi L. 460 » 735

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.9.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Maxamuud Cali Saciid L. 461 » 736

MAXKAMADDA G. BANAADIR 5.9.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Xaaji Nuur Qanyare L. 462 » 737

MAXKAMADDA G. BANAADIR 22.9.88, Lumid Jeeg War. L. 0669320 ku qoran Saciid Faarax Maxamuud L. 463 » 738

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.9.88, Lumid Jeeg War. L. 0181745 ku qoran Faarax Maxamed Maxamuud L. 464 » 739

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.9.88, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Xaamud Maxamed Xuseen L. 465 » 740

MAXKAMADDA G. BANAADIR 20.9.88, Lumid

MAXKAMADDA G. BANAADIR 25.9.88, Lumid Jeeg War. L. 0175076 ku qoran Xasan Weheliye Fiidoow L. 467 » 742

MAXKAMADDA G. SH/DHEXE 4.8.88 Lumid Buug Kayd L. 2827 ku qoran Saciid Nuur Faarax L. 468 » 743

MAXKAMADDA G. BANAADIR 20.9.88. Lumid 3 Jeeg War. ku qoran C/llaahi Yuusuf Cabdi L. 469 » 744

MAXKAMADDA G. BANAADIR 29.9.88 Lumid 2 Jeeg War ku qoran Cabdicasiis Axmed Mahdi L. 470 » 745

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.9.88 Lumid Jeeg War. L. 0166026 ku qoran Cibaado Cali Diirshe L. 471 » 746

MAXKAMADDA G. BANAADIR 27.9.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Saciido Cilmi Faarax L. 472 » 747

MAXKAMADDA G. SANAAG 29.8.88, Lumid Jeeg War. L 0668162 ku qoran Saciid Xuseen Faarax L. 473 » 748

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI Lambar 19 Taariikh Isbeddelka 2aad ee Miisaani yadda Dawladda 1988.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogta da ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday is beddelka 2aad ee Miisaaniyadda Dawladda ee 1988 sida ku tilmaaman Lifaaqa (A) ee Sharcigan.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6 Seb. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre.

WASAARADDA MAALIYADDA IYO LACAGTA

Jaalle Guddoomiye,

Jaallayaal, Taariikh 18.8.1988

Waxaa sharaf weyn ii ah inaan idiin soo hor_dhigo Is_beddelka 2aad ee Miisaaniyadda Ku Talagalka sannadka 1988, oo waafaqsan Sharciga Lr. 2, Qodobkiisa 16aad, taariikh 29.12.1961.

Intaan u guda gelin arrimaha sababay Is_beddelkaasi iyo heerka uu gaarsiisan yahay, waxaan halkaani hoose idiin kugu muujinayaa Shax dhab ahaantii tilmaamaysa dakhliga gudaha soo xerooday iyo kharajka baxay ilaa 15.8.1988, iyadoo la barbar dhigaayo isla taariikhdaas ee sannadkii 1987.

Taariikh	Dakhli	%	Kharaj	%
15 8 1988	8.035	—	7.586	—
15.8.1987	4.456	—	10.167	—
	+ 3.579	+ 80.3	— 2.581	— 34.0

Shaxda waxay si cad u muujinaysaa kororsiimada lixaadka leh ee dakhliga gudaha (80%), iyadoo weliba ay istaageen badeecadihii lagu keeni jiray Barnaamijyada CIP_da iyo Xaraashka oo aan ka heli jirnay canshuuro fara badan. Waxaa kaloo xusid mudan in Dakhliga soo xarooday ilaa 15 8.1988 ee dabmmaa Sh.So 8 035 Milyan uu ka badan vahay dakhliga la helay ilaa 31.10 1987 oo ahaa Sh.So. 7 474 Milyan, farqiga dheeriga ahna uu yahay Sh.So. 561 Milyan.

Dhinaca kale kharaika caadiga ah isaguna wuxuu tilmaamayaa tashiil lixaad leh (Hoos u dhac 34%), iyadoo laga dhawray wixii kharaj ee laga maarmaan ah.

Inkastoo guul weyn laga gaaray isu_dheelitirka dakhliga iyo kharajka, haddana waxaa hubaal ah in haddii uusan tashiilkan Miisaaniyadeed jiri lahayn uu sicir_bararku si lixaad leh uga sare mari lahaa heerka uu maanta marayo, gii

Waxaa xusid mudan in sicir-bararka maanta dalka Soomaaliya jira loo nisbayn karo Naqdigii (Liquidity) faraha badnaa ee dalka lagu soo fatahay sanooyinkii la soo dhaafay

ISBEDDELKA 2aad EE MIISAANIYADDA 1988

Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda waxaa loogu tala galay in Miisaaniyaddu isu dheelli-tirto (Dakhli iyo Kharaj) Sh.So. 15.8 Bilyan, ku noqoshada 2aad waxaa loogu talagalay in Miisaaniyaddu ay isku xirto Sh.So. 19.4 Bilyan. Marka lays barbar dhigo ku noqoshadii 1aad iyo 2aad waxaa muuqaneysa in Miisaaniyadda ay ku kororday Sh.So. 3.5 Bilyan taasoo u dhiganta kororsiimo gaaraysa Sh.So. 22.7%.

Sababta keentay kororsiimadaan dhinaca kharajka waxay tahay: Isbeddelka Sarrifka Shilinka oo saameeyey: Bixinta Deymanka Dibadda, Kharajka Safaaradaha, ka qayb galka Ururrada Caalamiga, Safarrada Dibadda iyo Iibsiga Gudaha.

Kororsiimadaasi waxaa kaloo ay ka timid mushahaarka iyo gunnada Shaqaalaha oo la kordhiyey 100%, mushahaarka iyo gunnada Ciidammada oo la kordhiyey 50% iyo raashinka la siiyo oo la kordhiyey 100%. Sidoo kale, iyadoo la daba joogo baaqii Madaxweynaha JDS ee 1da Maajo 1987 kuna faraysey Dowladda in xuduudda H/Gab-qaatayaasha lala mid dhigo kororsiimadii ay heleen waqtigaas Shaq. Dowladda, hase yeeshee, aaney suura-gelin ilaa maanta, waxaa noo farxad ah annagoo fulineyna baaqaas in xuquuqda H/Gab-qaatayaasha loo kordhiyey 100%. Maadaama Siyaasiviinta Qaranka ay haysaan xilal culus waxna la bidayo waxaan doorbidnay in gunnadooda lagu habeeyo heerka macilshadda. (Eeg Lifaaqa).

Kharajka loogu tala galay Mashaariicda Horumarineed oo ahaa Sh.So. 3.8 Bilyan waxaa la gaarsiiyey Sh.So. 4.3 Bilyan taasoo u dhiganta kororsiimo gaaraysa 13%, kororsiimadaasi oo ka timid Mashaariic cusub oo lagu kordhiyey Miisaaniyadda iyo kuwo kale oo lacagtii hore loogu qoondeeyey sare loo qaaday.

Kharajka dheeriga ah ee ka yimid Is-beddelka 2aad waxaa lagu daboolayaa dakhli la filaayo inuu ku kordho ugu

xay ka soo abuurmayaan, iyadoo la sii xoojinaayo habka iyo kontroolka canshuur uruurinta, la-dagaalanka Kontrobaanka iyo iyadoo la soo rogey canshuuro cusub lana kordhiyey kuwii hore u jirey qaarkood.

Waxaa kale oo noo sharaf ah inaan idiinla socodsiiyo in ay tahay gabagabo guddi loo xilsaaray dib u habeynta canshuuraha, taasoo barnaamijkii aan la galnay Hay'addaha Caalamiga ah ay waafaqeen aadna u soo dhaweeyeen kaalmo farsamo ahna ay ka geysteen, taasoo markii ay ku habboonaato aan Golaha horgeyn doono.

Waxaan halkaan hoose ku muujineynaa Shax koobaysa is-beddelka 2aad ee Miisaaniyadda dhinac dakhli iyo kharajba:-

(Sh.So. Milyan)

	Ku Talagal 1988	Isbedelka 1988	Ku Noqosho
Dakhliga Guud	15.818	3.556	19.374
— Gudaha	12.000	3.056	15.056
— Horumarinta M/riicda	3.818	500	4.318
Kharajka Guud	15.818	3.556	19.374
— Caadiga	12.000	3.056	15.056
— Horumarinta	3.818	500	4.318

Ugu dambayntii Jaalle Guddoomiye, Jaallayaal waxaan idiinka codsanaynaa inaa naga oggolaataan Isbeddelka 2aad ee Miisaaniyadda 1988.

WASIIRKA

(Dr. Cabdiraxmaan Jaamac Barre)

KORORSIIMADA MUSHAHARKA SIYAASIYIINTA

1. Madaxweynaha	1X200.000X6	=	1.200.000
2. Wasiirka 1aad ee G/Wasiir.	1X 70.000X6	=	420.000
3. K/Xigeenka Wasiirka 1aad	3X 65.000X6	=	1.170.000
4. Wasiirro	27X 60.000X6	=	9.720.000
5. Wasiir Ku_xigeen	25X 55.000X6	=	8.250.000
6. Kaaliyaha Xog-Guud XHKS	1X 62.000X6	=	372.000
7. Gud. Hog. X.H.K.S.	12X 60.000X6	=	4.320.000
8. Gud.K/Xig.Hog. X.H.K.S.	20X 55.000X6	=	6.600.000
9. Gud.Golaha Shacbiga	1X 70.000X6	=	420.000
10. Gud.K/Xig.Golaha Shacbiga	2X 62.000X6	=	744.000
11. Gud.Guddiga Joogtada Golaha Shacbiga	6X 60.000X6	=	2.160.000
12. Xubnaha Guddiga Joogtada Golaha Shacbiga	5X 55.000X6	=	1.650.000
13. Gud. Ururada Bulshada	3X 55.000X6	=	990.000
14. Gud.K/Xig.Urura. Bulsahada	4X 50.000X6	=	1.200.000
15. La_Taliyaha M.J.D.S. Xagga Sharciga	1X 55.000X6	=	330.000
	Isugeyn	=	39.546.000

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 53 ee 28.5.88 Abaarid Degmo Cusub.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 82/14 ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad, Xubinta 5aad ee Sharci Lr. 6 ee 12.2.80 ee Golayaasha Shacbiga Deegaanada, Maamulka Gobollada iyo Regmooyinka.

ISAGOO AQOONSADAY: Inay lagama maarmaan tahay in Beesha Balanbale ay noqoto Degmo.

ISAGOO TIXGELIYEY: Soo Jeedinta Wasiirka Arr. Gudaha

ISAGOO DHEGEYSTAY: Talada Golaha Wasiirada.

WUXUU XEERIYAY:

Qodobka 1aad

Waxaa Degmo loo Aqoonsaday Beesha Balanbale.

Qodobka 2aad

Degmada Cusub ee Balanbale waxay hoos imaanaysaa Gobolka Galgaduud.

Qodobka 3aad

Soohdimaha Degmada Balanbale dib ayaa loo habeynayaa.

Qodobka 4aad

Waxaa la baabi'iyey Xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socan karin Xeerkan.

Qodobka 5aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 28.5.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 54 ee 18.4.88 Abuurid Degmooyin Cusub.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ANKAY: Qodobka 82/14 ee Dastuurka J.D.S.
ISAGOO AMKAY: Sharci Lr. 50 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Waxaaraada Arrimaha Gudaha.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 2 ee Sharci Lr. 6 ee 12.2.80 ee Golayaasha Degaanada, Maamulka Gobolada iyo Deg/nka

ISAGOO AQOONSADAY: Inay lagama maarmaan tahay in Beesha Dhahar iyo Laas Qoraa ay noqdaan Deg/yin.

ISAGOO TIXGELIYEY: Soo Jeedinta Wasiirka Arr. Gudaha
ISAGOO DHEGEYSTAY: Talada Golaha Wasiirada.

WUXUU XEERIYAY:

Qodobka 1aad

Waxaa Degmooyin loo aqoonsaday Beesha Dhahar & L/Qoray

Qodobka 2aad

Degmooyinka Cusub ee Dhahar iyo Laas Qoray waxay hoos Imaanayaan Goboolka Sanaag.

Qodobka 3aad

Soohdimaha Degmooyinka Dhahar & Laas Qoray dib ayaa loo habeynayaa.

Qodobka 4aad

Waxaa la baabi'iyay Xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin Xeerarkan.

Qodobka 5aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madax weynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 18.4.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre.

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA L. 22 ee 5.3.88 Xil ka qaadid Gud/ye Degmo iyo Magacaabid Gud/ye Degmo .

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Qodobka 94aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 13aad ee Sharciga Lr. 6, ee 12.12.80, ee Golayaasha Shacbiga Deegaanka.

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30, ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

ISAGOO TIXGELIYEY: Warbixinta Wasiir Ku xigeenka ee Taariikhdeedu tahay 1.3.88, ee la xiriirta maamulka Degmada Baardheere.

ISAGOO AQOONSADAY: Inay lagama maarmaan tahay in xilka laga qaado Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Degaanka Degmada Baardheere xilgudasho la'aan awged.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qodobka 1aad

Waxaa la Guddoonshay in Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Degaanka Degmada Baardheere J/le Deerow Sivaax Ilix laga qaado xilka Guddoomiyenimada, xilgudasho La'aan awgeed. wuxuuna baaqi ku ahaanayaa Golaha Shacbiga Degaanka Degmada Baardheere.

Qodobka 2aad

Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Degaanka Deg. Baardheere, waxaa loo magacaabay J/le Baalle Axmed Ibraahim oo xubin ka ah Golaha Shacbiga Degaanka.

Qodobka 3aad

J/le Guddoomiye Ku xigeenka Golaha Shacbiga Degaanka Degmada Baardheere, waxaa loo daayey J/le Xasan Nuur Shidde.

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5.3.1888.

Wasiirka Arrimaha Gudaha.

Dr. Maxamed Cabdulle Bacadle.

Waan Aragnay ee Diiwaangelinay.

Diiwaanka Lr. 1. Bogga Lr. 22.

17/MAR. 1988.

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 23 ee 5.4.88, Magacaabid Guddoomiyeyaal Degmo.

UJEEDDO: Magacaabid Guddoomiyeyaal Maamul & Degmo.
ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.
ISAGOO ARKAY: Sharciga Shaqaalaha Dawladda Lr. 5 ee 2.2.1980.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 6 ee 12.2.80 ee Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka.
ISAGOO ARKAY: Talo soo Jeedinta Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERIYAY:

Qodobka 1aad

In Jaallayaasha hoos ku qoran loo kala beddelo sida Hoos ku qoran:

1. J/le Maxamed Cabdulle Cumar (Godone) oo ah Gudmaamul Gobolka Mudug waxaa loo beddelay Gudmaamul Gobolka Jubada Dhexe.

2. G/Sare Maxamed Xaaji Saciid oo ah Gudmaamul Gobolka Jubada Dhexe waxaa loo beddelay Gudmaamul Gobolka Shabeelaha Hoose.

3. J/le Cali Xaydar oo hadda ah Xoghayaha Xisbiga Gobolka Mudug waxaa loo magacaabay Guddoomiyaha Gobolka Mudug.

4. G/Sare Maxamed Cabdi Geelle oo ah Guddoomiyaha Maamulka Gobolka Hiiraan waxaa loo beddelay Gudmaamul Gobolka Bay,

5. G/Dhexe Cabdillaahi Cali Kooshin oo ah Gudmaamul Degmada Buulo Burte waxaa loo magacaabay Guddoomiyaha Maamulka Gobolka Hiiraan.

6. G/Dhexe Axmed Maxamed Saneey oo ah Gudmaamul Degmada Baardheere waxaa loo beddelay Deg. Jamaame.

7. J/le Buullo Maxamed Cabdi waxaa loo magacaabay

8. J/le Maxamuud Sheekh Xuseen oo ah Sarkaal ka tirsan Xarunta Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxaa loo Magacaabay Gudmaamul Degmada Berbera.

9. Dr. Xasan Warsame, Sarkaal ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudha waxaa loo magacaabay Gudmaamul Deg. Buulo,burti.

Qodobka 2aad

Jaalalayaashaasi Sare ku qoran, waxay xaq u leeyihiin Gunnada xil iyo guri oo lagu qaato jagada loo magacaabay Sharciguna u ogol yahay.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, marka uu soo saxiixo Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho, 5.4.1988.

Waan Aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaan Lr. Bogga Lr. 31
26/APR. 1988.
Hantidhowraha Guud.
Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

WASIIRKA W.M. IYO LACAGTA
(Dr. Cabdiraxmaan Jaamac Barre)

Wasiirka Arrimaha Gudaha.
Dr. Maxamed Cabdulle Bacadle.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Axmed Xaashi Xasan.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0180959 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xaruunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 300.000 kuna qoran magaca J/le Axmed Xaashi Xasan sida ku cad warqadda Lr. 9197 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xaruunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lam. 0180959 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xaruunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 300.000 kuna qoran magaca J/le Axmed Xaashi Xasan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Xaruunta in ay siiso J/le Axmed Xaashi Xasan lacagta cadeyntu tahay sh.so. 300.000 oo ah bedelkii J/Dar. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaa bo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J D S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 23.8.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 458

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Axmed Yuusuf Axmed.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 0954930 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed Laanta Dh/Mareeb kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca J/le Axmed Yuusuf Axmed sida ku cad warqadda Lr. 7483. ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0954930 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Dh/Mareeb kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca J/le Axmed Yuusuf Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb in ay siiso J/le Axmed Yuusuf Axmed lacagta cade yntu tahay sh.so. 100.000 oo ah bedalkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 21.9.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 459

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Ducaale Maxamed Xersi

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd lam. 2253 oo laga Saaxeeyey Laanta Wardhigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Kuna jirto lacag dhan Sh. So. 622.000 Kuna qoran magaca Ducaale Maxamed Xersi sida ku cad warqadda lam. 10250 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lr. 2253 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhigley kuna qoran magaca Ducaale Maxamed Xersi kuna jirto lacag dhan Sh.So. 622.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wardhigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Ducaale Maxamed Xersi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 622.000 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 460

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qoray Jaalle Maxamuud Cali Saciid;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0199610-0199611 oo laga saaleeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna kala jirto lacag dhan miisaniba Sh.So. 500.000 guud ahaan Sh. So. 1.000.000 kuna qoran magaca Maxamuud Cali Saciid sida ku cad warqadda lam. 10566 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0199610-0199611 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar kuna qoran magaca Maxamuud Cali Saciid kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 1.000.000.

WAXAA LA AMRAYAA

